Oregon Department of Early Learning and Care

Xeerarka

# XARUMAHA DARYEELKA CARRUURTA EE QOYSKA EE SHAHAADADA LEH

iyo

Xeerarka Guud ee

# DHAMMAAN XARUMAHA DARYEELKA CARRUURTA

Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka
Waaxda Ruqsada Daryeelka Carruurta
www.oregon.gov/DELC
1-800-556-6616
Luulyo 2025

**Xeerarka Maamulka ee Oregon (OAR) Cutubka 414**
**Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka**
**Waaxda Ruqsada Daryeelka Carruurta**

## ***Xeerarka Daryeelka Carruurta ee Qoyska ee Shahaadada haysta*, Qaybta 360**
## **Taariikhda Ansixinta: 12/11/2024**
## **Taariikhda uu Dhaqan galaayo: 07/01/2025**

iyo

## ***Xeerarka Guud ee Xarumaha Daryeelka Carruurta*, Waaxda 075**
## **Wuxuu dhaqan galayaa 12/7/2023**

Nuqulkaan buugga xeerka waxaa laga heli karaa webseedka Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka.Nuqullada dheeraadka ah waxaa la soo degsan karaa wakhtigii la doono.

PDF iyo nuqullada daabacan ee xeerarkaan ayaa laga yaabaa inaysan ku jirin isbadellada dhawaan la sameeyay. Fadlan booqo webseedka Xeerarka Maamulka ee Xoghayaha Gobalka Oregon si aad u hesho nuqulkii ugu danbeeyay ee xeerkaan.

Si aad u hesho xog dheeraad ah ama wararkii ugu danbeeyay, booqo: www.oregon.gov/delc

Su'aalo ma qabtaa? Iimeylka CCLD.Customerservice@delc.oregon.gov
Wac 1-800-556-6616

Waxaad xaq u leedahay adeegyada caawimaada luuqada iyo caawimaadda kale si bilaash ah. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ku baxaysa luuqadaada ama caawimaado kale, fadlan la xiriir Waaxda Ruqsadaha Daryeelka Carruurta oo aad ka wacayso lambarkaan 503-947-1400.

WAAXDA WAXBARASHADA IYO DARYEELKA DHALAANKA
CUTUBKA 414, QAYBTA 360

# Xeerarka Daryeelka Carruurta ee Qoyska ee Shahaadada haysta

## Liiska Mawduucyada


Liiska Mawduucyada ..... 2
414-360-0100 Qeexitaannada ..... 5
414-360-0110 Ujeedada ..... 11
414-360-0130 Hanaanka Codsiga ..... 11
414-360-0140 Bixinta Shahaadada ..... 13
414-360-0150 Hanaanka Shahaadada ..... 15
414-360-0160 Shardi Dhaafyada Xeerarka ..... 16
414-360-0200 Xeerarka ..... 17
414-360-0210 U diyaar Garoowga Khatarta iyo Gurmadka ..... 18
414-360-0220 Diiwaannada Carruurta ..... 20
414-360-0225 Talaallada ..... 21
414-360-0230 Ogolaanshiyaasha Waalidka ..... 21
414-360-0235 Imaatinka iyo Bixidda ..... 22
414-360-0240 Diiwaannada Daryeelaha ..... 22
414-360-0250 Diiwaannada Barnaamijka ..... 23
414-360-0255 Haynta iyo Helitaanka Diiwaanka ..... 24
414-360-0260 Agabka Loo Heli karo Dib U eegis ..... 25
414-360-0270 Ogeysiisyada ..... 26
414-360-0300 Shur' Guud ee Daryeel bixiyaha ..... 29
414-360-0310 Diiwaan gelinta Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda ..... 30
414-360-0320 Waajibaadka iyo Aqoonta Adeeg Bixiyaha ..... 32
414-360-0340 Waajibaadka iyo Aqoonta Kaaliyaasha ..... 34
414-360-0360 Mutadawiciinta ..... 35
414-360-0370 La qabsiga iyo Tababarka Hore ..... 35
414-360-0380 Tababarka Sanadlaha ah ..... 37
414-360-0385 Shuruudaha Tababarka ..... 37
414-360-0400 Carruurta ku Jira Daryeelka Iyo Saamiyada Daryeel Bixiyaha iyo Ilmaha ..... 38
414-360-0500 Kormeerka ..... 40
414-360-0510 Abuurista Jawiga Caafimaadka u leh Ilmaha ..... 41

414-360-0520 Hawl Maalmeedka iyo Nashaadaadka Barnaamijka ... 41
414-360-0600 Shuruudaha Guud ee Daryeelka Saqiirada iyo Socod Baradka ... 43
414-360-0610 Quudinta Saqiirada iyo Socod Baradka ... 44
414-360-0620 Qalabka Guriga iyo Qalabka ilmaha Saqiirada iyo kuwa Socod Baradka ... 45
414-360-0630 Hurdada Amaanka ... 47
414-360-0650 Badelida Xafaayada iyo Gelista Musqusha ... 48
414-360-0660 Nadiifinta iyo Jeermis ka Dilista Aaga Saqiirada iyo Socod Baradka ... 49
414-360-0700 Habdhaqanka iyo Tusmada ... 49
414-360-0710 Anshaxa iyo Ficiladda Mamnuuca ah ... 50
414-360-0720 Gardaduubka Jireed ... 51
414-360-0800 Xajmiga Guriga ... 52
414-360-0810 Qaab Dhismeedka iyo badqabka Guriga ... 53
414-360-0820 Isha Biyaha iyo Tuubooyinka ... 56
414-360-0830 Musqulaha, Siimanka Farxalka, iyo Qubayska ... 58
414-360-0840 Kahortaga Iyo Maareynta Khataraha ... 58
414-360-0850 Dayactirka iyo Nadaafada ... 61
414-360-0860 Kahortaga Dabka ... 63
414-360-0900 Alaabta Guriga, Qalabka iyo Agabka Ciyaarta ... 65
414-360-0920 Aagga Ciyaarta ee Banaanka ... 67
414-360-1000 Farxalka ... 70
414-360-1010 Xanuunka ... 70
414-360-1020 Dhaawacyada ... 73
414-360-1030 Daawooyinka ... 74
414-360-1050 Daryeelka Carruurta Qaba Baahiyaha Gaarka ah ... 76
414-360-1100 Cuntada iyo Adeegga Cuntada ... 76
414-360-1200 Gaadiidka iyo Safarada Gaaban ... 79
414-360-1230 Suumanka Rakaabka iyo Gaariyaasha ... 82
414-360-1300 Shaqooyinka Dabaasha iyo Biyaha ... 82
414-360-1400 Xayawaannada ... 84
414-360-1500 Daryeelka Habbeenkii ... 85
414-360-1610 Xanibaadaha-Hakinnada, Diidmada, iyo Ka Noqoshada Oggolaanshaha ... 86
414-360-1620 Ganaaxa Lacageed ... 88
414-075-0000 Adeegsiga Xeerarka ... 93
414-075-0010 Qeexitaannada ... 94
414-075-0130 Cabashooyinka iyo Baaritaannada ... 99

414-075-0230 Mamnuucida Shardi Dhaafka, Daryeelka Sharci Darada ah, Ganaaxyada Lacageed ..... 104
414-075-0250 Saacadaha Shaqada iyo Daryeelka Aan U baahnayn Ruqsad ..... 107
414-075-0300 Matalaadda Midawga ee Dhagaysiyada Dacwada labada Dhinac ..... 109

## 414-360-0100 Qeexitaannada

Erayada iyo weedhaha soo socda ee ku jira xeerarkaan ayaa leh macneyaasha soo socda:

(1) "**Aaga Nashaadada**" waxaa laga wadaa aaga guriga ee la heli karo, inta lagu jiro dhammaan saacadaha shaqada, si loogu adeegsado hawlaha ilmaha. Aaggaan kuma jirto laakiin kuma koobna aagaga diyaarinta cuntada ee jikada, musqulaha, aagaga kululeynta, aagaga kaydka, qalabka guriga iyo agabka aan soconayn ee aysan adeegsan ilmuhu.

(2) "**Codsade**" waxaa laga wadaa qof gudbiyay codsiga ruqsadda daryeelka carruurta kaasoo magaciisa lagu bixinaayo shahaadada.

(3) "**Habdhaqanka iyo Tusmada"** waxaa laga wadaa-hanaanka joogtada ah ee ka caawinta ilmaha barashada maareynta naftooda iyo qaadashada masuuliyadda habdhaqanadooda iyo ficiladooda gaarka ah.

(4) "**Maalin Shaqo**" waxaa laga wadaa Isniinta ilaa Jimcada, laakiin kuma jiraan maalmaha fasaxa sida lagu qeexay ORS 187.010 iyo ORS 189.020, ama maalin kasta oo xafiiska dhexe ee CCLD uu xiran yahay.

(5) "**Xajmiga**" waxaa laga wadaa wadarta guud ee tirada ilmaha la ogol yahay inay ku jiraan daryeelka goobta daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh ama daryeel ka baxsan gurigooda mar kasta.

(6) "**Daryeel Bixiye**" waxaa laga wadaa qof kasta, uuna ku jiro bixiyaha, kaasoo daryeela carruur ku jirta daryeelka carruurta ee qoyska oo shahaado leh ee guriga toosna ula shaqeeya ilmaha, siiya daryeel, kormeer iyo hagis.

(7) "**CBR**" (**Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyaadda**) waxaa laga wadaa diiwaanka CCLD ee shaqsiyaadka loo ogolaaday inay la shaqeeyaan xarunta daryeelka carruurta gudaha Oregon si waafaqsan ORS 329A.030 iyo OAR 414-061-0000 ilaa 414-061-0120.

(a) "**Diiwaan gelinta CBR**" waxaa laga wadaa ansixinta muddada shanta sano ah si lagaaga diiwaan gasho CBR kadib hubinta diiwaannada danbiyada ee Booliiska Gobalka Oregon, hubinta diiwaanada xadgudubka ilmaha iyo dayaca ilmaha, hubinnada adeegyada difaaca dadka waawayn iyo shahaadada korinta ilmaha, iyo hubinta diiwaannada FBI.

(b) "**Diiwaan Gelinta Shardiga Leh ee CBR**" waxaa laga wadaa ogolaanshaha mudada kooban si lagaaga diiwaan gasho CBR kadib hubinta diiwaannada Booliiska Gobalka Oregon iyo diiwaannada xadgudubka iyo dayaca ilmaha laakiin kahor inta aadan helin natiijooyinka CCDL ee hubinta diiwaannada FBI ee qasabka ah.

(8) "**CCLD**" waxaa laga wadaa Waaxda Ruqsada Daryeelka Carruurta ee Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka.

(9) "**Daryeelka Carruurta**" waxaa laga wadaa daryeelka, kormeerka, iyo hogista si joogto ah ee ilmaha, uusan la joogin waalid, masuul, ama waalidka masuulka ka ah, inta lagu jiro qayb kamid ah 24-ka saac ee maalinta, ayadoo lagu helaayo ama aan lagu helayn mushaar.

(10)“**Daryeelka Carruurta ee Qoyska ee Shahaadada Leh**” ama “Guriga” waxaa laga wadaa xarunta daryeelka carruurta oo ku taala dhisme loo dhisay in hal qoys ku noolaadaan ama guri kale oo leh shahaadada daryeelka ugu badnaan 16 carruur ah markiiba. Tixraacyada ku jira xeerarka "guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh" ama "guriga" waxaa laga wadaa adeeg bixiyaha ama wakiil kasta, uuna ku jito adeeg bixiye badel ah, kaasoo ku shaqeeya shahaadada.

(11)“**Ilmaha Daryeelka Carruurta**” waxaa laga wadaa ilmo kasta oo jira lix asbuuc ama ka wayn iyo ka yar 13 sano, ama ilmo ka yar da'da 18 oo qaba baahiyaha gaarka ah ama naafooyinka una baahan heer daryeel kaasoo ka badan daryeelka caadiga ah ee ilmaha da'diisa ah, kaasoo daryeel bixiyaha ay ka saaran tahay masuuliyad dheeraad ah muddada kooban ee waalidku ka maqan yahay.

(12) "**Ilmaha qaba Baahiyaha Gaarka ah**" waxaa laga wadaa ilmo u baahan taageerooyinka gaarka ah ama caawimaadaha kale ayna ku jiraan qaar kamid ah dhaqan gelinta barnaamijka caadiga ah ee daryeelka ee daryeelka carruurta ee qoyska oo shahaado haysta, shaqooyinka ama qalabka si looga caawiyo xaalada jirka, kobaca, habdhaqanka, dhimirka ama caafimaadka ama naafada oo ah mid abadiyan ah ama ku meel gaar ah.

(13) “**Ganaax lacageed**” waxay ka dhigan tahay ganaax ay CCLD ku soo rogtay daryeel bixiye kadib markii uu jebiyay xeerarkaan.

(14) "**DELC**" waxaa laga wadaa Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka.

(15) "**Kobac Ahaan ku Haboon**" waxaa laga wadaa:

(a) Daryeel bixiyaasha ayaa ula dhaqma ilmo kasta qaab xushmaynaaya awoodaha gaarka ah ee ilmaha;

(b) Daryeel bixiyaasha ayaa aqoon u leh sida ilmuhu u kobcaayo waxna u baranaayo;

(c) Shaqooyinka, agabyada, iyo manhajka waafaqsan masaalixda iyo awoodaha ilmo gaar ah ama koox carruur ah oo loo adeegaayo; iyo

(d) Qalabka ayaa leh xajmi sax ah ama loo dhaqan gashay qaab ilmo kasta uu si buuxda oo amaan ah uga qaybgeli karo.

(16) "**Dilista jeermiska**" waxaa laga wadaa baabi'inta suuxinta dhammaan jeermisyada saaran dusha meel. Jeermis dilista waxaa ku jira nadiifinta iyo biyo raacinta adoo marinaaya sunta jeermiska, sida:

(a) Iskudarka koloriinta iyo biyaha adoo raacaaya tilmaamaha shirkada samaysay; ama

(b) Maadada jeermis dilaha EPA ka diiwaan gashan, oo loo adeegsado sida ay tilmaantay shirkada samaysay ayna ku jirto, cadadka saxda ah, wakhtiga meesha loo daynaayo, shuruudaha qalajinta ama biyo raacinta iyo ku haboonaanta dusha meesha.

(17) "**Qoys**" waxaa laga wadaa koox dad ah oo ay ka dhaxeyso wada dhalasho, guur ama koriimo, ama shaqsiyaad xiriiradooda shaqo ay u dhiganto xiriirada noocaas ah.

(18) "**Safarka Gaaban**" waxaa laga wadaa dalxiis gaaban ama shaqada barnaamij lagu tagaayo aag gaar ah oo ka baxsan guriga kaasoo billoowda marka daryeel bixiyaasha iyo ilmuhu ka baxaan dhismeyaasha, ayagoo ku baxaaya midkood gaari ama lugaynaaya. Kuma jiraan socodka lagu maro xaafadaha, gaynta iyo ka soo qaadista dugsiga ama guriga ee ay bixiso daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh.

(19) "**Sarkaalka Xeerka Dab Damiska**" waxaa laga wadaa Gudoomiyaha Dab Damiska II, Hogaanka Dab Damiska, Ku Xigeenka Madaxa Dab damiska ama qof loo xilsaatay sida ku cad ORS 476.030, ORS 476.060 iyo OAR 837-039-0016.

(20) "**Khatar**" waxaa laga wadaa wax kasta oo keeni kara dhaawac ama sababi kara waxyeello.

(21) "**Aysan Gaari Karin Ilmuhu**" waxay ka dhigan tahay qaab looga hor istaago ilmo inuu gaaro, galo, adeegsado ama helo alaab, aag, ama agab yaala daryeelka carruurta ee qoyska oo shahaadada haysta oo lagu sameeyo midkood ama ka badan qaababka soo socda:

(a) Lagu xiray aalad aysan ilmuhu furi karin, sida qaanada badqabka ilmaha oo qufulan ama aalad leh albaab la xiro:

(A) Aalad si gaar ah loogu sameeyay ilaalinta badqabka ilmaha; ama

(B) Marka ay tahay alaab aan loo sameyn badqabka ilmaha, aaladu waa inay leedahay nidaamyada furitaanka qaybaha badan, ama ay u baahan tahay labada gacmoodba si loo furo.

(b) Meel xiran, sida qol xiran, qaanad, ama koobadiin; ama qufulo aan adeegsan fure ama isku darka batoonnada, sida quful batoon ama ganaha la isa suro, keliya haddii la dhigo meel dhulka u jirta ugu yaraan 60 inji;

(c) Gadaashada dhisme lagu xiray ganjeel aysan ilmuhu geli karin; ama

(d) Qaanad ama armaajo aan lagu gaari karin dusha meel kale marka ilmuhu ku istaago ama fuulo.

(22) "**Dhallaan**" waxaa laga wadaa ilmo jira 6 asbuuc ilaa 12 billood.

(23) "**Dhiqlaha**" waxaa laga wadaa dhiqlaha iyo cayayaanka gala meesha oo cudur ku keena qofka.Xasharaadkaan ayaa noqon kara shilinta, dhiqlaha, waxyaabaha duula ama injirta. Cayayaanka ayaa noqon kara gooryaanka, dhawrta-xaniyo, gooryaan-dheere ama helminths.

(24) "**Ruqsadda**" waxaa laga wadaa dukumiinti ay soo saartay CCDL ayna siisay daryeelka carruurta ee qoyska oo shahaado leh. Ruqsadda ayaa sidoo kale loogu yeeri karaa shahaado.

(25) "**Mudada ruqsadda**" waxaa laga wadaa 12 billood oo ruqsadda daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh lagu bixiyo.

(a) Si loo helo ruqsadda hore, muddada ruqsadda ayaa bilaabanaysa maalinta ruqsadda caadiga ah la bixiyo waxayna ku dhamaanaysaa isla maalintaas sanadka xiga. Tusaale ahaan, haddii daryeelka carruurta ee qoyska la siiyay ruqsad markii ay ahayd Luuliyo 6, 2024, muddada ruqsaddu shaqeynayso waa Luuliyo 6, 2024 ilaa Luuliyo 6, 2025.

(b) Ruqsadda cusbooneysiinta ah ee daryeel bixiyuhu uu codsiga cusbooneysiinta soo gudbiyay wakhtiga ku habboon, muddada ruqsadda ayaa ka bilaabanayasa maalinta ka horaysa maalinta muddadii hore ee ruqsaddu dhamaatay waxayna ku dhamaanaysaa isla maalintaas labo sano kadib, ayadoo aan la eegayn taariikhda ruqsadda cusbooneysiinta ah la baxshay, ilaa in bixiyaha iyo CCDL ay ku heshiiyaan badelidda mudada ruqsadda si ay u bilaabato taariikh kale.

(26) "**Xiran**" waxaa laga wadaa in lagu xiray gudaha qol aan lahayn ama ay ku yar yihiin daaqaduhu inta xarunta ama dhismaha laga difaacaayo khatarta.

(27) "**Daryeelka Habaynkii**" waxaa laga wadaa daryeelka la bixiyo inta u dhexaysa 9:00 p.m. iyo 5:00 a.m. ama marka ilmo kasta oo diiwaan gashan uu seexdo wax ka badan 3 saacadood goobta daryeelka carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan.

(28) "**Diiwaanka Oregon**" waxaa laga wadaa diiwaanka ikhtiyaariga ah ee Xarunta Hormarinta Xirfadda ee Oregon ee Daryeelka iyo Waxbarashadda Dhallaanka oo ku taala Portland State University taasoo qoraysa tababarka, waxbarashada iyo khibradda shaqsiyaadka ka shaqeeya daryeelka iyo waxbarashada dhalaanka.

(29) "**Diiwaanka Oonlaynka ee Oregon**" (**ORO**) waxaa laga wadaa kaydka xogta gobalka oo dhan taasoo kaydisa dhammaan tababarka iyo waxbarashada lasoo gudbiyay si ay CCLD u xaqiijiso in la adeegsan karo.

(30) "**Mulkiile**" waxaa laga wadaa qof haysta ganacsiga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh oo ah hantidiisa kuna leh saami wayn oo dhaqaale shaqada guriga.

(31) "**Waalidka**" waxaa laga wadaa waalidka, masuulka ilmaha, ama qof jira 18 sano ama ka wayn oo masuuliyad sare ka saaran tahay ilmo marka uu maqan yahay waalidka ilmaha.

(32) "**Xakameyn Jireed**" waxaa laga wadaa in si kas ah loo xadido ama loo hor istaago xoriyada dhaqdhaqaaqa jireed ee qofka. Xakameynta jireed kuma jiraan:

(a) Qabashada ilmaha si loo dejiyo ilmaha marka uu caroodo;

(b) Qabashada ilmaha si looga ka xeeyo meel si amaan ah loona geeyo meel kale ayadoo aan la adeegsan xoog (tusaale ahaan, u wadista ilmo socod barad ah shaqo kale);

(c) Ka caawinta ilmaha inuu sameeyo shaqo, haddii ilmuhu uusan diidin in gacanta la qabto (ka caawinta ilmo inuu adkeeyo kabihiisa ama uu qabsado qalin ama aalad, masaasad wax ku cabo, iwm.); ama

(d) Anshax kasta ama fal mamnuuc ah oo ku qoran OAR 414-360-0710.

(33) "**Fagaaga ciyaadha**" waxaa laga wadaa aag xiran oo leh xayndaab shabaq ama maro ah. Fagaaga ciyaadha waxaa loogu talo galay in ilmuhu seexdaan kuna ciyaaraan.

(34) "**Cuntooyinka khatarka dhalin kara**" waxaa laga wadaa cunto kasta ama cabitaan kasta oo ay ku jiraan caano ama maadooyinka caanaha, ukunta, hilibka, kaluunka, shellfish, hilibka doorada, bariis karsan, digirta ama baastada, iyo dhammaan cuntooyinka horey loo kariyay, ayna ku jiraan cuntooyinka soo haray.

(35) "**Dhismeyaasha**" waxaa laga wadaa goobta rasmiga ah ee loo adeegsado daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaado leh si loogu baxsho daryeel taasoo ay qabanayaan xeerarka ama baaritaanka ay samayso CCLD, ayna ku jiraan dhammaan aagaga gudaha iyo banaanka ee aan sida tooska ah loogu adeegsan daryeelka carruurta haddii bixiyaha, shaqaalaha daryeelka carruurta, ama ilmaha daryeelka carruurta ay si rasmi ah ama suuragal ah u geli karaan aagaga.

(36) "**Ilmaha Gaaray Da'da-Dugsiga Xanaanada**" waxaa laga wadaa ilmo jira ugu yaraan 36 bilood laakiin aan wali u qalmin in laga diiwaan gasho dugsiga birimada ama wax ka sareeya, kahor maalinta koowaad ee sanad dugsiyeedka hadda.

(37) "**Adeeg Bixiyaha**" waxaa laga wadaa qof dagan guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta kaasoo masuul ka ah ilmaha daryeelka ku jira, ah daryeel bixiyaha rasmiga ah ee carruurta, oo ah qofka magaciisu ku qoran yahay shahaadada. Bixiyuhu waa qofka masuulka ka ah shaqada guud ee guriga oo leh masuuliyadda fulinta waajibaadka muhiimka u ah buuxinta shuruudaha shahaadada haysta.

(38) "**Xayiraad Xanuun**" waxaa laga wadaa xanuun ama caabuq ay aqoonsatay Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha sida ku cad OAR 333-019-0010 kaas oo mamnuucaaya in ilmuhu xaadiro daryeelka carruurta.

(39) "**Daawada Jeermiska**" waxaa laga wadaa adeegsiga daawo bixinaysa kulayl ku filan ama iskudarka kiimikooyinka ayadoo la siinaayo wakhti ku filan si loo yareeyo jeermisyada ilaa heer amaan ah laguna dhaqaayo maacuunta, qalabka, boonbaleyaasha, iyo goobaha kale ee la taabto.

(a) kiishada baaritaanka oo ku habboon ama cabireyaasha ayaa loo baahan yahay si loo cabiro heerka maadooyinka sifeynta ee la isku qasay.

(b) Daawada Jeermiska oo kasta oo loo adeegsaday meelaha cuntadu taabato iyo boonbaleyaasha waa in lagu qoraa "amaan u ah taabashada goobaha cuntada."

(40) "**Ilmaha gaaray-Da'da Dugsiga**" waxaa laga wadaa ilmo u qalma in laga diiwaan gasho dugsiga barbaarinta ama ka koreeya marka la gaaro ama kahor maalinta koobaad ee sanad dugsiyeedka hadda (sidoo kale ka eeg ORS 329A.250(12)). Kan waxaa kamid ah bilaha laga bilaabo dhammaadka sanad dugsiyeedkii hore ilaa biloowga sanad dugsiyeedka dugsiga barbaarinta.

(41) "**Dhaawac ama Shil Daran**" waxaa laga wadaa midkood waxyaabaha soo socda:

(a) Dhaawac u baahan qaliin;

(b) Dhaawac u baahan in qofka isbitaal la dhigo;

(c) Dhaawac u baahan daaweynta caafimaad oo degdeg ah;

(d) Saxasho ama dhibaatooyinka lama filaanka ah ee neefsiga;

(e) Miyir beel;

(f) Jugta madaxa;

(g) Sumoobid;

(h) Iska badinta daawada;

(i) Lafaha jabay ama kala baxa kala goysyada;

(j) Dhaawaca xun ee madaxa ama qoorta;

(k) Kiimikada gasha indhaha, afka, maqaarka, dhuuqista ama liqidda;

(l) Dhammaan gubashooyinka;

(m) Xasaasiyadda u baahan in qofka la siiyo Epi-Pen;

(n) Dhiigbax daran ama tigtignaan;

(o) Shooga ama xaalada jawo wareerka ah; ama

(p) Ku dhow-qarqoomid.

(42) "**Cabashada Daran**" iyo "**Xadgudubka Daran**" waxaa laga wadaa eedayn ama helitaanka ku dhaqmid la'aanta sharciga taasoo:

(a) Ilmuhu ku jiraan khatar taagan;

(b) Ay jiraan ilmo ku jira daryeelka oo ka badan inta xajmiga ruqsaddu fasaxaayo;

qaababka anshaxa ee lagu mamnuucay sharciga OAR 414-360-0710 oo la adeegsanaayo;

(d) Ilmaha oo aan la kormeerayn;

(e) Khataraha badan ama daran ee dabka, caafimaadka ama badqabka oo ka jira daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta;

(f) Xaaladaha aadka u xun ee nadaafada oo ka jira daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaada leh;

(g) Dad waaweyn oo aan ka diiwaan gashanayn CBR oo jooga guriga; ama

(h) Gurigu uu bixinaayo daryeelka carruurta asagoo aan haysan shahaado sax ah.

(43) "**Hooyga Diyaarsan**" waxaa laga wadaa in daryeel bixiyaasha iyo carruurtu ay guriga joogaan sabab la xiriirta khatarta daran sida duufaanta, kiimikada ama gaaska dilaacay ama qaraxa, ama dhacdo kale oo diidaysa in dadka guriga jooga ay si amaan ah uga baxaan dhismaha.

(44) "**Adeeg bixiye Badel ah**" waxaa laga wadaa qof noqonaaya daryeelaha aasaasiga ah ee ilmaha jooga guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaado leh muddo kooban inta uu maqan yahay adeeg bixiyuhu.

(45) "**Kormeerka**" waxaa laga wadaa tallaabada daryeelida ilmo ama koox carruur ah. Tan waxaa ku jira wacyiga iyo masuuliyada shaqada joogtada ah ee ilmo kasta. Waxay u baahan tahay joogitaan si shaqsi ah, aqoon ku aadan baahiyaha carruurta, iyo in lagula xisaabtamo daryeelkooda iyo faya-dhawrkooda. Kormeerka ayaa sidoo kale u baahan in daryeel bixiyaashu ag joogaan ayna diyaar u ahaadaan inay ilmaha gaaraan si ay u faro gashaan marka loo baahdo.

(46) "**Caawimaad Farsamo**" waxaa laga wadaa tallada iyo tusaalaha la siiyo daryeel bixiyaasha si looga caawiyo inay ilaaliyaan ku dhaqanka xeerka.

(47) "**Socod barad**" waxaa laga wadaa ilmo jira 12 billood ilaa 36 bilood.

(a) "S**ocod barad yar**" waxaa laga wadaa ilmo jira 12 billood ilaa 24 bilood.

(b) "**Socod barad Wayn**" waxaa laga wadaa ilmo jira 24 billood ilaa 36 bilood.

(48) "**Gelitaanka Ilmaha ee aan La Kormeerayn**" waxaa laga wadaa la joogista ilmaha taas oo siinaysa qofka fursad uu si toos ah ula hadlo ama u taabto ilmaha ayadoo uusan kormeer toos ah ku hayn bixiyaha daryeelka carruurta oo xirfad leh ama daryeel bixiyaha leh masuuliyadda ugu wayn.

(49) "**Booqde**" waxa alaga wadaa qof guriga u yimid hal munaasabad, ayna ku jirto laakiin kuma koobna: qof dayactir samaynaaya, xirfadle qandaraas gaar ah lala sameeyay si uu ula shaqeeyo ilmo gaar ah, ama shaqaalaha maktabadda oo booqanaaya barnaamijka. Booqdeyaasha ayaan ahaan shaqaalaha goobta lagumana tirinaayo goobta.

(50) "**Mutadawac**" waxaa ku jira qof kasta oo shaqo ama adeegyo u qabta daryeelka carruurta qoyska ee shahaadada laakiin aan mushaar ama gunno ku helayn shaqada.

## 414-360-0110 Ujeedada

(1) Daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh ayaa lagu qeexaa xarunta daryeelka carruurta oo shahaado u haysta inay siiso daryeelka carruurta tiro carruur ah oo dhan tirada ugu badan oo lagu bixinaayo guri la dagan yahay.

(2) Ujeedada OAR 414-360-0100 ilaa OAR 414-360-1620 waa in la difaaco caafimaadka, badqabka, iyo faya qabka carruurta marka lagu daryeelaayo meel ka baxsan gurigooda ayadoo la bixinaayo shuruudaha kormeerka, shahaado siinta, ilaalinta iyo haddii kale maareynta daryeelka lagu bixinaayo guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta.

(3) Qof ayaan ka shaqeyn karin guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh asagoo aan haysan diiwaan gelinta saxda ah oo kasoo baxday CCLD, ilaa inuu bixinaayo maahee daryeel aan u baahnayn ruqsad sida ku qoran OAR 414-075-0250.

## 414-360-0130 Hanaanka Codsiga

(1) Codsaduhu waa inuu gudbiyaa codsiga rasmiga ah ee buuxa ee shahaadada kuna gudbiyaa foomamka ay bixisay CCLD:

(a) Si uu u helo shahaadada hore;

(b) Si loo cusbooneysiiyo shahaadada;

(c) Markasta oo uu isbadello adeeg bixiyaha ama goobtu; ama

(d) Kordhinta xajmiga.

(2) Codsade aan ahayn mulkiilaha guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh waa inuu ku sheegaa mulkiilaha codsiga.

(3) Codsaduhu waa inuu gudbiyaa qarashka gudbinta ee aan loo celin karin marka uu codsiga diraayo.

(a) Daryeelka Carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan qarashka waa $25 oo ay la socoto $2 oo boos kasta oo shahaadada lagu bixinaayo ah. Tusaale ahaan, qarashka daryeelka carruurta ee qoyska ee shaahadada leh ee daryeelka 14 ilmood waa $25 + $28= $53. Kharashkaan ayaa laga doonayaa:

(A) Codsiga koowaad;

(B) Dib u furista shahaado kadib marka shahaadadu dhacdo;

(C) Isbadelka adeeg bixiyaha; ama

(D) Isbadelka goobta.

(b) Daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta, qarashka oo ay la socoto $2 oo boos kasta oo shahaadada lagu bixinaayo ah ayaa laga doonayaa ayadoo lasoo raacinaayo:

(A) Codsiga cusbooneysiinta ah; ama

(B) Kordhinta xajmiga. Qarashka ayaa keliya laga qaadayaa tirada goobaha ruqsada lagu bixinaayo ee ka dheeraadka ah goobta jirtay.

(4) Daryeelka Carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta waa inuu buuxshaa uuna u diraa codsiga CCLD ugu yaraan:

(a) 45 maalmood kahor maalinta la filaayo in la furo daryeelka carruurta ee shahaadada haysta ama goobtu isbadesho; iyo

(b) 30 maalmood kahor dhicitaan shahaadada cusbooneysiinta ah.

(A) Haddii codsiga cusbooneysiinta iyo qarashka lagaa rabo aan lagu bixin ugu yaraan 30 maalmood kahor taariikhda dhicitaanka shahaadada hadda, shahaadada hadda ilaa in si rasmi ah loola noqdo maahee, ayaa sii shaqeynaysa ilaa CCLD ay talaabo ka qaado codsiga cusbooneysiinta ayna bixiso ogeysiiska talaabada la qaaday.

(B) Haddii codsiga cusbooneysiinta iyo qarashka lagaa rabo aan la helin ugu yaraan 30 maalmood kahor taariikhda dhicitaanka shahaadada hadda, shahaadada ta ayaa dhici doonta daryeelka carruurta ee qoyska ee diiwaan gashanna waa inuu joojiyaa shaqooyinka ilaa in cusbooneysiin la sameeyo maahee kahor taariikhda dhicitaanka.

(5) Codsaduhu waa inuu keenaa agabka soo socda oo la socda codsiga shahaadada koowaad, ama isbadelka ciwaanka guriga iyo marka qaab dhismeedka sagxada guriga ee guduhu isbadelo:

(a) Oo uu ansixiyay khabiirka caafimaadka deegaanka oo ka diiwaan gashan ORS cutubka 700 ama wakiil idman oo ka socda Maamulka Caafimaadka ee Oregon;

(b) Qorshaha qaab dhismeedka, ayna ku jirtaan cabirada (dheerarka iyo balaca) ee dhammaan qolalka la adeegsanaayo, isticmaalka loo qorsheeyay qol kasta, goobaha iridyada qasabka ah, iyo meelaynta jikada iyo musqulaha;

(c) Natiijooyinka baaritaanka dalawandiga ee hore ama hadda ee il biyood kasta, sida lagu caddeeyay OAR 414-360-0820; iyo

(d) Caddeyn muujinaysa in adeeg bixiyuhu buuxiyay tababarka hore iyo hagitaanka ee ku qoran OAR 414-360-0370(1).

(6) Codsiga cusbooneysiinta daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ayay ansixin kartaa CCLD marka ay CCLD hesho xogaha soo socda:

(a) Kormeerka Badbaadada iyo Caafimaadka ee CCLD oo ay si guul leh u sameeyeen shaqaalaha CCLD; iyo

(b) Ogolaanshaha qoraalka ah ooo uu ansixiyay khabiirka caafimaadka deegaanka oo ka diiwaan gashan ORS cutubka 700 ama wakiil idman oo ka socda Maamulka Caafimaadka ee Oregon;

(7) Codsaduhu waa inuu si buuxda u dhiibaa dhammaan ganaaxyada lacageed ee lagu cadeeyay amarka kama danbaysta ah ee ka dhanka ah codsadaha ama uu ku dhaqmaa qorshaha lacag bixinta ee ay ansixisay CCLD kahor inta aan CCLD ka shaqeynta codsiga hore ama cusbooneysiinta ah.

(8) Haddii CCLD aysan ansixin, ay soo saarto ogeysiiska diidmada ah, ama ay bixiso amarka kama danbaysta ah oo iskiis ah ama kiiska dacwada ee dhagaysiga oo diidaaya codsi 12 bilood gudahood laga bilaabo taariikhda codsiga loo gudbiyay CCLD, codsiga ayaa la xiri karaa, asagoo waafaqsan xaqa codsadaha ee soo gudbinta codsi cusub marka uu doono. Xeerkaan ayaa qusayn haddii:

(a) Codsigu yahay codsi cusbooneysiin ah oo wakhtigiisii lagu soo gudbiyay; ama

(b) CCLD ay bixisay ogeysiiska doonista diidmada codsiga kaasoo aan ka dhalan amarka kama danbaysta ah ama ka bixida.

## 414-360-0140 Bixinta Shahaadada

(1) Marka la helo codsiga la buuxiyay, daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ayuu qiimeyn doonaa wakiil ka socda CCLD si loo go'aansho haddii uu buuxiyay dhammaan shuruudaha shahaadada.

(2) CCLD ayaa bixin doonta shahaadada daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh marka guriga la go'aansho inuu ku dhaqmaayo dhammaan xeerarkaan. Guriga daryeelka carruurta ee shahaadada haysta ee qoyska, shahaadada ayaa shaqeynaysa ugu badnaan 12 bilood.

(3) CCLD ayaa bixin doonta shahaadada daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh oo ku meel gaar ah marka guriga la go'aansho inuu ku dhaqmaayo inta badan xeerarkaan, CCLD aysan helin cilado khatar gelinaaya ilmaha, adeeg bixiyuhuna uu muujiyo dedaal ku aadan inuu si buuxda ugu dhaqmaayo.

(a) CCLDayaa bixin karta shahaadada daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta marka codsiga cusbooneysiinta lasoo gudbiyo wax kayar 30 maalmood kahor taariikhda dhicitaanka shahaadada ama si ay uga jawaabto codsi hore.

(b) Daryeelka Carruurta ee shahaadada haysta ee qoyska ayaan ku shaqeyn karin shahaado ku meel gaar ah wax ka badan 180 maalmood muddo kasta 12-bilood gudaheed ah.

(c) CCLD ayaa diidi karta codsiga hore ama cusbooneysiinta ah ama la laaban karta shahaadada ku meel gaarka ah haddii ciladuhu sii socdaan inta shahaadada ku meel gaarka ah shaqeynayso.

(4) Daryeelka Carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ayaan shaqeyn karin kadib marka ay dhacdo ama lala laabto shahaadada ku meelgaarka ah ilaa in shahaadada hore ee caadiga ah ay shaqeynayso maahee sabab la xiriirta in codsiga cusbooneysiinta lasoo gudbiyay wax ka badan 30 maalmood kahor taariikhda dhicitaanka shatiga.

(5) Shatiga ayaa lagu bixin doonaa magaca adeeg bixiyaha. Adeeg bixiye waxaa lagu xadidayaa hal shahaado calaa guri.

(6) Daryeelka Carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta, mulkiilaha:

(a) Haan haysan waajibaadka joogtada ah ee daryeel bixinta, ayaa lahaan kara tiro guryaha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh.

(b) Kaas oo ah adeeg bixiyaha hal guri, ayaa noqon kara mulkiilaha hal guri oo dheeraad ah.

(c) Ayaa ka noqon kara adeeg bixiye labo guri oo daryeelka carruurta oo qoyska ee shahaado leh marka:

(A) Labada guriba ay ruqsad u haystaan 12 carruur ah ama ka yar; iyo

(B) Saacadaha ugu yar ee uu joogo goobta asagoo daryeelaaya ilmaha (eeg OAR 414-360-0320(2)) lau daboolo guri kasta.

(7) Shahaadada Daryeelka Carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ayaa loo wareejin karin goob kale ama urur kale ama shaqsi kale.

(8) Keliya hal shahaadada daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ayaa lagu bixin doonaa hal guri.

(9) Adeeg Bixiyuhu waa inuu codsi qoraal ah ugu diraa CCLD isbadello kasta oo lagu samaynaayo shatiga sida da'aha carruurta loo adeegaayo, awooda, isbadellada qolka la adeegsanaayo, ama saacadaha shaqada. Adeeg bixiyuhu waa inuu helaa ogolaansho iyo, haddii ay haboon tahay, ruqsada dib loo soo saaray ee ka imaanaysa CCLD kahor inta uusan ku shaqeyn isbadellada.

## 414-360-0150 Hanaanka Shahaadada

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu ku dhaqmaa shuruudaha shahaadada marka uu diiwaan gelinaayo carruurta, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, xajmiga, saacadaha shaqada, heerka da'da, iyo xaaladaha gaarka ah.

(2) Haddii codsade ama bixiyuhu uu sidoo kale yahay waalidka daryeelka ilmaha uusan dhalin ee shahaadada haysta, waa inuu u sheegaa CCLD. CCLD ayaa la xiriiri karta Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) si ay ugala hadasho ruqsadda daryeelka carruurta.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu sidoo kale u ogolaado wakiillada dhammaan wakaaladaha ku shuqul leh hanaanka ruqsad bixinta inay si degdeg ah u galaan dhammaan aagaga guriga iyo dhismeyaasha marka daryeelka carruurtu socoto, ayna ku jiraan:

(a) Aagaga loo aqoonsado in aysan geli karin ilmuhu, ayna ku jiraan qolalka aan caadiyan loo adeegsan daryeelka carruurta, dabaqyada labaad iyo qaybaha kale ee dhismeyaasha;

(b) Diiwaannada carruurta ka diiwaan gashan guriga daryeelka carruurta ee shahaadada haysta, iyo dhammaan diiwaannada iyo warbixinada la xiriira shaqada daryeelka carruurta ee la xiriira ku dhaqanka xeerarkaan sida lagu amray OAR 414-360-0255; iyo

(c) Dhammaan daryeel bixiyaasha.

(4) Guriga waxaa kormeeri kara maamulka dab damiska ee maxaliga ah marka xeerarka maxaliga ah doonayaan kormeerka badqabka dabka oo qayb ka ah shatiga ganacsiga ama marka CCLD ay go'aamiso in loo baahan yahay samaynta arintaas.

(5) Haddii ay jirto cilad dhisme ama dayactir ama dib u naqshadayn oo CCLD go'aamisay inay khatar caafimaad ama badqab ku tahay carruurta, CCLD ayaa codsan karta in adeeg bixiyuhu u sheego in maamulka ku habboon kormeeraan guriga adeeg bixiyuhuna waa inuu fuliyaa codsiga. Adeeg bixiyuhu waa inuu CCLD siiyaa nuqulka warbixinta kormeerka ee maamulkaas isla markaba marka laga codsado.

(6) Shahaadada Daryeelka Carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ayaa la diidi karaa la hakin karaa ama lala noqon karaa haddii bixiyaha laga saaray, loo diiday ama laga hakiyay CBR.

(7) Haddii cabasho ay ku eedayso in bixiye uusan ku dhaqmayn xeerarkaan, CCLD ayaa sameyn doonta baaritaan iyo qiimeyn sida lagu caddeeyay OAR 414-075-0130.

(8) CCLD ayaa samayn karta booqashooyinka kormeerka ee aan horey loo shaacin ee daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ugu yaraan sanad kasta si loo go'aansho ku dhaqanka xeerarkaan iyo shuruudaha iyo qodobada shahaadada.

(9) Ayadoo la xiriirta booqashada kormeerka ama baaritaanka, CCLD ayaa bixin karta caawimaad farsamo marka habboon tahay si looga caawiyo adeeg bixiyaha ku dhaqanka xeerarkaan ayna bixiso caawimaad farsamo marka uu codsado adeeg bixiyuhu.

(10) Xogta uu baxsho adeeg bixiyaha ama wakiilkiisu uuna ku baxsho codsiyada uu u diro CCLD, diiwaanada ama warbixinada, ama xiriirka kale ee qoraalka ah ama hadalka ah waa inay noqotaa mid cusub, buuxda, oo sax ah.

(11) Codsiga waalidka ama ogolaanshaha si meesha looga saaro wax kamid ah xeerarka quseeya shahaadada guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh ayaan siinayn adeeg bixiyaha ogolaansho uu sidaas ku sameeyo.

(12) Diiwaannada shahaadada CCLD ayaa u furan dadwaynaha marka ay codsadaan, ayna ku jiraan naatiijooyinka baaritaanada cabashada. Hase yeeshee, xogta uu difaacaayo sharciga gobalka ama federaalka iyo magacyada ilmaha iyo dadka waawayn ayaan la shaacin doonin.

(13) Magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka, iyo xaaladaha shahaadada ee adeeg bixiyaashu waa xog dadwayne. Hase yeeshee, CCLD ayaa ka qarin karta dadwaynaha ciwaanka iyo lambarka taleefanka adeeg bixiyaha haddii adeeg bixiye uu codsi qoraal ah soo diro kaasoo sheegaaya in shaacinta ciwaanka iyo/ama lambarka taleefanka ay khatar gelinayso asaga ama xubin kamid ah qoyska oo guriga ku nool (OAR 137-004-0800). Codsiga waa in lagu gudbiyaa foomka ay bixisay CCLD.

## 414-360-0160 Shardi Dhaafyada Xeerarka

(1) Adeeg bixiye ayaa codsan kara in laga dhaafo xeer asagoo ku soo gudbinaaya foom ay siisay CCLD muddo wakhti cayiman marka:

(a) Shardi uusan waafaqsanayn daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh ee guriga; ama

(b) Ujeedada shardiga lagu dabooli karo qaab aan lagu cadeyn xeerka quseeya.

(2) Codsiga shardi dhaafka waa in lagu daraa:

(a) Sababta shardi dhaafka la codsaday; iyo

(b) Sharaxaada sida adeeg bixiyuhu u buuxin doono ujeedada laga lahaa xeerka.

(3) Codsiga shardi dhaafka ayaan la oggolaan doonin:

(a) Haddii shardiga uu amraayo sharciga gobalka ama sharciga federaalku; ama

(b) Haddii caafimaadka, badqabka, iyo fayo-dhawrka carruurta aan la xaqiijin karin.

(4) Adeeg bixiyuhu waa inuu ku dhaqmaa xeerka sida loo qoray ilaa CCLD ay ka oggolaanayso codsiga shardi dhaafka.

(5) Xaaladaha qaarkood, adeeg bixiye ayaa la siin karaa shardi dhaaf joogto ah kaasoo dib loo eegi doono sanad kasta si loo xaqiijiyo in adeeg bixiyuhu ku dhaqmaayo dhammaan shuruudaha shardi dhaafka.

(6) Codsiga shardi dhaaf kasta ayaa gaar u ah daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ee codsanaaya waxaana lagu qiimeeyaa xaaladihiisa gaarka ah. Bixinta shardi dhaafka xeer ayaan ahayn mid saf mar ah.

(7) CCLD waxay ka bixi kartaa oggolaanshaha shardi dhaafka waqti kasta, si loo xaqiijiyo caafimaadka, badqabka iyo fayo-dhawrka carruurta.

## 414-360-0200 Xeerarka

(1) Adeeg bixiyaha bixiye waa inuu haystaa xogta qoran iyo xeerarka lagu cadeeyay OAR 414-360-0200(2)(a) ilaa (i) uuna siiyaa:

(a) Daryeel bixiyaasha iyo mutadawiciinta wakhtiga shaqaale qorista iyo marka ay xeerarku isbadelaan:

(b) Waalidiinta marka ilmaha la diiwaan gelinaayo iyo marka xeerarku isbadelaan.

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuu xogta soo socota oo qoraal ah siiyo waalidiinta, daryeelayaasha, iyo mutadawiciinta:

(a) Magaca, ciwaanka ganacsiga, iyo lambarka taleefanka ganacsiga ee qofka masuuliyada koowaad ee shaqada maalin kasta ee guriga leh;

(b) Imaatinka iyo bixitaanka habraacyada, ayna ku jiraan shuruudaha imaatinka iyo bixista iyo shaqsiyaadka loo ogol yahay inay ilmaha qaadaan.

(c) Masuuliyaddaha Waalidka ee bixinta xogta hadda ee loo baahan yahay iyo waxa waalidka laga doonaayo inay keenaan;

(d) Diyaar garoowga xaalada degdega ah iyo qorshaha gurmadka (sidoo kale eeg OAR 414-360-0210, Diyaar garoowga Xaaladaha Degdega ah iyo Gurmadka);

(e) Taxadarada saxda ah ee maaraynta u banbixida ilmaan karta ee dhiiga iyo dheecaannada kale ee caabuqa sidi kara (arag OAR 414-360-0850(7));

(f) Xogta ku saabsan gaadiidka, marka uu bixinaayo daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta;

(g) Xeerka habdhaqanka iyo tusmada;

(h) Kahortaga iyo masuuliyada soo sheegista xadgudubka iyo dayaca ilmaha ee laga shakiyay; iyo

(i) Daryeelka habaynkii, haddii la bixiyo.

(3) Sida ay qasab ka dhigayaan sharciyada xuquuqaha lacageed ee gobalka ama federaalka iyo Sharciga Ameerikaanka Naafada ah (ADA), adeeg bixiye ayaan ku takoori karin ilmo sabab la xiriirta isir, diin, midab, wadanka uu kasoo jeedo, jinsi, xaalada guurka ee waalidka, ama sabab la xiriirta inuu u baahan yahay daryeel gaar ah.

(a) Xadgudubyada laga shakiyo ayaa loo sheegi doonaa wakaalada kormeeraysa, taasoo ay CCLD la wadaagi karto xog kasta oo ay heli karto.

(b) CCLD ayaa diidi karta codsiga hore ama cusbooneysiinta ah ama ka laaban karta shahaadada haddii adeeg bixiye la go'aansho inuu takoor sameeyay asagoo jebiyay shardigaan uuna go'aansho maamul kasta oo awood u leh inuu go'aanka noocaas ah sameeyo.

(4) Go'aanka adeeg bixiye ee ku aadan inuu baxsho ama sii wado daryeelka ilmo qaba baahiyaha gaarka ah ee la ogyahay waa in la gaaraa kadib marka qiimeyn gaar ah la sameeyo. Qiimeynta waa in lagu saleeyaa xogta ay baxshaan waalidiinta, xirfadleyaasha aqoonta u leh baahiyaha daryeelka ee ilmaha, iyo daryeel bixiyaasha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta. Qiimeynta waa in loo diyaarshaa ilmo kasta waana in lagu daraa:

(a) Caawimaadaha macquulka ah ee adeeg bixiyuhu sameeyay si loo taageero ka qaybgalka ilmo gaar ah ee barnaamijka, ama sharaxaada sababta adeeg bixiyuhu uusan u sameyn karin caawimaadaha macquulka ah;

(b) Isbadellada macquulka ah ee adeeg bixiyuhu ku sameeyay xeerarka iyo farsamooyinka si qaab buuxa looga qaybgeliyo ilmaha barnaamijka ama sharaxaada sababta aan adeeg bixiyuhu u sameyn karin isbadellada macquulka ah; iyo

(c) Haddii ay qusayso, khataro kasta oo ku dhacaaya caafimaadka iyo badqabka dadka kale kana dhalanaaya joogitaanka ilmaha ee guriga.

## 414-360-0210 U diyaar Garoowga Khatarta iyo Gurmadka

(1) Adeeg bixiye waa inuu haystaa qorshaha qoran ee u diyaar garoowga xaalada degdega ah oo ka hadlaaya daad gureynta, meel kale u wareejinta, ku dhuumashada goobta iyo habraacyada la yaqaano, iyo ka jawaabida xaaladaha degdega ah ee caafimaadka iyo shilalka kale. Qorshaha waa in la raacaa, ilaa in si kale ay amraan maahee shaqaalaha xaalada degdega ah.

(2) Qorshaha waa in lagu daraa habraacyada adeeg bixiyaha ee:

(a) Ka jawaabidda lumista ama habaabidda ilmo;

(b) Xaqiijinta in dhammaan carruurta soo xaadiray la kormeero lana tiriyo inta lagu jiro iyo kadib xaalada degdega ah;

(c) Qaabka daryeel bixiyaasha iyo carruurta looga digaayo xaalada degdega ah;

(d) U sheegista maamulada xaaladaha degdega ah, ayna ku jirto xarunta xakameynta sunta, marka loo baahdo;

(e) U daad gureynta ilmaha aag amaan ah oo loo asteeyay ama u wareejinta ilmaha hooy kale. Aagaga amaanka ah ee la asteeyay inu xarumaha badelka ah waa inay u jiraan ugu yaraan 50 fiid guriga laga daad gureynaayo;

(f) U wareejinta ilmaha goob loo asteeyay oo kamid ah guriga si loogu hayo iyo xaaladaha degdega ah ee xirista aaga;

(g) Ka jawaabida masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa dadku abuureen inta lagu jiro muddada korontadu maqan tahay;

(h) Ka jawaabidda xanuunka daran, dhaawaca daran ama geerida ilmo ama daryeel bixiye;

(i) Ka jawaabidda dhacdooyinka quseeya qofka soo weeraray goobta;

(j) Xalinta baahiyaha carruurta gaarka ah, ayna ku jiraan carruurta naafada ah ama kuwa qaba baahiyaha gaarka ah, iyo carruurta qaba xanuunnada daran;

(k) Xaqiijinta in xiriirka xaalada degdega ah ee carruurta iyo oggolaanshaha caafimaadka iyo xogta xiriirka xaalada degdega ah ee daryeel bixiyaasha la heli karo inta lagu jiro iyo kadib xaalad degdeg ah;

(l) U sheegista waalidiinta kadib marka xaalada degdega ah dhammaato iyo sida carruurta loogu gaynaayo qoysaskooda marka xaalada daad gureynta, meel kale u wareejinta, ama hooy ku haynta/ku xirista dhismaha la qaado;

(m) Joogtaynta sii wadista daryeelka kadib masiibada dabiiciga ah ama aadanuhu sababay, ayna ku jirto helitaanka nuqullada diiwaannada, dukumiintiyada, iyo galalka kumbuyuutarka ee muhiimka u ah sii wadista shaqadda oo ku jira midkood gal la qaadi karo ama yaala goob ka baxsan xarunta;

(n) Xaqiijinta badqabka barkallada iyo dabaasha haddii ay jiraan (sidoo kale eeg OAR 414-360-1300, Hawlaha Dabaasha iyo Biyaha); iyo

(o) Qorshuhu waa inuu aqoonsadaa dhakhtar ruqsad leh, isbitaal, ama rug caafimaad si loogu adeegsado daryeelka caafimaadka degdega ah.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu hubiyaa xaaladaha cimilada iyo khataraha kale si loo qaado tallaabada ku habboon caafimaadka iyo badqabka ilmaha. Xaaladaha keenaaya khatarta caafimaadka ama badqabka waxaa ku jiri kara, laakiin kuma koobna:

(a) Kulaylka ka badan 100°F, ama si waafaqsan tallada maamulka maxaliga ah;

(b) Qaboow ka hooseeya 20°F, ama sida waafaqsan tallada maamulka maxaliga ah;

(c) Duufaan wiriq wadata, duufaan dabayleed, duufaan roobaad, ama daad haddii ay jirto khatar taagan ama imaan karta;

(d) Dhul-gariirka;

(e) Xaalada degdega ah ee tayada hawada oo ay amraan maamulka maxaliga ah, gobalka, ama federaalka ee ku aadan tayada hawada ama caafimaadka dadwaynaha;

(f) Ogeysiiska xayiraada xarunta oo ay amreen maamulka badqabka dadwaynuhu; iyo

(g) Dhacdooyinka kale ee lamidka ah.

(4) Adeeg bixiye waa inuu haystaa isha nalka xaalada degdega ah, sida tooshka, oo shaqeynaaya, kaasoo ku jira meel si fudud looga soo baxsan karo.

(5) Adeeg bixiye waa inuu dib u eegaa qorshaha qoran iyo dhammaan habraacyada xaalada degdega ah:

(a) Ugu yaraan halmar muddada ruqsadda uuna wax ka badelaa habraacyada marka loo baahdo.

(b) Uu dib u eegis kula sameeyaa daryeel bixiyaasha ugu yaraan halmar muddada ruqsadda iyo markasta oo wax laga badelo qorshaha.

## 414-360-0220 Diiwaannada Carruurta

(1) Adeeg bixiye waa inuu haystaa xogta soo socota ee ilmo kasta, oo ah warqad ama elektaroonig ah, kahor maalinta koowaad ee uu soo xaadiraayo kaasoo uu ku jiro saxiixa waalid:

(a) Magaca, taariikhda dhalashada, iyo ciwaanka guriga ilmaha;

(b) Taariikhda ilmaha la gashay daryeelka;

(c) Magacyada, ciwaanka guriga iyo ganacsiga, lambarada taleefanka ee waalidka masuulka ka ah ama masuulka sharciga ah;

(d) Magaca iyo xogta xiriirka qofka la wacaayo marka ay xaalad degdeg ah jirto haddii waalidka aan la heli karin;

(e) Magaca iyo lambarka taleefanka qof ilmaha loo dhiibi karo;

(f) Magaca iyo lambarka taleefanka dugsiga ilmuhu dhigto, haddii uu jiro;

(g) Magaca iyo lambarka taleefanka dhakhtarka ilmaha ama xarunta daryeelka xaalada degdega ah, haddii la yaqaano;

(h) Diiwaanka talaalka ama shardi dhaafka sida lagu amray OAR 414-360-0225 Talaallada);

(i) Oggolaanshaha u raadinta daryeelka caafimaadka ee degdega ah iyo gaynta ilmaha xarunta daaweynta xaalada degdega ah ee caafimaadka;

(j) Taariikhda kobaca iyo caafimaadka ee cilado kasta oo saameyn kara ka qaybgalka ilmaha ee daryeelka carruurta;

(k) Qorshaha daryeelka oo qoran ee ilmo kasta oo qaba baahi gaar ah sida lagu qeexay OAR 414-360-1050. Qorshaha daryeelka ee qoran waa in si fudud ay ku heli karaan daryeel bixiyaasha daryeelaaya ilmaha gaarka ah; iyo

(l) Xaqiijinta in waalidiintu heleen nuqulka xeerarka adeeg bixiyaha.

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan diiwaannada carruurta si fudud ay ku heli karaan daryeel bixiyaashu inta lagu jiro saacadaha shaqada si ay ugu adeegsadaan xaalada degdega ah ama carruurta qaba xanuunnada daran ee caafimaadka ama baahiyaha gaarka ah ee daryeelka.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan diiwaannada carruurtu yihiin kuwo wakhtigaas quseeya markasta. Adeeg Bixiyuhu waa inuu u sheegaa waalidka ama masuulka inuu akhriyo, wax ka badelo, uuna saxiixo ama magaca ku qoran foomka diiwaan gelinta ugu yaraan sanad kasta.

(4) Adeeg bixiye waa inuu u ogolaadaa waalidiinta, marka ay codsadaan, inay akhriyaan diiwaannada iyo warbixinnada la xiriira carruurta waalidka, marka laga reebo warbixinnada la xiriira xadgudubka ama dayaca ka dhanka ah ilmo.

## 414-360-0225 Talaallada

(1) Adeeg bixiye waa inuu ku dhaqmaa Xeerarka maamulka ee Maamulka Caafimaadka ee Oregon (arag 333-050-0040) ee la xiriira talaalka carruurta. Haddii ilmo laga diiwaan gasho dugsiga dawlada ama gaarka loo leeyahay ee hoose, talaallada ayaan qasab ahayn in lagu diiwaan gasho xarunta daryeelka carruurta.

(2) Adeeg bixiyaha ayaa daryeel siin kara carruurta ku jira daryeelka waalid korsaday ama aan haysan hoyga inta waalidiinta/masuuliyiintu ay qaadayaan talaabooyinka muhiimka ah si ay ugu dhaqmaan shuruudaha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh.

## 414-360-0230 Ogolaanshiyaasha Waalidka

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa oggolaanshiyaasha soo socda ee hadda jira oo ka yimid waalidka marka ay qusayso:

(a) Dukumiintiga oggolaanshaha qof aan ku qornayn diiwaannada ilmaha si uu u qaado ilmo;

(b) Oggolaanshaha saxiixan ee taariikhaysan ee daawo kasta, kahor inta aan la siin, oo ay ku jiraan:

(A) Magaca Ilmaha;

(B) Magaca iyo sababta daawada loo cunaayo;

(C) Kuurada, taariikahaha, iyo wakhtiyada la siinaayo daawada, iyo sida daawada loo siinaayo; iyo

(D) Haddii daawadu u baahan tahay in talaagad la gasho iyo in kale.

(c) Xanuunnada dabo dheeraada, adeeg bixiye ayaa ogolaansho u heli kara muddo 12 billood ama ka yar asagoo raacaaya tilmaamo gaar ah oo ay ku jiraan marka daawada uu siinaayo, sida kareenka xafaayada iyo daawada neefta (sidoo kale eeg OAR 414-360-1030, Daawooyinka).

(d) Kahor inta aan ilmaha gaari lagu qaadin, adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa xogta soo socota:

(A) Magaca Ilmaha; iyo

(B) Qorshaha gaarka ah ee qaadista iyo keenista oo sheegaaya goobta, wakhtiyada, iyo wareejinta masuuliyada ilaalinta.

(e) Kahor ilmaha da'da dugsiga ee imaanaaya ama ka tagaaya xarunta si iskiis ah.

(f) Oggolaanshaha u qubaynta ilmo, haddii loo baahdo.

(g) Kahor safarka gaaban ama shaqada kale ee loo aadaayo meel ka baxsan xaafada.

(h) Kahor inta aan ilmuhu ka qaybgelin shaqo khatar badan, sida dabaasha ama fuulista buuraha, iyo la wadaagista qorshaha badqabka waalidiinta.

(i) Kahor u adeegsiga sawirada ama muuqaallada laga duubay ilmaha arimo dadwayne (tusaale, soo dhigista baraha bulshada, xayiisiinada).

(2) Haddii qoys uu u adeego adeeg bixiyuhu uu waajahaayo hooy la'aan, bixiyuhu waa inuu sameeyaa dedaallo si uu u raaco OAR 414-360-0230 (1). Haddii adeeg bixiyuhu uusan awoodin inuu helo ogolaanshiyaasha waalidka ee qoran, ogolaanshiyaasha ayaa lagu qaadan karaa hadal ahaan, marka uu qoro adeeg bixiyuhu, ama qaab elektaroonig ah, sida in lagu soo diro fariin qoraal ama iimeylka.

## 414-360-0235 Imaatinka iyo Bixidda

(1) Adeeg bixiye waa inuu qasab uga dhigaa qof kasta oo ilmo keenaaya guriga inuu ilmaha la joogo ilaa ilmaha uu ka qaabilaayo daryeel bixiye.

(2) Adeeg Bixiyaha ayaa keliya ilmo u dhiibi kara waalid ama qof kale oo uu magacaabay uuna aqoonsaday waalidku. Qofka soo qaadaaya ilmaha waa inuu keenaa aqoonsi haddii uusan aqoon daryeeluhu.

(3) Marka laga reebo sida lagu reebay amar maxkamadeed, waalidiintu waa in loo oggolaadaa inay arkaan ilmahooda iyo dhammaan aagaga daryeelka carruurta inta ilmuhu ku jiro daryeelka. Ogeysiiska hore ayaan qasab ahayn.

## 414-360-0240 Diiwaannada Daryeelaha

Adeeg Bixiyuhu waa inuu hayaa diiwaanka shaqsiga ah ee markaas ee daryeel bixiye kasta, qaab warqad ah ama elektaroonig ah, oo ay ku jiraan:

(1) Caddeynta waxbarashada iyo khibrada aqoonta shaqada oo muujinaysa in qofku buuxinaayo shuruudaha shaqada;

(2) Warqada xaqiijinta CBR ee laga soo diray CCLD loona diray adeeg bixiyaha. Haddii adeeg bixiyuhu uusan wali haysan warqadda xaqiijinta CBR ee daryeel bixiyaha, adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa dukumiintiga qoran ee sheegaaya in adeeg bixiyaha ay xaqiijisay CCLD in daryeeluhu ka diiwaan gashan yahay CBR kuna lifaaqan yahay guriga. Dukumiintiga waa inay ku qoran yihiin taariikhda, wakhtiga, iyo magaca shaqaalaha CCLD ee adeeg bixiyuhu la hadlay;

(3) Shahaadada hadda ee carruurta ee CPR iyo tababarka gurmadka degdega ah;

(4) Shahaadada hadda ee cunto kariyaha; kahor inta uusan bixin ama diyaarin cuntada;

(5) Caddeynta ka qaybgalka tababarka; iyo

(6) Bayaan uu saxiixay kuna qoray taariikhda daryeel bixiye oo muujinaaya in uu heli karo xeerarka adeeg bixiyaha iyo shuruucda Shahaadada Guryaha Daryeelka Carruurta ee Qoyska ee Shahaadada leh.

## 414-360-0250 Diiwaannada Barnaamijka

Adeeg bixiyuhu waa inuu joogteeyaa diiwaanada soo socda ee barnaamij, oo ah midkood waraaq ama qaab elektaroonig ah:

(1) Xaadirista maalintaas ee ilmo kasta oo daryeelka carruurta ku jira sida lagu qeexay OAR 414-360-0400(1). Dhammaan daryeel bixiyaashu waa inay heli karaan diiwaannada xaadirinta si loo go'aansho carruurta daryeelka ku jira inta lagu jiro tookadooda shaqada, isbadelada ku dhaca daryeel bixiyaasha, iyo daad-gureynta xaalada degdega ah. Diiwaanka xaadirinta ee maalin kasta waa in lagu daraa:

(a) Magaca Buuxa ee Ilmaha; iyo

(b) Wakhtiyada la qoray marka daryeel bixiyaashu soo galaan iyo marka ay baxaan si diiwaanku u muujiyo daryeel bixiyaasha joogay goobta wakhti gaar ah.

(2) Diiwaannada xaadirinta daryeel bixiyaha ee maalin kasta waxaa ku jira:

(a) Magaca daryeel bixiyaha; iyo

(b) Wakhtiyada imaatinka iyo bixitaanka.

(3) Warbixinnada qoran ee dhaawacyada sida lagu cadeeyay OAR 414-360-1020(1);

(4) Diiwaanka booqdaha si loo qoro dhammaan dadka waawayn, marka laga reebo shaqsiyaadka loo ogol yahay inay keenaan ayna qaadaan ilmo, oo ay ku jiraan magaca, xiriirka kala dhexeeya guriga (tusaale ahaan, mutadawac, adeeg bixiye, marti, mulkiilaha dhulka, iwm.), iyo wakhtiga la qoray ee soo gelista iyo ka bixida guriga.

(5) Dukumiintiga bixinta daawo kasta oo ay ku jiraan:

(a) Magaca Ilmaha;

(b) Daawada la baxshay;

(c) Taariikhda iyo wakhtiga marka daawada la baxshay;

(d) Kuurada ama qiyaasta daawada la bixiyay; iyo

(e) Ciladaha kasta ee ka dhalan kara oo lagu arkay ilmaha.

(6) Diiwaanka qoran ee warbixinnada xadgudubka iyo dayaca ilmaha ee laga shakiyay oo loo diray Waaxda Faya Dhowrka Ilmaha ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ama booliiska.

(7) Diiwaanka qoran ee la xiriira u diyaar garoowga xaalada degdega ah iyo kahortaga dabka, sida taariikhaha tababarka.

(8) Dookhyada asbuucaas, oo wata diiwaanka badellada.

## 414-360-0255 Haynta iyo Helitaanka Diiwaanka

(1) Adeeg Bixiyuhu waa inuu haystaa diiwaanada soo socda muddo labo (2) sano ah:

(a) Kadib abuurista koowaad ee Diiwaannada Barnaamijka la aqoonsaday ee ku jira OAR 414-360-0250;

(b) Kadib shaqo ka saaridda ee Diiwaannada Daryeelaha la aqoonsaday ee ku jira OAR 414-360-0240;

(c) Kadib joojinta daryeelka ee dukumiintiga oggolaanshaha waalidka ee ku qoran OAR 414-360-0230;

(d) Kadib joojinta daryeelka ee Diiwaannada Carruurta ee la aqoonsaday ee ku jira OAR 414-360-0220 ; iyo

(e) Kadib abuurista koobaad, diiwaannada gaariga ee lagu aqoonsaday OAR 414-360-1230(2).

(2) Adeeg bixiye waa inuu haystaa dookhyada sida lagu qeexay OAR 414-360-1100(13) muddo saddex asbuuc ah kadib marka la abuuro.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu diiwaannada gashaa meel ka baxsan xarunta taas oo ka wayn hal (1) sano laakiin waa in la heli karaa 48 saac gudahood, marka la codsado. Adeeg bixiye waa inuu siiyaa dhammaan diiwaannada kale ay ka doonayaan xeerarkaan CCLD wakhti kasta.

(4) Adeeg bixiye waa inuu haystaa ugu yaraan hal daryeel bixiye oo goobta jooga kaasoo heli kara diiwaanno kasta oo lagu kaydiyay qaababka warqadda ama elektarooniga ah.

(5) Diiwaannada elektarooniga ah, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna Diiwaannada Carruurta, Diiwaannada Daryeel Bixiyaasha iyo diiwaannada xaadirista maalintaas, waa inay noqdaan kuwo falaash ku jira si loo adeegsado inta lagu jiro daad gureynta xaalada degdega ah.

(6) Haddii la uu adeegsanaayo diiwaannada elektarooniga ah, adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa habraacyada degsan si loo xaqiijiyo helitaanka degdega ah, ayna ku jirto qaabka kaydka ah ee elektarooniga ah ee gudaha ama banaanka goobta si loo hubiyo in la helo haddii xogtu lunto.

## 414-360-0260 Agabka Loo Heli karo Dib U eegis

(1) Adeeg bixiye waa inuu ku soo bandhigaa waxyaabaha soo socda aaga albaabka, ama goob kale oo kamid ah guriga halkaas oo ay si qeexan uga akhrin karaan waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha carruurta daryeelka ku jira:

(a) Shahaadadii ugu danbaysay ee ay bixisay CCLD;

(b) Dhammaan cabashooyinka daran ee saxda ah iyo warqadaha ku dhaqmid-la'aanta muddo 12 billood ah laga bilaabo taariikhda warqadda;

(c) Ogeysiiska anibaado kasta oo taagan ama wali rahman oo sharci oo lasoo dhajiyay isla markaba iyo inta ay dhaqangalka yihiin, ayna ku jiraan dhammaan inta lagu jiro muddada racfaan kasta;

(d) Webseedka DELC [www.oregon.gov/DELC] iyo lambarka taleefanka [1-800-556-6616], iyo bayaan u sheegaaya waalidiinta in ay xogta la xiriirta bixiyahaha daryeelka carruurta ee ilmahooda ay ka helayaan barta badqabka daryeelka carruurta; iyo

(e) Ogeysiis sheegaaya in agabka ku qoran (3) ee xeerkaan la heli karo.

(2) Adeeg bixiye waa inuu ku soo bandhigaa qorshaha qaab dhismeedka guriga oo sheegaaya goobaha waxyaabaha soo socda aaga albaabka, ama goob kale oo kamid ah guriga halkaas oo ay si qeexan uga akhrin karaan dhammaan shaqsiyaadka masuulka ka ah habraacyada daad gureynta:

(a) Iridaha laga baxo;

(b) Marinnada aasaasiga ah ee daad gureynta;

(c) Marinnada labaad ee daad gureynta; iyo

(d) Aaladaha Dab Damiska.

(3) Adeeg bixiye waa inuu haystaa agabka soo socda oo laga heli karo aaga guud ee badanaa la booqdo si waalidiinta iyo dadwaynuhu u arkaan:

(a) Kormeerkii ugu danbeeyay ee CCLD iyo xeerarka shahaadada guryaha daryeelka carruurta ayaa la heli karaa markii la codsado;

(b) Khulaasada baaritaankii ugu danbeeyay ee biyaha oo ay samaysay CCLD (sidoo kale eeg OAR 414-360-0820, Biyaha Da'aaya iyo Tuubooyinka Biyaha);

(c) Xog ku saabsan sida loosoo sheego cabasho loo gudbinaayo CCLD oo la xiriirta shuruudaha Shahaadada;

(d) Lambarka laynka gurmadka Degdega ah ee Xadgudubka iyo Dayaca Ilmaha iyo shardiga soo sheegista xadgudubka ama dayaca ilmaha ee laga shakiyay;

(e) Ogeysiis sheegaaya in waalidiinta ay qasab tahay in loo ogolaado inay arkaan ilmahooda iyo dhammaan aagaga daryeelka carruurta inta ilmuhu ku jiro daryeelka. Ogeysiiska hore ayaan qasab ahayn.

(f) Xeerka habdhaqanka iyo tusmada adeeg bixiyaha;

(g) Lambarada xaalada degdega ah oo lagu daraayo 9-1-1, marka la heli karo, ama booliiska deegaanka, laynka gurmadka aafada caafimaadka dhimirka ee maxaliga ah, waaxda dab damiska, iyo adeegga aanbalaasta;

(h) Jadwalka Maalin Kasta, sida Lagu Aqoonsaday OAR 414-360-0520;

(i) Dookhyada asbuucaas oo wata diiwaanka badellada; iyo

(j) Qorshe lagu xaqiijinaayo in booqde kasta ama qof kale oo wayn oo aan ka diiwaan gashanayn ama qaab shardi ku xiran yahay uga diiwaan gashan CBR uusan qaab aan la kormeerayn ula joogi karin ilmaha.

## 414-360-0270 Ogeysiisyada

(1) Adeeg bixiye waa inuu u sheegaa CCLD ugu danbayn 5:00pm maalinta xigta ee shaqada waxyaabaha soo socda:

(a) Isbadelka ku dhacay ciwaanka boostada, marka uu ka duwan yahay ciwaanka guriga;

(b) Isbadel ku dhacay lambarka taleefanka;

(c) Talaabada sharci ee la ogyahay ama baaritaanka xadgudubka ama dayaca ilmaha, sida xiritaanka, baaritaanka danbiga ama eedaynta, ama Amarka Difaaca Dhibanaha, oo khuseeya qof daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada laga doonaayo inuu codsado inuu maro baaritaanka shaqsiyadda;

(d) Xiritaanka abadiyanka ah;

(e) Waxyeello kasta oo ku dhacda dhismaha taasoo saamaynaysa awooda adeeg bixiyaha ee ku dhaqanka xeerarka Guryaha Daryeelka Carruurta Qoyska ee shahaadada leh;

(f) Dhacdo ilmaha u keenaysa khatarta waxyeelo degdeg ah, sida ilmo guriga iskaga tagay asagoo uusan ogayn adeeg bixiyuhu ama ilmo keligiis looga tagay gudaha ama banaanka xarunta ama gaari;

(g) Xayawaan qaniinay qof wayn ama ilmo taasoo ka dhacday dhismeyaasha ama ka dhacday meel ka baxsan guriga marka uu ka qaybgalaayay hawlaha daryeelka carruurta;

(h) Shil khuseeya gaadiidka, ilaa in aysan jirin maahee dhaawacyo iyo keliya haddii ay jirto waxyeello yar oo ku dhacday gaariyaasha;

(i) Dhaawac kasta ama shil kasta oo daran oo ku dhacay ilmo;

(j) Ilmo la siiyay kuurada khaldan ee daawo;

(k) Ilmo qaatay ama la siiyay daawada qof kale;

(l) Dhimashada ilmo inta uu ku jiray daryeelka ama geerida daryeel bixiye;

(m) Khataraha kale ama dhacdooyinka u baahan gurmadka degdega ah sida dabka ama daad gureynta ku meel gaarka ah ee carruurta; iyo

(n) Markasta oo anshax mamnuuc ah ama falal mamnuuc ah dhacaan (sidoo kale eeg OAR 414-360-0710, Anshaxa iyo Falalka Mamnuuca ah); iyo

(o) Dhacdo kasta oo la adeegsaday gardaduub jireed (sidoo kale eeg OAR 414-360-0720, Gardaduubka Jireed).

(2) Daryeel bixiye kasta oo haya sabab uu ku aamino in ilmo lagu xadgudbay ama la dayacay ayaa laga doonayaa inuu arinta si degdeg ah ugu wargeliyo Laynka Tooska ah ee Xadgudubka ilmaha ee Oregon (1-855-503-7233), Waaxda Faya Dhawrka Ilmaha ee Adeegyada Aadanaha, ama wakaalada booliiska. Shardigaan ayaa shaqeynaaya 24-ka saac maalintii. Shardigaan ayaa qabanaaya fal kasta oo la xiriira xadgudubka jireed, galmo ama shucuureed ee laga shakiyay; dayaca ilmaha, khatar gelinta ilmaha, ama ku danaysiga ilmaha; taabashada galmo ee khaldan ee u dhexeeya labo ilmood ama ka badan; ama iskudayga isdilka ama hanjabaadaha isdilka ee uu sameeyo ilmo.

(3) Adeeg bixiye waa inuu isla markaba u sheegaa Maamulka Caafimaadka ee Oregon kiis la ogyahay, oo ku dhacay shaqsiyaadka doorka ku leh daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta, xanuunka la-xayiri karo ee daryeelka carruurta, sida lagu qeexay Xeerka Maamulka ee Oregon, OAR 333-019-0010.

(4) Adeeg bixiye waa inuu marka hore is degdeg ah ugu sheegaa waalidiinta ama xiriirka xaalada degdega ah haddii waalidka aan la heli karin uuna qoraa haddii ilmahooda:

(a) Uusan imaan iskiis guriga sidii la mudeeyay, sida marka ilmaha gaaray da'da dugsiga uu guriga u lugaynaayo ama marka ilmo laga soo qaadaayo barnaamij kale;

(b) Haddii uusan joogin goobta laga qaadi lahaa wakhtigii la qorsheeyay;

(c) Uu qayb ka yahay dhacdo ilmaha gelisay khatar sida inuu lumay, in la waayay ama in keligiis looga tagay garoon, safar gaaban, ama gaari;

(d) Ay ku dhacday xasaasiyad laga shakiyay, uuna sidoo kale liqay ama taabtay waxyaabo xasaasiyad ku kiciya xataa haddii aysan xasaasiyad ku kicin;

(e) Aan loo siin daawada sidii ku qornayd tilmaamaha;

(f) Uu helay daawada xaalada degdega ah sabab la xiriirta xanuun nolosha khatar ku ah sida epinephrine;

(g) Uu ku dhaco dhaawac u baahan kara qiimeyn uu sameeyo xirfadle caafimaad ama saamayn kasta oo ku dhacda madaxa ilmaha;

(h) Uu u banbaxay sun;

(i) La siiyay caanaha aadanaha ama caano booraha ilmaha oo loogu talo galay ilmo kale (eeg OAR 414-360-0610, Quudinta Dhalaanka);

(j) Uu qaniinay xayawaan ama ilmo kale, markaas oo maqaarku dilaacay ama marka qiimeyn uu sameeyo dhakhtar loo baahday;

(k) Laga saaray kooxda sabab la xiriirta xanuun;

(l) Uu dhinto inta uu ku jiro daryeelka; ama

(m) Uu qayb ka noqdo dhacdo kasta oo la adeegsaday gardaduub jireed (sidoo kale eeg OAR 414-360-0720, Gardaduubka Jireed).

(5) Adeeg bixiye waa inuu si degdeg ah ugu sheegaa waalidiinta qaab qoraal ah haddii xaalad ama xanibaad la saaray ruqsadda.

(6) Adeeg bixiye waa inuu u sheegaa waalidiinta marka uu ilmaha qaadaayo:

(a) Isbadelada waawayn ee ku dhacay xaalada jireed ama shucuureed ee ilmihiisa;

(b) Dhaawacyada la ogyahay sida go'idda, xagtimaha, iyo qaniinyada ka timaada ilmaha kale oo u baahan daawaynta gurmadka degdega ah;

(c) Cudurka xanibaada saari kara daryeelka carruurta ama dhiqlaha ka yimaada daryeelaha ama ilmo kale;

(d) Daawo kasta oo ilmaha la siiyay;

(e) Xayawaanka qaniinay ilmaha, marka maqaarku dilaacay; iyo

(f) Qorsheyaasha iyo habraacyada xaalada degdega ah ee la dhaqan gashay, marka laga reebo tababarada.

(7) Adeeg bixiye waa inuu u sheegaa waalidiinta haddii uu jiro adeeg bixiye badel ah iyo magaca adeeg bixiyaha badelka ah. Marka ay dhacdo xaalad degdeg ah, dedaalka daacadda ah ayaa la samayn doonaa si loogu wargeliyo waalidiinta in adeeg bixiye badel ah uu daryeeli doono carruurta.

(8) Kahor inta aysan dhicin, adeeg bixiye waa inuu u sheegaa qoysaska safaro kasta oo gaaban oo la qorsheeyay ayna ku jiraan wakhtiyada bixintaanka iyo soo laabashada ee la qiyaasay iyo meesha loo socdo.

(9) Adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa ugu yaraan qaab uu ku wargeliyo qoysaska marka ilmo ama daryeel bixiye uu qabo xanuunka xanibaada saari kara daryeelka carruurta, sida lagu qeexay Xeerka Maamulka ee Oregon, ama sunta cuntada (sidoo kale eeg OAR 414-360-1010, Xanuunka);

(10) CCLD ayaa u sheegi doonta waalidiinta ama masuuliyiinta ilmaha kayar 12 billood ee ka diiwaan gashan guriga amar kasta oo la xiriira ku dhaqmid-la'aanta OOAR 414-360-0620(1)(a)(A) ilaa (C), OAR 414-360-0620(1)(b) iyo (c), iyo OAR 414-360-0630(1)(a) ilaa (l).

## 414-360-0300 Shur' Guud ee Daryeel bixiyaha

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan daryeel bixiyaasha, mutadawiciinta iyo xubnaha guriga ku nool ee sida aan la kormeerin ama la kormeeraayo ula falgeli kara ilmaha daryeelka carruurta ku jira:

(a) Ay ku dhaqmaan xeerarka shahaadada;

(b) Inay aqoonsadaan ayna talaabo qaadaan si ay u saxaan khataraha badqabka jireed, ee ka jira labadaba gudaha iyo banaanka;

(c) Waa inay muujiyaan garashada wanaagsan sida lagu cadeeyay habdhaqanka masuuliyadda leh kaasoo si macquul ah u xaqiijinaaya caafimaadka iyo badqabka carruurta; iyo

(d) Aysan cunin auysana isticmaalin wax maandooriye ah kaasoo naafaynaaya awoodooda daryeelidda carruurta. "Sarqaansan" waxaa laga wadaa habdhaqanka khaldan ee loo jeedo ama naafooyinka dhimirka ama shaqada jireed taasoo keenaysa in qof macquul ah uu aamino in qofku isticmaalay khamri, ama maandooriyaal (ayna ku jirto daawada dhakhtarku qoro ee sharciga ah ama daawooyinka suuqa laga iibsado), marijuana ama koolada la dhuuqo taasoo naafaynaysa qabashada shaqada muhiimka ah ama abuuraysa khatarta tooska ugu dhacaysa carruurta ku jira daryeelka carruurta ama dadka kale.

(2) Dhammaan daryeel bixiyaasha, uuna ku jiro adeeg bixiyaha waa inay:

(a) Gaar ka dhigaan daryeelka iyo fursadaha waxbarashada si loo daboolo baahiyaha ilmo kasta ayadoo lagu saleynaayo da'da iyo awoodaha ilmaha, ayna ku jirto dib u eegista xogta ay bixiyaan waalidka ayagoo haddana ilaalinaaya sirta xogta;

(b) Jir ahaan awoodaan fulinta waajibaadka la xiriira daryeelka carruurta;

(c) Waa inay ilmaha ula dhaqmaan si xushmad leh, qadarin leh, aqbalaad leh, oo dulqaad leh;

(d) Waa inay muujiyaan filashooyinka xaqiiqiga ah ee habdhaqanka ayadoo loo eegaayo da'da, awoodaha, iyo baahiyaha ilmaha;

(e) Waa inay aqoonsadaan ayna xushmeeyaan khusuusiyaadka iyo himiladda dhammaan carruurta, qoysaskooda, iyo dhaqannadooda;

(f) Waa inay soo sheegaan xadgudubka, dayaca, iyo ku danaysiga ilmaha ee laga shakiyay sida uu amraayo sharciga Oregon (sidoo kale eeg OAR 414-360-0270, Ogeysiisyada); iyo

(g) Waa inay leeyihiin tababarka iyo khibradda laga doonaayo shaqada ay qabanayaan.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in qof kasta oo muujiya habdhaqan khatar gelin kara caafimaadka, badqabka ama fayo dhawrka ilmo aan loo ogolaan dhismeyaasha inta lagu jiro saacadaha daryeelka carruurta aana loo ogolaan inuu la kulmo ilmaha ku jira daryeelka. Dadka degan guriga ayaa loo aqoonsan yahay inay ilmaha ku jira daryeelka carruurta la falgalaan xataa haddii aysan inta badan joogin guriga inta lagu jiro saacadaha shaqada.

(4) Daryeel bixiye kasta oo lagu yaqaano ama u muuqda inuu qabo xanuun keenaaya xanuun keenaaya in la xayiro goobta daryeelka carruurta, sida lagu qeexay OAR 333-019-0010, astaanta xanuunka jirka oo lagu qeexay OAR 414-360-1010(1)(b)(A) ilaa (K), ama naafo dhanka dhimirka ah oo keenaysa khatar ku dhacaysa caafimaadka ama badqabka carruurta waa in laga saaraa masuuliyadda.

## 414-360-0310 Diiwaan gelinta Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda

(1) Adeeg Bixiyaha waa in laga diiwaan gashaa nidaamka CBR ee CCLD kahor inta aan la bixin shahaadada. Dhammaan daryeel bixiyaasha iyo dadka kale ee degan guriga daryeelka carruurta ee jira 18 sano iyo ka wayn waa in laga diiwaan gashaa ama shardi diiwaan gelineed loogu sameeyaa CBR-ka CCLD kahor inta aan la siin shahaadada hore ama cusbooneysiinta ah.

(2) Dadka degan guriga daryeelka carruurta ee jira 18 sano ama ka wayn waa in laga diiwaan gashaa ama shardi diiwaan gelineed loogu sameeyaa CBR-ka CCLD ugu danbayn dhalashadooda 18aad.

(3) Haddii mulkiiluhu uusan ahayn adeeg bixiyaha, mulkiiluhu waa inuu ka diiwaan gashan yahay CBR si uu u joogo dhismeyaasha ama uu ula joogo ilmaha ka baxsan goobta inta lagu jiro saacadaha daryeelka carruurta.

(4) Adeeg bixiyuhu waa inuu ka helaa xaqiijin CCLD kaasoo ah in qof jira 18 sano ama ka wayn, uu ka diiwaan gashan yahay ama diiwaan gelin shardi leh looga sameeyay CBR kahor inta aan qofku awoodin:

- (a) Inuu dago guriga daryeelka carruurta;
- (b) Uusan joogin habaynkii dhismeyaasha muddo ka badan 14 maalmood oo xiriir ah, oo aan ka badnayn 30 maalmood sanadkii, ilaa in aan laga dooneyn maahee in laga diiwaan gasho CBR sida ku qoran qodob hoosaadka (5) ee xeerkaan;
- (c) Inuu ka shaqeeyo guriga; ama;
- (d) Inuu mutadawac ahaan uga shaqeeyo guriga, sida shardiga ku ah OAR 414-360-0360.

(5) Shaqsiyaadka jira 18 sano iyo ka wayn ee dagan dhismeyaasha guryaha la dagan yahay ee aan ahayn guriga daryeelka carruurta (ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, Guryaha La Dawad Dagan yahay (ADUs) ama Guryaha Kale ee Badelka ah, guryaha yaryar, gaariyaasha dalxiiska (RVs), tareeleyaasha, guryaha garaashka, iwm.) ayaan laga doonayn in laga diiwaan gasho CBR haddii dhammaan shuruudaha soo socda la buuxiyo:

(a) Dadka degan ama booqanaaya aaga fadhiga uusan aqoon adeeg bixiyuhu in laga saaray ama loo diiday ama looga saaray CBR sabab jirta;

(b) Aagga fadhiga ayaa la geli karaa ayadoo aan la gelin guriga daryeelka carruurta;

(c) Dadka dagan ama booqanaaya aaga nolosha aysan fursad u helin inay u galaan carruurta daryeelka carruurta ayaga oo aan oggolaansho ka helin adeeg bixiyaha uuna la joogo daryeel bixiye u shaqeeya guriga daryeelka carruurta. Ujeedooyinka xeerkaan awgood, shaqsi ayaa fursad u helaaya inuu u tago carruurta ku jirta daryeelka carruurta haddii uu awoodo inuu u dhawaado heer ku filan inuu taabto ama uu la hadlo ilmo ku jira daryeelka carruurta gudaha ama banaanka guriga.

(d) Daryeelka carruurta aan marna lagu samayn aaga la dagan yahay iyo in aan carruurta daryeelka carruurtu aysan tagi karin aagga fadhiga; iyo

(e) Aaga fadhigu uu leeyahay aasaasiyaadka muhiimka ah sida biyo socda, musqul, iyo alaabta cunto karinta, ayadoo aan loo baahan in la galo guriga daryeelka carruurta inta lagu jiro saacadaha shaqada ama marka carruurta daryeelka ku jira ay joogaan.

(6) Adeeg bixiyaha, daryeel bixiyaasha, iyo shaqsiyaadka kale ee laga doonaayo in laga diiwaan gasho CBR waa inay ku jiraan diiwaanka CBR markasta inta ruqsadda daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ay shaqeynayso.

(7) Shaqsiyaadka ku jira diiwaan gelinta shardiga leh ee CBR waa inaysan la kulmin ilmaha ayagoo aan la kormeerayn.

(8) Booqde kasta oo yimaada guriga daryeelka carruurta ama qofka kale ee wayn ee aan ku jirin diiwaanka CBR waa inaysan la kulmin ilmaha ayagoo aan la kormeerayn.

(9) Adeeg bixiye waa inuu haystaa difaacyada badqabka oo diyaarsan si looga hortago la joogitaanka booqdaha aan la kormeerayn ee carruurta, ayna ku jirto hanaanka keenista iyo bixinta oo qoraaya:

(a) Magaca qofka iyo xiriirka kala dhexeeya daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada (tusaale ahaan, mutadawac, adeeg bixiye, marti, iwm.); iyo

(b) Wakhtiyada imaatinka iyo bixitaanka.

(10) Adeeg bixiye waa inuu xaqiijiyaa in shaqsiyaadka diiwaan gelintooda CBR laga la noqday, la diiday, ama la hakiyay, aysan soo gelin dhismeyaasha inta lagu jiro saacadaha shaqada ama marka ilmaha ku jira daryeelka carruurta ay joogaan; la hadlaan ilmaha ku jira daryeelka carruurta; ama ku nool dhismeyaasha guriga daryeelka carruurta (ayna ku jirto, laakiin kuma koobna guryaha AUDs ama guryaha kale ee Gaarka ah, guryaha yaryar, Rvs, tareeleyaasha, guryaha garaashka, iwm.).

(11) Haddii xog dheeraad ah loo baahdo si loo qiimeeyo awooda qofka ee daryeelka carruurta ama inuu la kulmo carruurta, CCLD ayaa ka dooni karta tixraacyo, qiimeyn uu sameeyo dhakhtar, la taliyaha, ama qof kale oo u qalma, ama xog kale.

## 414-360-0320 Waajibaadka iyo Aqoonta Adeeg Bixiyaha

(1) Adeeg bixiyaha ayaa masuul ka ah:

(a) Ilaalinta ku dhaqanka dhammaan xeerarka daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh iyo dhammaan shuruudaha ku qoran shahaadada;

(b) Maamulida shaqooyinka maamulka, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna: haynta diiwaannada; maamulka maaliyadda; miisaaniyad dejinta; ilaalinta dhismaha iyo garoomada; qorsheynta cuntada iyo diyaarinteeda; iyo gaadiidka, haddii la bixiyo;

(c) kormeerka carruurta ku jira daryeelka; iyo

(d) Kormeerka kaaliyaasha, mutadawaciinta iyo daryeel bixiyaasha kale.

(2) Adeeg bixiye waa inuu goobta joogaa uuna si firfircoon uga shaqeeyaa daryeelka carruurta ku jira daryeelka carruurta, ugu yaraan nus kamid ah saacadaha shaqada ee asbuucii ama 40 saacadood asbuuc kasta, hadba kii yar.

(3) Haddii xaruntu haysato shahaadada daryeelka in ka badan 12 carruur ah, adeeg bixiye waa inuu goobta joogaa uuna si firfircoon uga shaqeeyaa daryeelka carruurta ku jira daryeelka carruurta, ugu yaraan 2/3 kamid ah saacadaha shaqada ee asbuucii ama 40 saacadood asbuuc kasta, hadba kii yar.

(4) Saacadaha uu adeeg bixiyuhu joogo goobta waa in lagu xisaabshaa asbuuc kasta, marka laga reebo fasaxa la qorsheeyay, sida dalxiistada, ama maqnaanshiyaasha xaalada degdega ah keentay.

(5) Adeeg Bixiyaha ama adeeg bixiyaha badelka ah waa inuu joogaa guriga daryeelka carruurta ama aagaga nashaadada inta lagu jiro dhammaan saacadaha shaqada.

(6) Adeeg Bixiyuhu waa inuu:

(a) Jiraa ugu yaraan 18 sano haddii xaruntu haysato shahaadada daryeelka 12 carruur ah; ama

(b) Jiro ugu yaraan 21 sano haddii xaruntu haysato shahaadada daryeelka wax ka badan 12 carruur ah;

(c) Waa inuu buuxshaa shuruudaha biloowga hore (arag OAR 414-360-0370(1)) iyo tababarka sanadlaha ah (Arag OAR 414-360-0380);

(d) Waa inuu haystaa midkood kuwa soo socda:

(A) Ugu yaraan 1,500 saacadood oo khibrad ah ugu yaraan midkiiba yahay shaqo sadex saacadood ah, oo uu helay intii lagu jiray 36 billood ee lasoo dhaafay, uuna ku helay koox carruur ah oo ku daryeelaayay goob joogto ah. Goobta noocaas ah waxaa ku jira dugsiga barbaarinta, dugsiga xanaanada, xarunta daryeelka carruurta, guriga daryeelka carruurta ee shahaadada leh ama diiwaan gashan, barnaamijka Head Start, ama wax u dhigma.

(i) Khibrada waa in la qoraa.

(ii) Wakhtiga lagu qaatay casharada kuleejka ama barashada macalinimada ayaa loo arkaa inay tahay khibrad wax baris oo shardiga buuxinaysa.

(iii) Qaybta soo socota ayaan ahayn khibrad la xisaabin karo: hogaamiyaha ciidanka calan saarka; Macalinka dugsiga Axada; iyo tababarista.

(iv) Haddii khibrada macalinimada ee u qalanta ee adeeg bixiyaha lagu saleeyo daryeelka carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan, xajmiga ugu badan ee guriga loo ogol yahay waxaa lagu xadidayaa 12. Kahor codsashada qaadashada shahaadada daryeelka ilaa 16 ilmood, adeeg bixiyuhu waa inuu dhamaystaa 1,500 oo saacadood oo shaqo ah asagoo ah xarunta daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh oo uu daryeelaayay 12 ilmood ama kayar.

(B) Dhamaystirta 20 dhibcood (nidamaka simistarka) ama 30 dhibcood (nidaamka rubuclaha ah) oo ah tababarka kuleejka ama jaamacada ee waxbarashada dhalaanka ama hormarinta ilmaha; ama

(C) Dukumiintiga cadeynaaya helitaanka ugu yaraan talaabada 6-aad ee Diiwaanka Oregon.

(7) Kahor inta aan adeeg bixiyuhu bixin daryeelka wax ka badan labo carruur ah oo ka yar 24 bilood, adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa ugu yaraan 30 saacadood oo tababarka gaarka ah ee daryeelka dhalaanka iyo socodbaradka ah.

(8) Kahor inta aan adeeg bixiyuhu bixin daryeelka wax ka badan afar carruur ah oo ka yar 24 bilood:

(a) Adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa 20 saacadood oo dheeraad ah oo tababarka gaarka ah ee daryeelka dhalaanka iyo socod baradka ah. Tani waxay dheeraad ku tahay 30 saacadood ee tababarka gaarka ah ee ku qoran OAR 414-360-0320(7); iyo

(b) Ugu yaraan hal daryeel bixiye oo aan ahayn adeeg bixiyaha waa inuu buuxiyaa shuruudaha ku qoran OAR 414-360-0320(7).

(c) Haddii xaruntu haysato shahaadada daryeelka wax ka badan 12 ilmood, waa in uu jiraa daryeel bixiye buuxinaaya shuruudaha tababarka ee ku qoran OAR 414-360-0320(7) kaasoo jooga goobta markasta oo shan ilmood ama ka badan oo ka yar 24 bilood jir ay joogaan daryeelka.

(9) Adeeg bixiyuxu waa inuusan haysan shaqo kale, mushaar leh ama bilaash ah, midkood gudaha ama ka baxsan guriga, inta lagu jiro saacadaha adeeg bixiyuhu si rasmi ah ula sahqeynaayo daryeelka carruurta ku jira daryeelka carruurta.

(10) Adeeg bixiye badelka u ah adeeg bixiyaha waa inuu:

(a) Buuxiyaa shuruudaha kaaliyaha II (OAR 414-360-0340(3));

(b) Waa inuu yaqaanaa shuruudaha shahaadada;

(c) Waa inuu heli karaa dhammaan diiwaannada laga doonaayo shahaadada;

(d) Waa inuu yaqaanaa waajibaadka adeeg bixiyaha iyo daryeel bixiyaal kasta oo kale ama mutadawiciinta;

(e) Waa inuu yaqaanaa uuna awoodaa inuu ka jawaabo baahiyaha carruurta ku jira daryeelka ayna ku jiraan xasaasiyaadka ilmaha gaarka ah, qorsheyaasha daryeelka, iyo baahiyo kasta oo gaar ah;

(f) Waa in loo fasaxaa uuna awoodo inuu saxo khaladaadka; iyo

(g) Waa in uu galka ku hayaa diiwaanka dib u eegista shuruudaha ku qoran qaybtaan (OAR 414-360-0320(10)).

(11) Bixiyaasha badelka ah ee lagu heli karo Badellada Daryeelka Carruurta ee Oregon (CCSO) ayaa badel u noqon kara adeeg bixiyaha, kaaliyaha II ama kaaliyaha I ayaga oo aan haysan khibrada hore ee shaqada daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta. Tababarka shaqada (arag OAR 414-360-0370(3)(a)) waa in la sameeyaa kahor inta aan qofku noqon daryeelaha badelka ah ee daryeelka carruurta ee shahaadada haysta.

## 414-360-0340 Waajibaadka iyo Aqoonta Kaaliyaasha

(1) Kaaliyaasha ayaa lagu dari karaa xisaabinta saamiga daryeelaha iyo ilmaha.

(2) Kaaliyaha I waa inuu:

(a) Jiraa ugu yaraan 14 sano;

(b) Waa inuu buuxiyaa Shuruudaha Tababarka ee Hore (Eeg OAR 414-360-0370(3), Tababarka shaqada iyo Tababarka Hore);

(c) Haddii uu ka yar yahay 18, waa inuu kormeeraa UUNA maqlayaa daryeel bixiye buuxiyay shuruudaha aqoonta ee adeeg bixiyaha ama bixiyaha badelka ah. Haddii uu ka yar yahay 18, kaaliyaha I ayaan marna keligiis looga tagi karin ilmo ama koox carruur ah;

(d) Haddii uu jiro 18 ama ka wayn yahay, uu u jeedo AMA maqlaayo daryeel bixiye buuxiyay shuruudaha adeeg bxiyaha ama adeeg bixiye badel ah, markasta inta uu ilmaha la joogo.

(3) Kaaliyaha II waa inuu:

(a) Jiraa ugu yaraan 18 sano uuna ka diiwaan gashan yahay CBR;

(b) Waa inuu dhamaystay dhammaan Shuruudaha la Qabsiga iyo Tababarka Hore (OAR 414-360-0370)(3); iyo

(c) Waa inuu buuxiyaa Shuruudaha Tababarka Sanadlaha ah (OAR 414-360-0380).

(4) Marka uu ogolaado adeeg bixiyuhu, kaaliyaha II ayaa ka maqnaan kara daawashada iyo maqalka adeeg bixiyaha asagoo daryeelaaya koox carruur ah.

## 414-360-0360 Mutadawiciinta

(1) Haddii mutadawaca lagu tiriyo go'aaminta saamiga daryeelaha iyo ilmaha, mutadawacu waa inuu:

(a) Buuxiyaa shuruudaha aqoonta ee shaqada uu buuxinaayo, ayna ku jirto diiwaan gelinta CBR;

(b) Waa inuu buuxiyaa shuruudaha la qabsiga iyo tababarka hore (eeg OAR 414-360-0370(3)); iyo

(c) Waa inuu buuxiyaa shuruudaha tababarka sanadlaha ah ee shaqada uu buuxinaayo.

(2) Haddii mutadawiciintu ay ayaga oo aan la kormeerayn la joogi karana carruurta, waa in laga diiwaan gashaa CBR.

(3) Haddii mutadawiciintu aysan bilaa kormeer la joogi karin ilmaha marna, ayna ku jirto wakhtiyada xaalada degdega ah jirto, adeeg bixiye waa inuu leeyahay xeerka qoran ee arintaan cadeynaaya. Xeerka waa in ay yaqaanaan dhammaan daryeel bixiyaasha iyo mutadawiciintu, mutadawiciintuna uma baahna in laga diiwaan gasho Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda.

## 414-360-0370 La qabsiga iyo Tababarka Hore

(1) Kahor inta aan la siin shahaadada hore, adeeg bixiye waa inuu buuxiyaa:

(a) Cadeynta Tababarka Caafimaadka iyo Badbaadada Daryeelka Carruurta;

(b) Ugu yaraan labo saacadood oo tababar ah oo uu ku qaatay xadgudubka iyo dayaca ilmaha kaasoo gaar u ah sharciga Oregon;

(c) Hurdada Badqabka leh ee Ilmaha Oregon;

(d) Shahaadada hadda ee CPR iyo gurmadka degdega ah ee ilmaha. Tababarka CPR waa inuu leeyahay casharka gacanta lagu qabto.Koorsooyinka CPR ee khuseeya casharada oonlaynka ah ee leh qaybta casharka gacanta lagu qabtay ayaa la aqbali karaa. Tababarka CPR ee gebi ahaanba oonlaynka ah ayaan la aqbali karin;

(e) Aasaaska tababarka barashada kobcinta ilmaha; iyo

(f) Shahaadada shaqaalaha cuntada ee Oregon.

(2) Shahaadada hadda ee shaqaalaha cuntada ee adeeg bixiyaha ee Oregon iyo shahaadada CPR iyo gurmadka degdega ah ee ilmaha waa inay yihiin kuwo wakhtigaas shaqeynaaya inta shahaadadu jirto.

(3) Adeeg Bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan daryeel bixiyaasha, ayna ku jiraan kuwa badelka ah:

(a) Helaan tababarka la qabsiga 10-ka maalmood ee ugu horeeya ee shaqada gudahood marka ay ka shaqeynayaan guriga iyo kahor inta aan daryeel bixiyaashu keligood la joogi karin ilmaha. Kormeerka goobta waa in lagu daraa, laakiin kuma koobna:

(A) Akhrinta xeerarka guryaha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh;

(B) Qorshaha qoran ee u diyaar garoowga xaalada degdega ah oo ka hadlaaya daad gureynta, meel kale u wareejinta, ku dhuumashada goobta iyo habraacyada la yaqaano, iyo ka jawaabista xaaladaha degdega ah ee caafimaadka, xanuunka iyo dhaawacyada, xasaasiyadaha, iyo shilalka kale;

(C) Kahortaga iyo xakamaynta cudurada caabuqa;

(D) Badqabka dhismaha iyo guryaha ayna ku jirto aqoonsiga iyo kahortaga khataraha sida khataraha korontada, goobaha biyaha, iyo isku socodka gaariyaasha;

(E) Maamulka iyo kaydinta agabka khatarta ah iyo qashin ku darista saxda ah ee dheecaanka jirka;

(F) Farsamooyinka hurdada badqabka leh, kahortaga xanuunka ruxista ilmaha, jugta madaxa ee xadgudubka ah, iyo si xun ula dhaqmidda ilmaha;

(G) Xeerarka adeeg bixiyaha, sida ku cad xeerka OAR 414-360-0200, xeerarka; iyo

(H) Habraacyada soo sheegista xadgudubka ama dayaca ilmaha ee laga shakiyay.

(b) Waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda 30 maalmood gudahood laga bilaabo biloowga shaqada guriga iyo kahor inta aysan bilaa kormeer la joogin carruurta:

(A) Tababarka Caafimaadka iyo Badbaadada Daryeelka Carruurta;

(B) Ugu yaraan 2 saacadood oo ah tababarka ay CCLD aqoonsan tahay kaasoo la xiriira aqoonsiga iyo soo sheegista xadgudubka iyo dayaca ilmaha kaasoo gaar u ah sharciga Oregon; iyo

(C) Hurdada Badqabka leh ee Ilmaha Oregon.

(c) Waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda 90 maalmood gudahood laga bilaabo billoowga shaqada guriga iyo kahor inta aysan bilaa kormeer la joogin carruurta:

(A) Shahaadada hadda ee CPR iyo gurmadka degdega ah ee ilmaha. Tababarka CPR ee oonleenka ah ayaa keliya la aqbali karaa haddii ay la socoto casharka gacanta lagu qabto.Agabka CPR iyo gurmadka degdega ah waa in lagu hayaa mid cusub inta uu qofku ka shaqeynaayo guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh; iyo

(B) Aasaaska tababarka barashada kobcinta ilmaha.

(d) Waa inuu qaataa shahaadada shaqaalaha cuntada ee Oregon kahor inta uusan diyaarin uusana qaybinta cuntada iyo/ama masaasadaha. Shahaadada shaqaalaha cuntada ee in ay ahaataa mid shaqeynaysa inta uu qofku ka shaqeynaayo guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh.

## 414-360-0380 Tababarka Sanadlaha ah

Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in shuruudaha soo socda ee tababarka uu buuxiyo daryeel bixiye kasta:

(1) Adeeg bixiyaha iyo kaaliyaha II ee kasta waa inuu haystaa ugu yaraan 15 saacadood oo ah tababarka waxbarashada rasmiga ah ee sanad kasta oo la xiriirta daryeelka carruurta, taasoo ugu yaraan 8 saacadood kamid ah lagu qaadanaayo hormarinta ilmaha iyo 1 saac oo lagu qaadanaayo caafimaadka, badqabka, iyo nafaqada (HSN).

(2) Adeeg bixiyaasha badelka ah iyo kaaliyaasha II ee badelka ah ee daryeelka bixiya muddo 240 saacadood ah ama ka badan sida ku cad mudada shatiga waa inay buuxiyaan shuruudaha tababarka sanadlaha ah ee lagu aqoonsaday OAR 414-360-0380(1). Kaaliyaha II ee badelka u ah adeeg bixiyaha waa inuu buuxiyaa shuruudaha tababarka sanadlaha ah ee lagu aqoonsaday OAR 414-360-0380(1).

(3) Daryeel bixiyaasha shaqeynaayay wax kayar sanad waa inay buuxiyaan shuruudaha tababarka ee lagu qiimeeyay 1.25 saacadood bil kasta oo ay ka shaqeynaayeen mudada shatiga ee hadda. Haddii 15 saacadood oo tababar ah la qiimeeyo, shardiga marista 8 saacadood oo tababarka hormarinta ilmaha ah ama waxbarashada dhalaanka ah ayaan qabanayn.

## 414-360-0385 Shuruudaha Tababarka

(1) Adeeg bixiyaha iyo dhammaan daryeel bixiyaasha u shaqeeya guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh waa inay koonto shaqeynaysa ku leeyihiin ORO. Tababarka daryeel bixintu waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

- (a) Waa inay ansixisaa ORO; iyo
- (b) Waa inuu socday ugu yaraan 1 saac.

(2) Qaybaha Aqoonta Aasaasiga ah (CKC) ayaa loo aqbalayaa shardiga hormarinta ilmaha iyo waxbarashada dhalaanka: Kala duwanaanta, Nidaamyada Qoyska iyo Bulshada, Kobaca iyo Hormarinta Aadanaha, Caafimaadka, Badqabka, iyo nafaqada, Xarumaha iyo Manhajka Waxbarashada, Kormeerka iyo Qiimeynta, Baahiyaha Gaarka ah, iyo Fahanka iyo Hagista Habdhaqanka.

(3) Daryeelka carruurta ee shahaadada haysta ee qoyska ayaa ku xisaabin kara tababarka soo socda ee daryeelaha ee hore 15-ka saacadood ee tababarka sanadlaha ah inta lagu jiro sanadka koowaad ee shaqada. Saacadahaan, marka laga reebo (f) ayaan lagu dabiqi karin shardiga 8 saacadood ee hormarinta ilmaha ama waxbarashada dhalaanka:

- (a) Ilaa 2 saacadood oo tababar ah mudada koobaad ee cusbooneysiinta kadib taariikhda shaqaalaysiinta daryeelaha;
- (b) Tababarka CPR ee carruurta iyo gurmadka degdega ah;
- (c) Tababarka shaqaalaha cuntada;

(d) Tababarka CCLD aqoonsan tahay kaasoo la xiriira aqoonsiga iyo soo sheegista xadgudubka iyo dayaca ilmaha kaasoo gaar u ah sharciga Oregon;

(e) Caafimaadka iyo Badbaadada Daryeelka Carruurta ee CCLD bixisay; iyo

(f) Aasaaska tababarka barashada kobcinta ilmaha.

(4) Inta lagu jiro sanadaha xiga ee mudada shaqada, daryeel bixiyaasha ayaa ku tirsan kara tababarka soo socda ee lagu celiyay qayb kamid ah 15 saacadood ee tababarka:

(a) Ilaa 5 saacadood oo tababarka CPR iyo gurmadka degdega ah ee carruurta ah ama tababarka shaqaalaha cuntada;

(b) Tababarka ay CCLD aqoonsan tahay kaasoo la xiriira aqoonsiga iyo soo sheegista xadgudubka iyo dayaca ilmaha kaasoo gaar u ah sharciga Oregon laakiin keliya 3 sanaba mar; iyo

(c) Tababarka Xirmada 2 (heerka dhexe) ama Xirmada 3 (heerka sare) sida lagu qeexay ORO ayaa lagu celin karaa halmar, marka la xaqiijiyo in aan la qaadan 2 sano ee lasoo dhaafay gudaheed.

## 414-360-0400 Carruurta ku Jira Daryeelka Iyo Saamiyada Daryeel Bixiyaha iyo Ilmaha

(1) Tirada daryeel bixiyaasha waa in lagu jaangooyaa tirada iyo da'aha ilmaha daryeelka ku jira. Saamiyada qasabka ah ee daryeelaha iyo ilmaha waa in la joogteeyaa markasta. Kuwaan waxaa kamid ah:

(a) Dhammaan carruurta ku jira daryeelka carruurta, sida lagu qeexay xeerka OAR 414-360-0100(11);

(b) Ilmaha gaarka ah ee adeeg bixiyaha, ayna ku jiraan carruurta la korsaday, 9 sano jir ama kayar;

(c) Dhammaan carruurta gaarka ah ee daryeel bixiyaasha kale ee jira 12 sano ama kayar;

(d) Carruur kasta oo kale oo jira 12 ama kayar kuwaasoo adeeg bixiyuhu masuul ka yahay; iyo

(e) Carruur kasta oo jira 17 sano ama kayar, ayna ku jiraan ilmaha uu dhalay adeeg bixiyuhu, ilmaha uu korsaday, carruurta daryeelka carruurta ama carruurta kale ee adeeg bixiyuhu masuul ka yahay, kuwaasoo qaba baahiyaha gaarka ah ama naafada ah kuwaasoo u baahan heerka daryeel ka sareeya kan ilmaha facood ah ee da'daas jira.

(2) Ilmaha kale, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna ilmaha qaraabada, carruurta xaafada ama saaxiibada carruurta adeeg bixiyaha, ayaa ku jira tirada ugu badan ee carruurta ah ee loo ogol yahay daryeelka haddii ay joogaan guriga daryeelka carruurta inta lagu jiro saacadaha shaqada si joogto ah ama haddii ay ku joogaan qaab marar dhif ah ayagoo uusan si toos ah u ilaalinayn waalidka ilmuhu ama qof kale oo wayn kaas oo aan sidoo kale daryeel siinayn carruurta ku jira daryeelka carruurta.

(3) Lama ogola ilmo kayar 6 asbuuc jir inuu ku jiro daryeelka guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh. Kuwaan kuma jiraan carruurta adeeg bixiyaha.

(4) Tirada daryeel bixiyaasha ayaa lagu go'aanshaa da'da iyo tirada ilmaha ugu yaryar ee kooxda. Shuruudaha saamiga daryeel bixiyaha iyo ilmaha ee lagu aqoonsaday Shaxda A ee xeerkaan waa in la joogteeyaa markasta.

**SHAXDA A**

| Tirada Ilmaha Jooga ee Kayar Da'da Labo Sano | Wadarta Guud ee Ilmaha Jooga: 16 | 15 | 14 | 13 | 12 | 11 | 10 | 9 | 8 | 7 | 6 | 5 | 4 |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 0 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 1 | 1 | 1 | 1 | 1 | 1 | 1 |
| 1 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 1 | 1 | 1 | 1 | 1 |
| 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 1 | 1 | 1 | 1 |
| 3 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 1 | 1 | 1 |
| 4 | 3 | 3 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 1 |
| 5 | 3 | 3 | 3 | 3 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | |
| 6 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | 2 | | |
| 7 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 2 | 2 | 2 | 2 | | | |
| 8 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 2 | | | | |
| 9 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | | | | | |
| 10 | 4 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | 3 | | | | | | |
| 11 | 4 | 4 | 3 | 3 | 3 | 3 | | | | | | | |
| 12 | 4 | 4 | 4 | 4 | 3 | | | | | | | | |
| 13 | 4 | 4 | 4 | 4 | | | | | | | | | |
| 14 | 4 | 4 | 4 | | | | | | | | | | |
| 15 | 4 | 4 | | | | | | | | | | | |
| 16 | 4 | | | | | | | | | | | | |

Tirada Daryeel Bixiyaasha Loo Baahan Yahay

(5) Haddii dhammaan carruurta ku jira daryeelka ay ku jiraan da'da dugsiga, saamiga daryeelaha iyo ilmuhu waa 1:15.

(6) Inkasta oo saamiyada daryeelaha iyo ilmaha lagu cadeeyay Shaxda A ee kore, daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ayaa daryeeli kara 10 carruur ah oo jira da'aha 6 asbuuc ilaa da'da dugsiga haddii:

(a) Haddii wax ka badan 6 carruur ah ay jiraan da'da dugsiga barbaarinta ama kayar, ayna ku jiraan carruurta uu dhalay adeeg bixiyaha iyo carruurta daryeel bixiyaasha;

(b) 6 ilmood, keliya 2 ay kayar tahay 24 bilood jir; iyo

(c) Afar carruurta kamid ah ay jiraan da'da dugsiga.

(7) Haddii ilmaha dhashay ay ku jiraan daryeelka ayna la wadaagayaan isla aaga shaqada ilmaha waawayn, adeeg bixiye waa inuu haystaa qorshaha qoran oo sheegaaya sida daryeel bixiyaashu ay u xaqiijin doonaan badqabka dhalaanka aan wali gurguurashada gaarin. Qorshaha waa in la dhaqan gashaa marka dhalaanka aan wali gurguurashada bilaabin ay isla aaga nashadada la wadaagayaan ilmaha waawayn.

## 414-360-0500 Kormeerka

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in carruurta si buuxda ay u ilaalinayaan tirada loo baahan yahay ee daryeel bixiyaashu markasta kuwaasoo ay qasab tahay:

(a) Inay yaqaanaan waxa ilmo kasta uu samaynaayo;

(b) Waa inay la joogaan ilmaha si ay u caawiyaan ayna ugu jawaabaan marka ay u baahdaan; iyo

(c) Waa inay ku jiraan meel ay uga jeedaan ama ka maqlayaan carruurta wakhti kasta, ayagoo aan isku halaynayn aalada codka ama muuqaalka. Ilmaha aan loo jeedin waa in si joogto ah oo xiriir ah loo kormeero waa in loo oggolaadaa aagaga nashaadada.

(2) Marka waxa ka badan hal daryeele loo baahan yahay si loo daboolo saamiga daryeel bixiyaha iyo ilmaha, hal daryeele ayaa qaban kara shaqooyinka kale ee sida tooska ah u taageeraaya daryeelka iyo waxbarashada carruurta muddo ku meel gaar ah. Hawlaha noocaas ah waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, nadiifinta kadib hawsha, diyaarinta agabka hawsha cusub, ama karinta cuntooyinka. Daryeelahaan waa inuu u jeedaa ama maqlayaa ilmaha, uu diyaar yahay uuna awoodo inuu jawaabo haddii loo baahdo, laakiin qasab maaha inuu dareen buuxa u lahaado ilmaha.

(3) Marka carruurta kayar 36 bilolod ay banaanka ku ciyaarayaan, daryeel bixiye waa inuu banaanka la joogaa si uu u ilaaliyo ilmaha.

(4) Adeeg Bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa inuu ku xiro nalal ku filan qolka meesha ilmuhu hurdaan ama ku nasanayaan si daryeel bixiyaashu ay si cad ugu arkaan wajiga ilmo kasta qayb kasta oo ay qolka ka joogaanba.

(5) Buuqa ka yeeraaya aaga (tusaale, muusiga, codka mashiinka, codka qaylada fudud ee mashiinka) waa inaysan ahayn kuwo qaylo badan heer ay ka hor istaagaan daryeel bixiye inuu awoodo inuu ka jawaabo baahiyaha carruurta.

(6) Marka daryeeleyaashu ay joogaan qol ka duwan kan ilmaha, albaabada waa inay wada furnaadaan si daryeel bixiyaashu qaab fudud ugu galaan qolka si uu u sameeyo hubinada codka iyo muuqaalka ilmaha.

(7) Carruurta ayaan joogi karin dabaqa koowaad ee guriga ilaa daryeel bixiye uu la joogo maahee isla dabaqa.

## 414-360-0510 Abuurista Jawiga Caafimaadka u leh Ilmaha

(1) Marka aad la hadlayso ama la shaqeynayso carruurta, adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in daryeel bixiyaashu ay leeyihiin goob lagu bixiyo kobaca ilmaha oo caafimaad leh, kuna habboon kobaca.Tusaaleyaasha tan waxaa ku jiri kara: dhiiri gelinta iyo siinta fikir wanaagsan, tuslaynta dhagaysiga firfircoon iyo hadalka xushmadda leh, la hadlidda ilmaha adoo jilmo joogsanaaya si aad u noqoto heerka indhahooda, siinta salaamo iyo macsalaamayn naxariis leh, taageerida dareenada iyo fikradaha, adeegsiga cod leh luuq dagan oo dhiiri gelin leh, iyo hami siinta shaqsiyadda ilmo kasta iyo qoys kasta.

(2) Adeeg bixiye waa inuu xaqiijiyaa in daryeel bixiyaashu ay dhiiri geliyaan isdhexgallada wanaagsan ee u dhexeeya ilmaha. Tusaaleyaasha tan waxaa ku jiri kara: tusmaynta xirfaddaha bulshada iyo dhimrinta, ka caawinta ilmaha fahanka dareennada dadka kale, iyo siinta taageero ilmaha ay ku adkaato inay yeeshaan saaxiibo, iyo dhiirigelinta ciyaarta ilmaha dhexdooda ee dhammaan awoodaha iyo aasaasiyaadka.

(3) Marka ay qaadayaan ama wareejinayaan ilmo, daryeelayaashu waa inay sidaas u sameeyaan qaab ilaalinaaya badqabka iyo raaxada ilmaha.

## 414-360-0520 Hawl Maalmeedka iyo Nashaadaadka Barnaamijka

(1) Adeeg Bixiyaha iyo daryeel bixiyaal kasta waa inuu muhiimada koowaad siiyaa baahiyaha ilmaha, asagoo xaqiijinaaya inay helaan daryeel iyo dareen ku filan.

(2) Dareen degdeg ah waa in la siiyaa baahiyaha shucuurta iyo jirka ee ilmaha.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu abuuraa uuna ku dhaqmaa jadwalka maalin kasta oo qoran.

(4) Jadwalka qoran waa inuu ku jiraa nidaamka joogtada ah ee maalin kasta kaasoo sahlaaya fursado kala duwan si looga jawaabo baahiyaha gaarka ah ee carruurta iyo baahiyaha koox carruur ah.

(5) Jadwalku waa inuu:

- (a) Daboolaa dhammaan saacadaha shaqada;
- (b) Waa inay ku jiraan hawlaha joogtada ah sida cuntada, hurdada, iyo isticmaalka musqusha;
- (c) Waa inuu baxshaa isku dheelitirka nashaadaadka firfircoon iyo kuwa nasiinada;
- (d) Waa inuu baxshaa wakhtiga dookha shaqsiga ah iyo nashaadaadka la hagaayo; iyo
- (e) Waa inay ku jiraan nashaadaadka maalin kasta ee gudaha iyo banaanka.

(6) Waa inay jiraan nashaadaad la heli karo oo loogu talo galay carruurta sida waafaqsan da'dooda, xiisahooda, awoodaha iyo dhaqannada. Carruurta waa in la siiyaa fursado ay ku kala doortaan noocyada kala duwan ee nashaadaadka ku habboon kobaca iyo khibradaha oo ay ku jiraan:

- (a) Aqoonta akhrista iyo qoraalka iyo luuqadda;

(b) Muujinta hal abuurka ee lagu soo bandhigo farshaxannada;

(c) Ciyaarta riwaayada;

(d) Hormarinta dhaqdhaqaaqa guud;

(e) Hormarinta dhaqdhaqaaqa xubnaha;

(f) Muusiga iyo dheesha;

(g) Fursadaha dhagaysiga iyo hadalka;

(h) Hormarinta fikirka; iyo

(i) Ciyaarta dareemaha.

(7) Adeeg bixiye waa inuusan siin ama u ogolaan ilmaha da'da xanaanada ama ka yar inay shaashad fiirsadaan wax ka badan 5 saacadood asbuucii. Ilmaha gaaray da'da dugsiga ayaan la siin karin ama loo ogolaan karin wax ka badan 10 saacadood oo waqtiga shaashada ah asbuuc kasta.

(a) Wakhtiga shaashada ayaa lagu qeexaa wakhtiga lagu baxsho adeegsiga aaladaha elektarooniga ah, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna kumbuyuutarada, taleefishinka, taableedyada, taleefannada iyo aaladaha gaymamka laakiin kuma jiraan agabka tignooloojiyada kaalmaatiga ee carruurta naafada ah.

(b) Wakhtiyada isticmaalka ayaa la kordhin karaan si loogu adeegsado hagista jimicsiga jidhka, munaasabadaha gaarka ah, mashruucyada (tusaale ahaan, casharada koodh samaynta), waxbarashada fogaanta/oonlaynka, iyo layli guriga.

(c) Dhammaan isticmaalka warbaahinta waa inay tahay mid kobac ahaan iyo da' ahaanba ku habboon, aysan ahayn mid rabshad muujinaysa, ayna ilaalinayso dhaqanka.

(8) Haddii adeeg bixiyuhu haysto shahaadada daryeelka wax ka badan 12 carruur ah adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa nashaadaadka barnaamijka ee qoran ee koox da'eed kasta.

(9) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa ciyaarta banaanka ee maalin kasta ee ilmo kasta, ayada oo aan loo eegayn da'da, marka la xaqiijiyo in cimilada iyo xaaladaha bii'adu aysan abuurayn khatar caafimaad ama badqab.

(10) Marka laga soo tago nashaadaadka lagu qeexay xeerka OAR 414-360-0520(6), ilmaha gaaray da'da dugsiga waa in la siiyaa fursad ay ku kala doortaan nashaadaadka kala duwan, ayna ku jiraan:

(a) Mashaariicda shaqsiga ama kooxda iyo nashaadaadka, ayna ku jiraan shaqada guriga; iyo

(b) Nasiinada ama raaxada.

## 414-360-0600 Shuruudaha Guud ee Daryeelka Saqiirada iyo Socod Baradka

(1) Ilmaha Saqiirada ah iyo socod baradka yaryar, adeeg bixiyuhu waa inuu hayaa xogta soo socota (sidoo kale ka eeg OAR 414-360-0220, Diiwaannada Carruurta):

(a) Jadwalka quudinta;

(b) Noocyada cuntada la bixinaayo iyo jadwalka cuntooyinka cusub;

(c) Jadwalka hurdada; iyo

(d) Qaabka hadalka ilmaha iyo niyad u dejinta.

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuu ilaaliyaa baahiyaha gaarka ah, kuwa jirka, iyo kobaca ee saqiirada iyo socod baradka.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in saqiirada iyo socod baradka yaryar loo ogolaado:

(a) Inay abuuraan ayna raacaan hanaankooda gaarka ah ee hurdada iyo xiliyada ay soo toosayaan;

(b) Fursado dhammaan maalinta si ay si xor ah ugu dhex socdaan aag badqab leh, nadiif ah, furan, oo aan lahayn qashin.

(c) Fursadaha ay kula hadlayaan ayna iskugu dhawaanayaan.

(4) Adeeg bixiye waa in uu xaqiijiyaa in aan looga tagin ilmo soo jeeda aaga fagaaga ciyaarta, si uu ugu ciyaaro, wax ka badan 30 daqiiqo muddo 2 saac ah gudahood ah.

(5) Qalabka saqiirada ee xadidan, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, alaabta lagu raqleeyo, gaariga ilmaha, sariiraha dargada, kuraasta ilmaha dhashay, kuraasta dhaadheer iyo kuwa gaaban ama aaladaha saqiirada lagu xanbaaro ayaa la adeegsan karaa ugu badnaan 30 daqiiqo muddo kasta oo 2 saac ah.

(a) Ilmaha samaynaaya cunto cunista, ku soconaaya banaanka, ama gaariyaasha raacaaya ayaa dhaafi kara xadiga 30-daqiiqo ee qalabka saqiirada ee xadidan ee loo adeegsado nashaadaadkaan.

(b) Kursiga gaariga ayaan la adeegsan karin marka laga reebo ujeedooyinka gaadiidka.

(6) Inta lagu jiro maalinta oo dhan, adeeg bixiye waa inuu kula falgalaa saqiirka iyo socod baradka si joogto ah, oo badan, iyo isdhexgallada bulshada asagoo taabanaaya siinaayana dareen gaar ah (tusaale ahaan, inuu qabto, sabaaliyo, la hadlo, u heeso, uuna u ka xeeyo socodka gudaha ama banaanka guriga).

(7) Adeeg bixiye waa inuu ku dhiiri geliyaa ilmaha inay bartaan xirfadaha caawinta naftooda (labiska, isticmaalka musqusha, dhar dhaqaalka, cunto cunista) marka ilmuhu xiiso u muujiyaan.

(8) Dhammaan daryeel bixiyaashu waa inay qaadaan taxadarka ku habboon si ay uga hortagaan xanuunka ruxista ilmaha iyo jugta madaxa ee xadgudubka ah.

## 414-360-0610 Quudinta Saqiirada iyo Socod Baradka

(1) Adeeg bixiyaha u adeegaaya carruurta kayar 12 billood jir waa inuu uu raaco shuruudaha soo socda ee carruurtaas:

(a) Adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa uuna raacaa qorshaha quudinta iyo jadwalka oo ay ku jiraan noocyada iyo cadadka caanaha ilmaha, caanaha hooyada, iyo cuntada oo ay keeneen waalidiintu si joogto ahna loo cusbooneysiiyaa.

(b) Adeeg bixiyuhu waa inuu ku quudiyaa ilmaha jadwalkiisa gaarka ah ee quudinta uuna quudiyaa marka uu gaajaysan yahay.

(c) Adeeg Bixiyuhu waa inuu si cad ugu calaamadiyaa caano booraha ilmaha, caanaha hooyada, masaasadaha, iyo cuntada ay keeneen waalidku magaca buuxa ee ilmaha iyo taariikhda uuna gashaa talaagada haddii loo baahdo.

(d) Adeeg Bixiyaha ayaan siin karin caanaha qasaca ilmaha saqiirka ah ilmo saqiir ah kaasoo caba caanaha hooyada, asagoo aan oggolaansho ka haysan waalidka.

(e) Adeeg bixiyuhu waa inuu siiyaa caanaha hooyada keliya ilmaha uu sidaas u caddeeyay waalidku.

(f) Caanaha hooyada waa in:

(A) Lagu calaamadiyaa magaca buuxa ee ilmaha iyo taariikhda naaska laga lisay;

(B) Waa in la kaydiyaa ugu badnaan:

(i) 24 saac lana gashaa talaagada marka la barafeeyo ama la adkeeyo; ama

(ii) Lix billood laga bilaabo marka la lisay lana gasho furinjiyeerka barafka.

(C) La gashaa talaagada ama la barafeeyaa ilaa waxyar kahor inta aan la qandicin; iyo

(D) Waa in aan dib loo isticmaalin kadib 2 saacadood laga bilaabo marka la siiyay.

(g) Marka caanaha la qasay ilmaha la siiyo, daryeeluhu waa inuu raacaa tilmaamaha warshadda samaysay si uu u qaso, u kaydiyo, uuna u raadiyo caano kasta oo qasaca ah, ilaa in uu codsado maahee waalidka ilmuhu iyo oggolaanshaha qoran ee dhakhtarka.

(h) Caanaha dhayda ah, caanaha sifeysan, caanaha 1 boqolkiiba, iyo caanaha 2 boqolkiiba waa in aan la siin ilaa uu waalidku codsaday maahee uuna haysto oggolaanshaha qoran ee dhakhtarka.

(i) Adeeg bixiyuhu waa inuusan siin casiir nooc kastaba ilmaha saqiirada ah, ilaa inuu u sheego maahee dhakhtar caafimaad.

(j) Marka masaasad lagu quudinaayo, masaasada waa inay keliya ku jiraan caanaha qasaca ama caanaha hooyada, lagumana qasi karo boorash, casiirka miraha, ama cuntooyinka kale ayadoo aan la haysan oggolaanshaha qoran ee dhakhtarka.

(k) Adeeg bixiye waa inuusan siin saqiirada kayar lix bilood biyo si ay u cabaan asagoo aan haysan oggolaanshaha qoran ee dhakhtarka.

(l) Adeeg bixiyuhu waa inuu qandaciyaa masaasadaha keliya midkood qaababka soo socda: asagoo hoos gelinaaya biyaha socda, ee tuubada ee qandaca ah; adeegsanaaya aalada masaalasada qandicisa ee ganacsiga; qaababka ku qandicinta dusha shoolada, ama aalada cunto karinta gaabiska ah; ama asagoo ku ridaaya qasac ay ku jiraan biyo kulul.

(A) Masaasadaha waa in aan lagu kululayn aaladaha mikrooweefka.

(B) Marka la qandiciyo, masaasada waa in aan lagu celin talaagada ama dib loo qandicin.

(m) Cuntooyinka adag ee la siinaayo saqiirada waa in laga soo doortaa Qaybta Cuntada ee Barnaamijka Cuntada ee Daryeelka Carruurta iyo Waayeelka (CACFP):

(A) Cuntooyinka adag waa in aan la siin saqiirada kayar afar bilood jir;

(B) Ganacsiga ee cuntada ilmaha waa in lagu siiyaa saxan aana si toos ah loogu siin qasaca sajalka ah ee warshadda ka yimid;

(C) Waxyaabaha soo haray ee ku jira qasaca cuntada lagu siiyay waa in la daadiyaa; iyo

(D) Cuntooyinka adag, marka laga reebo cuntada faraha lagu qabsado, waa in lagu siiyaa qaado.

(n) Malabka ama cuntada uu ku jiro malabku waa in aan la siin saqiirada.

(2) Marka lagu quudinaayo masaasad, adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Kor u qabtaa ilmaha saqiirada ah ee jira 6 billood iyo ka wayn ee aan iskood u qabsan karin masaabsada ama kaligood fariisan karin; iyo

(b) Waa inuu xaqiijiyaa in madaxa ilmaha saqiirka ah kor loo qaado inta uu cuntaynaayo.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuusan seexin ilmaha da' kasta asagoo masaasad nuugaaya ama wax ku cabaaya koobka tababarka.

(4) Adeeg bixiyuhu waa inuusan wax ku taakayn masaasad qaab kastaba marna.

(5) Marka la siinaayo cuntada adag, adeeg bixiye waa inuu xaqiijiyaa in saqiirada la siiyo cuntada ayagoo kor u fadhiya.

## 414-360-0620 Qalabka Guriga iyo Qalabka ilmaha Saqiirada iyo kuwa Socod Baradka

(1) Adeeg bixiye waa inuu siiyaa sariir caruureed gaar ah, sariir carruureed la qaadi karo, ama aaga ciyaarta saqiir kasta.

(a) Sariir carruureed kasta, sariirka carruurta ee la qaadi karo, ama aaga ciyaarta waa inuu:

(A) Waafaqsan yahay heerarka ay dejiyeen Gudiga Badbaadada Badeecada ee Macmiilka (CPSC) si loogu adeegsado saqiirada waana inay leeyihiin dukumiinti kasoo baxay soo saaraha ama tafaariiq iibiyaha taasoo sheegaysa midkood in sariir carruureedka la sameeyay kadib Juun 28, 2011 ama aagga ciyaarta la sameeyay kadib Febraayo 28, 2013;

(B) Waa inay leeyihiin dusha adag, siman, oo aan hoos u dhacayn;

(C) Waa inay leeyihiin joodari nadiif ah, adag, oo si fiican u le'eg. Joodarigu waa inuu:

(i) Waa in loo sameeyay inuu le'ekaado qalab gaar ah oo loo adeegsado, ayadoo aan wax duleel ah u dhexayn joodariga iyo geesaha sariirta;

(ii) Waa in lagu daboolaa maro adag, la dhaqi karo, aysan biyuhu ka dusayn, oo leh joogdariga;

(iii) Waa inuu leeyahay adkaansho ku filan kaasoo ilaalinaaya qaabka oo an habcinayn ama ciriiri gelinayn qaabka madaxa saqiirka; iyo

(iv) Waa in lagu daboolaa go' adag kaasoo ku dhaganaanaaya marka si caadi ah loo isticmaalo uusana lahayn faraqyo laalaada ama uusan isku tuusmayn.

(b) Bassinets (sariirta ilmaha dhashay) waa mamnuuc.

(c) Sariiraha ilmaha ee la isa saaro, darbiga, ama isa saarka ah waa mamnuuc.

(d) Go'yaasha waa in la badelaa marka ay wasaqoobaan, kahor inta aan lagu seexin ilmo kale, iyo ugu yaraan halmar asbuucii.

(2) Sariiraha ilmaha ee isbuunyada ah waa in aan la dhigin meel kamid ah dhismeyaasha guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh.

(3) Si loo taageero farsamooyinka dabiiciga ah ee dhaqameedka, adeeg bixiyuhu waa inuu ogolaado sariiraha alwaaxa ah ama agabka kale ee hurdada ee asal dhaqameedka ah si loogu adeegsado meelo ay seexdaan saqiiradu. Daryeel bixiyaashu waa inay ka taxadaraan inaysan saarin ilmaha dhar xad dhaaf ah ama aysan saa'id u kululayn ilmaha marka ay adeegsanayaan qalabka.

(4) Haddii adeeg bixiye adeegsado kuraasta dhaadheer, kuraastu waa inay waafaqsan tahay heerarka hadda ee Guddiga Badbaadada Badeecada ee Macmiilka (CPSC) ayna leeyihiin:

(a) Sal balaaran si looga hortago inay dhacaan;

(b) Difaac si looga hortago in ilmuhu kor u qaado rakada; iyo

(c) Suumanka qaabka T ama difaaca si looga hortago in ilmuhu ku ceegsamo ama ka siibto meesha.

(5) Haddii adeeg bixiye uu adeegsado kuraasta miiska ilmaha wata, kuraastu waa inay leeyihiin suuman si looga hortago in ilmuhu ka dhaco.

(6) Adeeg bixiye waa inuu keenaa agabka kala duwan ee ku filan ee gobal ahaan ku habboon ilmaha kaasoo la jaanqaadaaya dareenada ilmaha oo ay yihiin:

(a) Kuwo nadiif ah oo la dhaqi karo ama la tuuri karo;

(b) Waa inaysan noqon kuwo ilmuhu ku saxan karo ayna ku jiraan boonbaleyaasha iyo qaybaha la bixin karo ee balac ahaan ka yar 1-¼ inji, bacaha caaga ah, Styrofoam, iyo cinjirka ama boonbaleyaasha latex;

(c) Kuwo amaan ah oo si wanaagsan u shaqaynaaya; iyo

(d) Waa in laga saaraa daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta sida ugu dhakhsaha badan ee barnaamijku ogaado in ay dib u celintooda amartay CPSC.

(7) Adeeg bixiye ayaan u adeegsan karin qalabka soo socda saqiirada, kuwaas oo loo aqoonsaday inaysan badqab u ahayn saqiirada Guddiga Badbaadada Badeecada ee Macaamiisha (CPSC) iyo Machadka Caafimaadka carruurta ee Mareykanka:

(a) Aaladaha ilmuhu ku socdaan, kuwaasoo ah aalado u sahlaaya ilmaha saqiirka ah inay gudaha u fariistaan lehna taayirada ama giraangirada kuna soconaaya sagxada;

(b) Laalacshoowga albaabka, kuwaasoo ah aalado ilmaha u sahlaaya inuu soo laabto asagoo ku fadhiya "xarig isbuunyo ah" oo laastiig ah kaasoo suran albaabka;

(c) Xayndaabyada difaaca; iyo

(d) Xargaha ilmaha saqiirka ah ka laalacshoobo iyo duubabka.

## 414-360-0630 Hurdada Amaanka

(1) Marka laga soo tago qalabka amaanka ah (OAR 414-360-0620), adeeg bixiye waa inuu raacaa farsamooyinka hurdada amaanka ah ee saqiirada si loo yareeyo khatarta geerida aan la filayn ee saqiirada (SUID) sida soo socota:

(a) Inta ay hurdaan, ilmaha saqiirada ah waa in isha lagu hayo si joogto ah si loo xaqiijiyo in ay neefsanayaan, aysan aad u kululaan, aysan walaac ku jirin, aysana u baahnayn caawimaad.

(b) Ilmaha Saqiirada ah waa in jeego-jeego loogu seexiyaa meel siman, oo adag, oo aan hoos u dumayn si ay u seexdaan.

(c) Saqiirada iska soo rogi kara dhabarka ilaa dhabar ama dhabar ilaa gees ayaa u jiifi kara geeska ay doortaan.

(d) Marka laga reebo cinjirka ilmuhu nuugo oo khali ah, waa inuusan yihiin waxyaabo kasta oo kale (tusaale ahaan, daboolka cinjirka ilmuhu nuugo, masaasadaha, boonbaleyaasha, barkimaha, xayawaanka boonbalaha ah, busteyaasha, sariiraha godka ah) oo ku jira ama ku xiriirsan sariirta ilmaha, sawiirta la qaadi karo ama aaga ciyaarta.

(e) Saqiirada waa in aan madaxa ama wajiga laga saarin agabka sida busteyaasha ama go'yaasha marna.

(f) Waa in aysan jirin wax alaab ah (tusaale, busteyaasha, teendhooyinka, xaashiyaha) oo la dulsaaray ama la saaray geeska sariirta ilmaha, sariirta la qaadi karo ama aaga ciyaarta.

(g) Agabka sababi kara inay neefta ku xiraan ama ceejiyaan ilmaha sida marada madaxa lagu xidho (tusaale ahaan, funaanadaha koofiyada leh,, koofiyadaha, xariga madaxa lagu xidho), jaakadaha, kuulaha, iyo shulugyada leh xargaha ama meelaha la iskaga xiro waa in laga fogeeyaa ilmaha iyo qalabka hurdada kahor inta aan ilmaha lagu seexin.

(h) Beersaarada ama dharka kale ama daboolka xanibaaya dhaqdhaqaaqa gacmaha ama lugaha ilmaha ayaa mamnuuc ah markasta, xataa haddii uusan ilmuhu hurdin.

(i) Busteyaasha culus, dharka culus, ama waxyaabaha kale ee culus waa in aan la dul saarin ama la ag dhigin saqiirka hurda.

(j) Haddii daryeeluhu uu hawl la hayo ilmaha ku jira daryeelka carruurta uuna ku sido ilmo saqiirka ah oo hurda aalada saqiirka lagu qaado oo nidaamsan, daryeeluhu waa inuu ilmaha saqiirka ah geeyaa goobta hurdada amaanka ah sida ugu dhakhsaha badan marka hawshu dhammaato.

(k) Daryeel bixiye ayaa hayn kara saqiir hurda marka la xaqiijiyo in daryeeluhu uu isla markaba daymoon karo, eegi karo, ama dareemi kara calaamadaha caqabada ilmaha haysa. Daryeeluhu waa inuu soo jeedaa, feejigan yahay, uuna diirada saaraa saqiirka; iyo

(l) Haddii saqiir uu ku gam'o kursiga gaari ama uu seexdo meel aan ahayn sariirtiisa, sariirta la qaadi karo ama aaga ciyaarta, daryeeluhu waa inuu isla markaba geeyaa saqiirka goobta hurdada oo ku haboon.

(2) Qaababka kala duwan ee hurdada ayaa keliya la adeegsan karaa marka la gudbiyo codsiga shardi dhaafka CCLD ay ogolaatay, kaasoo ay qasab tahay in lagu daro sababta caafimaadka ama tilmaamaha kasoo baxay dhakhtar.

## 414-360-0650 Badelida Xafaayada iyo Gelista Musqusha

(1) Adeeg Bixiyuhu waa inuu badelaa xafaayada kaadida ama saxaradu ku jirto isla markaba. Ilaa in ilmuhu hurdo maahee, xafaayada ilmaha waa in la baaraa ugu yaraan 2 saac kasta, ama intaas ka badan si loo buuxiyo baahiyaha gaarka ah ee ilmaha. Xafaayadaha waa in la badelaa marka ilmuhu muujiyo habdhaqan muujinaaya in kaadi ama saxaro ay ku jirto xafaayada.

(2) Haddii ilmaha saqiirada iyo socod baradku ay ku jiraan daryeelka waa inuu jiraa aaga ilmaha looga badelo xafaayadda. Haddii adeeg bixiyuhu haysto shahaadada daryeelka wax ka badan 12 carruur ah oo tiro ka badan 8 saqiiro ah iyo socod baradka ah ay si joogto ah daryeelka ugu jiraan, waa inay jirtaa aaga xafaayad badelka labaad oo la heli karo.

(a) Aagga xafaayad badelistu waa inuu ku yaalaa aag sahlaaya in la farxasho ila markaba kadib marka xafaayada la badelo ayadoo aan la taaban meelo kale ama ilmaha kale.

(b) Aaga xafaayad badelistu waa inuu noqdaan mid adag, dabacsan, aan dhuuqayn qoyaanka, si fudud loo nadiifin karo, aana lahayn dilaacyo ama dayactiro.

(c) Aaga xafaayad badelista waa inaysan saarnayn alaabo marka laga reebo agabka xafaayad badelista waana in aan loo adeegsan ujeedooyin kale.

(d) Ilmaha waa in aan marna looga tagin keligood aaga xafaayad badelista ee koreeya.

(e) Dareeraha jeermis dilaha waa in la dhigaa aag kasta oo xafaayad lagu badelo asagoo u diyaarsan in la adeegsado lana gashaa meel uusan ilmuhu gaarin.

(3) Haddii adeeg bixiye uu adeegsado xafaayad maro ama dib loo isticmaali karo, xafaayada saxarada leh waa in:

(a) Aan biyo lagu dhaqin;

(b) Lagu ridaa bac afka ka xiran, oo uusan qoyaan geli karin;

(c) Waa in la gashaa qasaca qashinka oo gaar ah; iyo

(d) Waa in lagu nadiifiyaa adeega dhar dhaqaalka ganacsiga ama la siiyaa waalidka ama masuulka ilmaha maalin kasta.

(4) Adeegsiga kuraasta tuujiga waa in uu ogolaadaa khabiirka caafimaadka deegaanka.

## 414-360-0660 Nadiifinta iyo Jeermis ka Dilista Aaga Saqiirada iyo Socod Baradka

(1) Adeeg bixiye waa inuu nadiifiyaa uuna jeermiska ka dilaa boonbaleyaasha ilmaha saqiirka iyo socod baradka si joogto ah iyo marka ay wasaqoobaan.

(2) Adeeg Bixiyuhu waa inuu dhaqaa, biyo raaciyaa, uuna sifeeyaa agabka soo socda kadib isticmaal kasta:

(a) Masaasadaha iyo koobabka tababarka, haddii la isticmaalo; iyo

(b) kuraasta dhaadheer, miisaska iyo kuraasta.

(3) Adeeg bixiye waa inuu dhaqaa, biyo raaciyaa, uuna jeermiska ka dilaa agabka soo socda isla markaba kadib isticmaalka:

(a) Aagga lagu badelo xafaayada;

(b) Agabka la gasho kursiga tababarka musqusha ama kuraasta tuujiga;

(c) Baafka qubayska ama agabka kale ee loo adeegsado u qubaynta ilmaha; iyo

(d) Dusha meel kasta oo uu ku daatay dheecaanka jirka.

## 414-360-0700 Habdhaqanka iyo Tusmada

(1) Dhakhtarku waa inuu leeyahay xeerka qoran ee la xiriira habdhaqanka iyo hagista ilmaha kaasoo fudud oo uu fahmi karo ilmuhu, waalidku, iyo dhammaan daryeel bixiyaasha (sidoo kale eeg xeerka OAR 414-360-0200, Xeerarka).

(2) Xeerka habdhaqanka iyo hagista ee adeeg bixiyaha waa in lagu daraa adeegsiga tusmada wanaagsan si looga caawiyo ilmaha inay bartaan maamulida naftooda, hagista naftooda, iyo qadarinta dadka kale ayadoo la raacaayo qaababkaan:

(a) U dejinta iyo barista xeerarka iyo xadiyada fudud, joogtada ah, qeexan oo wanaagsan kuwaasoo ilmuhu fahmi karaan;

(b) U diyaarinta goobta guusha ayadoo lagu bixinaayo nashaadaad falgal leh oo dhiiri gelinaaya habdhaqanka wanaagsan iyo maamulida nafta;

(c) Xoojinta habdhaqannada wanaagsan ayadoo la samaynaayo dhiiri gelin iyo amaan qeexan;

(d) Qaadista talaabooyin si looga hortago dhibaatooyinka kahor inta aysan dhicin iyo sharaxaada cawaaqibyada badqabka, dabiiciga ah ee la fahmi karo oo la xiriira habdhaqanka ilmaha;

(e) Ka caawinta ilmaha inay aqoonsadaan ayna si sax ah u muujiyaan dareenadooda ayna fahmaan dareennada dadka kale;

(f) Tusmaynta iyo barista xirfadaha bulshada sida tooko qaadashada, wada shaqeynta, sugitaanka, ula dhaqmida dadka kale si naxariis leh, iyo xal u helida dhibaatooyinka; iyo

(g) Muujinta ama ka caawinta ilmaha badelida diiradiisa marka loo baahdo.

(3) Adeeg bixiye waa inuu xaqiijiyaa in keliya daryeel bixiyaashu ay hagis siiyaan ilmaha.

(4) Adeeg bixiye waa inuu siiyaa tusmayn cadaalad ah, si joogto ah loo adeegsado, waqtigeeda la bixiyo, oo ku haboon habdhaqanka, da'da, iyo kobaca ilmaha.

(5) Adeeg bixiye waa inuu si sax ah u faro geliyaa si uu u joojiyo ula dhaqmidda si aan cadaalad ahayn ilmo ayadoo lagu saleynaayo qoyska, jinsiga, isirka, qoomiyadda, xaalada dhaqaalaha, awooda, diinta, ama asalka dhaqanka ilmaha. Faro gelinada waxaa ku jiri kara, laakiin kuma koobna:

(a) Muujinta wada sheekaysiga saxda ah iyo ama habdhaqanka;

(b) Ka warqabidda xaaladaha keeni kara ula dhaqmidda si khaldan ilmo, uga jawaabidda si haboon, qaadista tallaabooyin si looga hortago inay mustaqbalka soo noqdaan; iyo

(c) Diidista in la iska indho tiro habdhaqanka cadaalad darada ah.

## 414-360-0710 Anshaxa iyo Ficiladda Mamnuuca ah

Adeeg bixiye waa inuusan adeegsan ama ku hanjabin inuu adeegsanaayo ficilada soo socda ee mamnuuca ah xataa haddii ay codsadaan waalidiintu:

(1) Ula dhaqmidda ilmaha si qalafsan ama adag ama adeegsiga ciqaabta jireed nooca ay tahayba, ayna ku jirto, laakiin kuma koobna wax ku dhufashada, garaacida, dharbaaxidda, ruxista, cabsi gelinta, tuurista, jagaynta, qandhuufada, qaniinyada, ama talaabooyinka kale ee dhalinaaya xanuunka jireed;

(2) Xanibidda ama caburinta dhaqdhaqaaqa ilmaha ilaa in lagu oggolaaday maahee OAR 414-360-0720, Gardaduubka Jireed;

(3) Adeegsiga daawo dhakhtar qoray oo aan la ogolaan ama daawooyinka aan dhakhtarku qorin ama kiimikooyinka si loo edbiyo ama loo xakameeyo habdhaqanka;

(4) Ku xirista ama ku go'doominta ilmaha meel xiran ama mugdi ah (tusaale, qol qufulan ama xiran, musqul, qaanad, ama bokis si loo ciqaabo);

(5) Kala noqoshada, u diidista ama ku qasbida cunto, nasiino, ama gelista musqusha;

(6) Ku qasbidda ama u cadaadinta ilmaha cunista cunto ama gelinta maraq, cunto, dhirta cuntada, ama maadooyin kale afka ilmaha;

(7) U banbixinta ilmaha heerkullada aadka u daran;

(8) Ku qaylinta si xun ama adeegsiga luuqad xun ama aflagaado ah;

(9) Ku ciqaabista ama ku caayidda ilmaha dhacdooyinka musqusha ama inuu diiday cunista cuntada;

(10) Oggolaanshaha nooc kasta oo ciqaabta dhimirka ama shucuurta ah ama xadgudubka hadalka, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna bahdilka dadka dhexooda ama si gaar ah, ugu yeerida magac xun, ku shactireysiga, ceebaynta, cagajugleynta, ka sheegida waxyaabo xunxun ama aflagaado ah qoyska, isirka, jinsiga, diinta, ama asalka dhaqanka ee ilmaha, diidista, cabsi gelinta, dayacidda, ama qaribidda ilmaha;

(11) Ka dalbashada jimicsiga jireed ee xad dhaafka ah, nasiinada xad dhaafka ah, ama qaababka istaaga xanuunka badan; ama

(12) Ka doonista ilmo inuu aamusnaado ama uusan ficil samayn ama in ilmaha laga saaro dhammaan nashaadaadka ama kooxda muddo waqti xad dhaaf ah.

## 414-360-0720 Gardaduubka Jireed

(1) Adeeg bixiye ayaa keliya adeegsan kara gardaduub jireed haddii:

(a) Badqabka ilmaha ama badqabka dadka kale khatar ku jirto; iyo

(b) Adeeg bixiyuhu uu ku dhaqmay qaybaha Habdhaqanka iyo Tusmada ee ku qoran OAR 414-360-0700(2)(a) ilaa (g).

(2) Gardaduubka Jireed waa inuu noqdaa:

(a) Mid ku kooban u qabashada ilmo sida ugu dabacsan ee suurtagalka ah si loo gaaro gardaduubka;

(b) Ku kooban heerka ugu yar ee wakhtiga muhiimka u ah xakameynta xaalada; iyo

(c) Kobac Ahaan ku Habboon yahay.

(3) Adeeg bixiye waa inuusan adeegsan fiilooyin, xargo, busteyaal, suuman, ama culaysyo (ayna ku jirto qof wayn oo ku fariisanaaya ilmaha) si jir ahaan loo gardaduubo ilmaha.

(4) Adeeg bixiyuhu waa inuu joojiyaa adeegsiga gardaduubka jireed haddii uu dareemo inuusan xakamayn karin naftiisa ama uu ka walaacsan yahay ilmaha marka gardaduubka jireed la adeegsado.

(5) Haddii gardaduub jireed la adeegsado, adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Soo sheegaa adeegsiga gardaduubka jireed si waafaqsan OAR 414-360-0270, Ogeysiisyada;

(b) Waa inuu geli karaa marka la adeegsado gardaduub jireed si loo go'aansho haddii go'aanka adeegsiga gardaduubka jirka iyo fulintiisa ay sax yihiin; iyo

(c) Waa inuu ku qoraa dhacdada galka ilmaha, ayna ku jirto taariikhda, wakhtiga, muddada ay socotay, daryeel bixiyaasha qaybta ka ahaa, iyo waxa dhacay kahor, intii lagu jiray, iyo kadib marka ilmaha la gardaduubay.

(6) Haddii gardaduub jireed loo adeegsaday hal ilmood wax ka badan halmar, adeeg bixiyuhu waa inuu abuuraa qorshaha qoran asagoo adeegsanaaya fikradaha shaqsiyaadka aqoonta u leh habdhaqannada ilmaha, ayna ku jirana, laakiin kuma koobna: daryeel bixiyaha aasaasiga ah ee ilmaha, la taliyaha dugsiga, iyo waalidiinta ama masuuliyiinta, si loo helo xalka ciladaha aasaasiga ah loona yareeyo baahiyaha loo qabo gardaduub jireed oo dheeraad ah. Adeeg bixiyuhu waa inuu u sheegaa CCLD marka qorshe qoran la abuuro.

## 414-360-0800 Xajmiga Guriga

(1) Xajmiga shatiga leh ee daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh ayaa lagu saleeyaa aaga shaqada gudaha ee guriga.

(2) Adeeg bixiyaha ayaa keliya ku daryeeli kara carruurta aagaga nashaadada ee ay ogolaatay CCLD.

(3) Adeeg bixiye waa inuu haystaa ogolaanshaha CCLD kahor inta uusan adeegsan qol cusub, aaga nashaadada, ama aagga banaanka si loogu daryeelo carruurta.

(4) Adeeg bixiyaha ayaan dhaafi kadib xajmiga ruqsada wakhti gaar ah, ayna ku jirto wadarta guud ee carruurta ku jira daryeelka ee labadaba kuwa jooga iyo kuwa ka maqan guriga daryeelka carruurta.

(5) Haddii daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta uu haysto shahaadada daryeelka 12 carruur ah ama kayar, waa inay jiraan ugu yaraan 35 iskuweer fiid aaga gudaha ee shaqada, sida lagu qeexay Xeerka OAR 414-360-0100(1), calaa ilmo. Haddii daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta uu haysto shahaadada daryeelka wax ka badan 12 carruur ah, waa inay jiraan ugu yaraan 35 iskuweer fiid aaga gudaha ee shaqada calaa ilmo 12 ilmood ama kayar iyo 50 fiid iskuweer aaga shaqada ee gudaha oo uu heli karo ilmo kasta ee ilmo kasta oo kamid ah afarta ilmood ee dheeraadka ah.

(a) Aaga nashaadada ee gudaha ee loo adeegsaday go'aaminta xajmiga waa in ay adeegsan karaa carruurta daryeelka carruurta inta lagu jiro saacadaha shaqada.

(b) Qaanadaha ama kaydadka agabka ilmaha oo ay gaari karana ilmuhu ayaa lagu tirin karaa qayb kamid ah aaga nashaadada.

(c) Aagaga soo socda ayaan loo xisaabin karin aaga shaqada marka la go'aaminaayo xajmiga: aagaga diyaarinta cuntada ee jikada, musqulaha, agabka kulayliyaha, aagaga kaydka, alaabta guriga ee aysan adeegsan ilmuhu iyo aag kasta oo kale uu aysan adeegsan karin ilmuhu.

## 414-360-0810 Qaab Dhismeedka iyo badqabka Guriga

(1) Daryeelka Carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta waa inuu:

(a) Noqdaa dhisme loo dhisay inay hal qoys dagaan ama guri kale; iyo

(b) Aag loo sameeyay ama dib loogu naqshadeeyay in lagu noolaado.

(2) Shuruudaha albaabka ee ku qoran OAR 414-360-0810(3) ayaa qabanaaya:

(a) Daryeellada carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta ee haysta ruqsadda hore marka la gaaro ama kadib Luuliyo 1, 2025; ama

(b) Daryeelka Carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta oo horay u jiray kaas oo codsanaaya badelida ciwaanka marka la gaaro ama kadib Luuliyo 1, 2025.

(3) Dhammaan dabaqyada guriga ee loo adeegsado daryeelka carruurtu waa inay leeyihiin labo irid.

(a) Hal irid oo ku yaala dabaq kasta waa inuu leeyahay albaab toos loogu baxaayo banaanka dhulka uuna buuxiyaa shuruudaha soo socda:

(A) Albaabka loogama bixi karo garaashka ama meesha gaariga lagu xareeyo.

(B) Albaabka waa in aan laga furi karin gudaha ayadoo aan la adeegsan fure, ama aqoonta ama dedaalka gaarka ah.

(C) Marinka gudaha ee tagaaya albaabku waa inuusan:

(i) Ku dhex jirin sadex fiid meel u jirta aalada cunto karinta ee meesha ku dhisan; ama

(ii) Waa inaan loogu baahan si loogu gudbo qolka kaydka ama qolka la xiri karo si looga hortago in la galo.

(b) Iridka labaad ayaa noqon kara midkood albaab toos looga bixi karo banaanka heerka dhulka ama daaqad la furi karo oo buuxinaysa shuruudaha soo socda:

(A) Shabaqa ugu yar ee wax looga jeedo ee furmaaya 5 iskuweer fiid;

(B) Jooga ugu yar ee qeexan oo dhan 24 inji;

(C) Balaca qeexan ee ugu yar oo dhan 20 inji;

(D) Salka iridka oo ku yaala ugu badnayn meel 44 inji ka saraysa sagxada; iyo

(E) Salka iridka oo ku yaala ugu badnayn meel 48 inji ka saraysa sagxada banaanka guriga. Haddii uu ka sareeyo 48 inji, jaranjarooyin ama hanaan waa in laga dhisaa hoosta daaqada si loo yareeyo badka ilaa heerka 48 inji.

(c) Dhammaan qolalka guriga ee loo adeegsado daryeelka carruurtu waa inay leeyihiin labo irid. Iriddaha waxaa ku jiri kara:

(A) Albaab toos u tagaaya banaanka aaga dhulka;

(B) Albaab tagaaya qol kale ama hoolka la maro; ama

(C) Daaqad buuxinaysa shuruudaha lagu aqoonsaday OAR 414-360-0810(2)(b).

(4) Shuruudaha albaabka ee ku qoran OAR 414-360-0810(5) ilaa (7) ayaa qabanaaya:

(a) Daryeelka qoyska ee shahaadada haysta oo leh ruqsadda hore ee kahor Luuliyo 1, 2025; ama

(b) Goobta horay ay ruqsadda u siisay CCLD waqti uun.

(5) Dhammaan heerarka sagxada ee ay u adeegsadaan carruurtu ciyaarta iyo hurdada waa inay lahaadaan labo irid oo la adeegsan karo oo tagaaya dhulka.

(6) Dhammaan qolalka ay u adeegsadaan carruurtu ciyaarta iyo hurdada waa inay lahaadaan labo irid oo la adeegsan karo.

(7) Ujeedooyinka xeerkaan awgood "irid la adeegsan karo" waxaa lagu qeexaa albaab aan waxba ku go'nayn ama daaqad taasoo adeeg bixiyaasha iyo carruurtu kaga bixi karaan guriga haddii dab kaco ama ay jirto xaalad degdega ah. Albaabka waa in aan laga furi karin gudaha ayadoo aan la adeegsan fure, daaqabadahana furmaaya waa inay ugu yaraan yihiin 20 inji balac ahaan ayna joog ahaan yihiin ugu yaraan 22 inji, oo leh furnaanta 5 iskuweer fiid iyo aasaas aan ka koreyn wax ka badan 48 inji sagxada.

(8) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in carruurtu aysan gelin qalabka kulaylka sida foornooyinka, goobaha dabka lagu shito, shooladaha, uumiga iyo tuubooyinka biyaha kulul, iyo aaladaha goobta kululeeya ee korontada ah.

(9) Qalabka kulaylinta ee daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada waa inuu yahay mid amaan u ah in lagu shaqeeyo.

(a) Agabka guban kara ayna ku jiraan warqadaha, daahyada, iyo alaabta gurigu waa inay ugu yaraan 3 fiid u jiraan foornooyinka, dab shidka, iyo aaladaha kale ee dabka.

(b) Dab-shidka, qoryaha dabka lagu shito, iyo shooladaha xaabada/jeexyada balka lagu shido, haddii la adeegsado, waa inay:

(A) Leeyihiin difaac sugan, oo sugan; iyo

(B) Waa in la kormeeraa oo la nadiifiyaa sanad kasta.

(c) Aaladaha guriga kululeeya ee korontada ku shaqeeya ee la qaadi karo waa in:

(A) Lala joogaa inta la isticmaalaayo lana damiyaa marka aan la isticmaalayn;

(B) Waa inay leeyihiin qaybta laga damiyo ee ootomaatiga ah marka ay dhacaan ama kululaylku ka bato;

(C) Waa inay leeyihiin dabool difaacaaya si looga ilaaliyo in gacmaha iyo walxuhu taabtaan aalada korontada ee gubanaysa;

(D) Waa inay leeyihiin summada shahaadada badqabka ee shaybaarka baaritaanka ee heer qaran la aqoonsan yahay;

(E) Waa in keliya la dhigaa sagxada;

(F) Waa in si sax ah loo haawiyaa, sida loogu baahan yahay shaqada saxda ah; iyo

(G) Waa in loo adeegsadaa si waafaqsan tilmaamaha warshada samaysay.

(10) Aagaga nashaadada waa in si ku filan loogu xiraa nalal loona haawiyaa.

(a) Albaabada iyo daaqabadaha loo furo hawada waa in lagu xiraa shabaq wanaagsan oo wada sifeeya.

(b) Kadib marka la riinjiyeeyo ama la dhigo roog, guriga daryeelka carruurta waa in si buuxda loo haawiyaa ugu yaraan 24 saac ayadoo la adeegsanaayo hawo fiican kahor inta aan loo golaan ilmuhu inay ku soo laabtaan.

(11) Nidaamka korontada ee daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta waa in uusan khatar gelin ilmaha.

(a) Soketyada korontada ee aan la adeegsan ee ay gaari karaan ilmaha da'da baxnaaninta iyo kasii yar waa in lagu xiraa difaac lana saaro daboolada sokedyada oo aysan si fudud ku bixin karin ilmuhu.

(b) Fiilooyinka korontada iyo suumanka korontada ee leh difaacyada kahortaga qaraxa korontada waa inaysan gaari karin ilmaha ku jira daryeelka carruurta.

(c) Fiilooyinka korontada waa inay si fiican u shaqeynayaan, waa inaysan jeexnayn ama shiilmin, waana inaysan lahayn fiilooyin murxay.

(d) Fiilooyinka qaybisooyinka ayaa keliya la adeegsan karaa muddo kooban, ujeedo kooban waana inaysan badelin fiilooyinka tooska ah.

(12) Marka heerkulka guduhu ka hooseeyo 68°F ama ka sareeyo 85°F, adeeg bixiyuhu waa inuu adeegsadaa xeelado si uu uga caawiyo ilmaha inay helaan diiranaan ama qaboow.

(13) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa cabbirada soo socda ee badqabka guriga:

(a) Adeegga taleefanka waa in laga heli karo guriga inta lagu jiro saacadaha shaqada.

(b) Sagxadaha waa in aysan lahayn godad, dilaacyo waawayn oo aan la daboolin, roog lagu sibqanaayo iyo khaataraha kale.

(c) Daaqadaha ka koreeya dabaqa dhulka ee ay geli karaan ilmaha da'da xanaanada iyo kayar waa in lagu xiraa quful si looga hortago in la furo wax ka badan 4 inji.

(d) Saahyada kor u jiidan, daahyada dhaadheer, iyo daahyada xariga ah waa in laga fogeeyaa ilmaha ama waa inay leeyihiin gan ama xarig lagu xiro si loo adkeeyo.

(e) Agabka gudaha iyo jaranjarooyinka ka dheer 30 inji waa in ay leeyihiin difaacyo.

(f) Difaac la dhaqaajin karo, tusaale, albaabka ilmaha, waa in la dhigaa dusha iyo/ama salka dhammaan jaranjarooyinka ay geli karaan ilmaha saqiirada ah iyo kuwa socod baradka ah.

(g) Gidaarada dhalada khaliga ah waa in si cad loogu calaamadiyaa heer ay arkayaan ilmuhu.

## 414-360-0820 Isha Biyaha iyo Tuubooyinka

(1) Isha biyaha ee daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada waa in ay ka timaadaa isha biyaha dawlada ama ceel, waana in laga baaraa dalawandiga, ilaa in daryeelka qoyska ee shahaadada haysta uu adeegsado maahee isha biyaha gaarka ah ee CCLD ogolaatay.

(2) Adeeg Bixiyuhu waa inuu baaraa qasabad kasta oo loo adeegsado biyaha la cabo si looga baaro dalwandiga biyaha ku jira, ilaa in gurigu adeegsado maahee il biyood kale oo ay CCLD oggolaatay.

(3) Haddii isha biyuhu aysan buuxin heerarka lagu cadeeyay (4), adeeg bixiyuhu waa inuu keenaa biyaha ku filan ee la qaadi karo, sida biyaha caadaha ku jira, si loo xaqiijiyo ku dhaqanka xeerarka biyaha la cabo iyo kuwa cuntada lagu karsado ilaa daawayn la samaynaayo ama il biyood kale la abuuraayo. Qasabada waa in aan loo adeegsan cabitaan ama diyaarinta cuntada ilaa heerarka dalawandiga laga yareynaayo.

(4) Kadib baaritaanka hore, adeeg bixiyuhu waa inuu baaraa dhammaan qasabadaha biyaha la cabo ama tuubooyinka si looga eego dalawandiga ugu yarana halmar 6 sanaba laga bilaabo taariikhda baaritaankii ugu danbeeyay. Waa in uusan ku jirin wax ka badan 15 qaybood calaa bilyan kasta (ppb) oo dalawandi ah.

(5) Dhammaan baaritaanka waa in uu sameeyaa shaybaar aqoonsi ka haysta Barnaamijka Aqoonsiga Shaybaarka ee Oregon sida ku cad heerarka lagu caddeeyay xeerka OAR cutubka 333, qaybta 64 oo dhaqan galay Sibteembar 30, 2018. Dhammaan sanbalka la qaado iyo baaritaanka waa in la waafajiyaa nidamaka 3T ee EPA ee Yareynta Dalawandiga Biyaha la Cabo ee Dugsiyada iyo Xarumaha Daryeelka Carruurta, Buug Tusmeedka la Muraajaceeyay laga soo bilaabo Oktoobar 2018, oo lagu dhaqan gashay tixraaca.

(6) Adeeg bixiyuhu waa inuu u gudbiyaa dhammaan natiijooyinka baaritaanka CCLD 10 maalmood gudahood marka uu natiijooyinka ka helo shaybaarka. Natiijooyinka baaritaanka waa inay la socotaa qorshaha dhismaha ama qariirada xarunta oo qeexaaya goobta qasab kasta oo biyaha la cabo ah ama tuubada la baaray.

(7) Haddii natiijooyinka baaritaanku muujiyaan in biyaha qasab ama tuubo biyaha laga cabo ay leedahay heerarka aan amaanka ahayn ee dalawandiga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta:

(a) Waa inuu ka hortagaa isticmaalka qasabadaas ama tuubadaas biyaha la cabo isla markaba kadib marka uu helo natiijooyinka baaritaanka iyo ilaa laga samaynaayo yareynta sunta;

(b) Waa inuu adeegsadaa keliya biyaha jubada ku jira ama baakadeysan si loo buuxiyo shuruudaha qaybtaan;

(c) Waa inuu u gudbiyaa qorshaha talaabada sixitaanka CCLD si ay u ansixiso 60 maalmood gudahood marka la helo natiijooyinka baaritaanka. Qorshaha talaabada sixitaanka ah waa in uu aqoonsadaa xeelada yareynta saxda ah si waafaqsan Cutubka 6 aad ee nidaamka 3T ee EPA ee Yareynta Dalawandiga Biyaha la Cabo ee Dugsiyada iyo Xarumaha Daryeelka Carruurta, Buug Tusmeedka la Muraajaceeyay laga soo bilaabo Oktoobar 2018, oo lagu dhaqan gashay tixraaca;

(d) Waa in uu dhaqan gashaa qaabka yareynta 30 maalmood gudahood kadib marka ay ansixiso CCLD; iyo

(e) Wuxuu la tashan karaa Maamulka Caafimaadka ee Oregon si loo siiyo caawimaad farsamo.

(8) Adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa nuqulka natiijooyinkii ugu danbeeyay ee goobta yaala markasta.

(9) Haddii adeeg bixiyuhu uusan adeegsan tuubooyinka lagu xiro goobta si uu uga qaato biyaha la cabo, cuntada lagu karsado, lagu qaso caanaha ilmaha saqiirka ah, ama lagu diyaariyo cuntada, daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta waa inuu:

(a) U gudbiyaa bayaanka qoraalka ah wakhtiga cusbooneysiinta CCLD kaasoo qeexaaya isha gaarka ah ee biyaha oo xaqiijinaaya in adeeg bixiyuhu uusan adeegsan tuubooyinka guriga ku xiran si looga qaato biyaha la cabo, cuntada lagu karsho, ama lagu diyaarsho cuntada; iyo

(b) Waa inuu u sheegaa CCLD qaab qoraal ah haddii isha gaarka ah ee biyuhu isbadesho.

(10) Haddii aan qasabadda wali la baarin 6 sano gudaheed, adeeg bixiyuhu waa inuu joojiyaa isticmaalka qasabadda ilaa baaritaanka laga samaynaayo natiijooyinkuna ay muujiyaan in heerka dalawandigu ka hooseeyo 15 qaybood calaa bilyan kasta (ppb).

(11) Haddii uu adeegsanaayo ceel gaar ah, baaritaan dheeraad ah waa in la sameeyaa kahor qaadashada ruqsadda koowaad iyo, ugu yaraan, sanad kasta kadib baaritaanka koobaad.

(a) Biyaha ceelka waa in laga baaraa:

(A) Bakteeriyada Coliform iyo E.coli;

(B) Nitrate; iyo

(C) Arsenic.

(b) Baaritaanka waa in uu sameeyaa shaybaar aqoonsi ka haysta Barnaamijka Aqoonsiga Shaybaarka Bii'ada ee Oregon (ORELAP).

(c) Natiijooyinka baaritaanka waa in loo gudbiyaa maamulka caafimaadka dadwaynaha ee maxaliga ah si ay u qiimeeyaan.

(d) Haddii biyaha ceelku aysan buuxin shuruudaha badqabka, adeeg bixiyuhu waa inuu joojiyaa adeegsiga isha biyaha, sida ku cad tallada maamulka caafimaadka dadwaynaha ee maxaliga ah. Adeeg bixiyuhu waa inuu abuuraa oo dhaqan gashaa qorshaha yareynta asagoo raacaaya tallada maamulka caafimaadka dadwaynaha ee maxaliga ah, ilaa laga gaaro waqtiga biyaha ceelka loo aqoonsanaayo kuwo badqab u leh in la isticmaalo.

(e) Guryaha daryeelka carruurta ee shahaadada haysta ee qoyska oo horey loo siiyay ruqsadda kahor Luuliyo 1, 2025, baaritaanka lagu aqoonsaday (11) ee xeerkaan waa in la sameeyaa kahor cusbooneysiinta xigta iyo ugu yaraan sanad kasta kadib baaritaanka koobaad.

## 414-360-0830 Musqulaha, Siimanka Farxalka, iyo Qubayska

(1) Guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh waa inuu leeyahay ugu yaraan hal musqul oo falaash leh iyo hal siinka farxalka oo ay heli karaan ilmuhu markasta.

(a) Musquluhu waa inay leeyihiin tiishka musqusha.

(b) Dhammaan siimanka farxalku waa in:

(A) Ay leeyihiin qasabadaha isugu jira labadaba biyaha kulul iyo biyaha qaboow ee socda. Guryaha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh ee leh shahaadada dhaqan gashay Sebteembar 15, 2002, waa inay ku dhaqmaan shardiga tuubooyinka biyaha noocyada isku jira ah marka dib loo naqshadeeyo xarumaha musqusha.

(B) Waa inay leeyihiin saabuun iyo tiishka halka mar la isticmaalo; iyo

(C) Waa inaan loo adeegsan diyaarinta cuntada ama cabitaanka, ama dhaqista weelasha.

(c) Jaranjarooyin ay fududahay in la nadiifiyo ama sal balaaran oo leh dul aan lagu sibqanayn si ay ilmuhu u isticmaalaan musqulaha iyo siimanka si raaxo leh iyo ayadoo uusan caawinayn qof wayn.

(2) Haddii saqiirada iyo socod baradku ay ku jiraan daryeelka waa inay jirtaa baafka qubayska, baafka qubayska ilmaha, beeshin caag ah, ama siin godan oo isla sayskaas ah oo ilmuhu ku qubaysan karaan.

## 414-360-0840 Kahortaga Iyo Maareynta Khataraha

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in agabka soo socda ay heli karaa ilmuhu sida lagu qeexay xeerka OAR 414-360-0100(21):

(a) Dhammaan agabka sunta ah ama khatarta dhalin kara;

(b) Agabka iyo qalabka nadiifinta, sifeynta iyo jeermis dilista;

(c) Geedaha sunta ah;

(d) Maaddooyinka tubaakada, bilaa qiiqa ah ama aaladaha shiishada;

(e) Khamriga;

(f) Agabka guban kara, ayna ku jiraan taraqyada iyo qarxisooyinka, iyo agabka maaraystay;

(g) Mindiyaha iyo maadooyinka kale ee afaysan; iyo

(h) Aaga matoorka ku shaqeeya ama aaladaha korontada.

(2) Maaddooyinka sunta ah waa in la gashaa meel ka fog daawooyinka, qalabka adeegga cuntada, iyo kaydka cuntada.

(3) Maadooyinka waa in la gashaa qasacyada orjinaalka ah ee la calaamadiyay. Qasacyo kasta oo yaryar ama dareereyaasha ay qaseen daryeel bixiyaashu waa in lagu calaamadiyaa maadooyinka ku jira qasaca.

(4) Adeeg bixiyuhu waa inuu qaadaa talaabooyin si looga hortago in ilmuhu u ban baxaan waxyaabaha soo socda, haddii ay ka jiraan dhismaha:

(a) Ilo kasta oo ay ka imaanayso dalawandi ama riijiga leh dalawandiga. Meelaha riinjiyaysan waa in ay badqabaan, gudaha iyo banaanka labadaba, si looga hortago in ilmuhu liqaan riinjiga ka samaysan dalawandiga;

(b) Asbestos;

(c) Dhoobada sunta ah; iyo

(d) Maadooyinka kale ee sunta ah iyo khataraha la aqoonsaday.

(5) Adeeg bixiyuhu waa inuu aqoonsadaa, xaliyaa uuna meesha ka saaraa agabka iyo xaaladaha khatarta dhalin kara, ayadoo la adeegsanaayo difaacyada xanibaada si looga hortago in ilmuhu galaan, haddii loo baahdo. Daryeel bixiyaashu waa inay:

(a) Si joogto ah u kormeeraan aagaga ciyaarta ee gudaha iyo banaanka iyo qalabka si looga eego khataraha, sida qaybaha maqan ama jaban ee qalabka, geesaha talfiiqa ah, cirbadaha, iyo qashinka;

(b) Waa inay xaqiijiyaan qasacyada furan ee biyaha sida baafka qubayska, baaldiyada, iyo tirtireyaasha in la faarujiyo isla marka la isticmaalo;

(c) Waa inay xaqiijiyaan sanduuqyada ciida inaysan ku jirin qashinka iyo wasaqda xayawaanku; iyo

(d) Waa inay xaqiijiyaan in dhammaan bacaha caaga ah ee balaaran heer ay geli karaan madaxa ilmaha aysan heli karin ilmuhu.

(6) Adeeg bixiyuhu waa in uusan ogolaan ku adeegsiga wax kamid ah maadooyinka tubaakada sida sigaarka, xashiishka, aaladaha bilaa qiiqa ah ama shiishada, aalada daroogada ee paraphernalia, hemp, marijuana iyo maadooyinka lagu daray marijuana gudaha dhismeyaasha inta lagu jiro saacadaha shaqada ama marka ilmaha daryeelka carruurtu ay joogaan. Kuwaan waxaa kamid ah:

(a) Guriga daryeelka carruurta;

(b) Aaga ciyaarta ee banaanka;

(c) Meel 10 fiid kayar u jirta albaab kasta, irid kasta, ama daaqad kasta oo furmaysa ama aaga hawada ee hawada siinaaya aag xziran; ama

(d) Gudaha gaariyaal kasta oo ilmaha daryeelka carruurtu ku jiraan ama safar kasta oo gaaban.

(7) Dhammaan marijuana, maadooyinka laga sameeyay marijuana iyo paraphernalia la xiriirta waa inaan lagu hayn mid kamid ah qaababka soo socda:

(a) Hoosta aalada badqabka ilmaha ama qufulka badqabka ilmaha; ama

(b) Qol xiran.

(8) Waa in uusan jirin qof ku beeraaya ama ku qaybinaaya marijuana dhismeyaasha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta.

(9) Waa inuusan qofna khamri ku cabin dhismeyaasha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta inta lagu jiro saacadaha shaqada ama marka carruurta daryeelka carruurtu joogaan.

(10) Hubka, qoryaha BB, qoryaha pellet iyo falaaraha waa in lagu xiraa meel qufulan laguna kaydiyaa aag aysan adeegsan carruurta daryeelka carruurta.

(a) Rasaasta waa in lagu kaydiyaa laguna qufulaa meel gaar ah.

(b) Hubka, qoryaha BB, iyo qoryaha pellet waa in amaanka loo xiraa.

(11) Hubka, qoryaha BB, qoryaha pellet iyo falaaraha waa in lagu xiraa meel qufulan, sida fure, quful, ama qufulka lagu furi karo iskaanka jirka ama indhaha laguna kaydiyaa aag aysan adeegsan carruurta daryeelka carruurta. Qufulka badqabka ilmaha ama qufulka booda ayaan buuxinayn shardigaan.

(a) Barkadaha dabaasha iyo baafafka kulul waa in loo xadidaada gelitaankooda ayadoo la adeegsanaayo midkood qaababka soo socda:

(A) Dabool quful leh, oo adag;

(B) Xayndaabka ugu yaraan afarta fuud ah dheerar ahaan oo ka biloowda heerka dhulka, lana xiro dhammaan ganjeelada iyo albaabada laga geli karo;

(C) Geesaha afarta fuud ah ee aan la kori karin ayadoo laga saaraayo jaranjarooyinka barkadda dabaasha ama aan la geli karin; ama

(D) Qol xiran ama dhammaan albaabada laga galo aaga la xiray.

(b) Daryeellada carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan oo leh ruqsad ka horaysay Luuliyo 1, 2025, barkadaha warta ama badiiciga ah ee ku yaala gudaha aaga ciyaarta ee banaanka daryeelka carruurta waa in lagu xadidaada gelitaankooda midkood qaababka soo socda:

(A) In lagu xiro xadidaad sugan laguna qufulo midkood fure ama iskudarka qufulka;

(B) Dabool ka saaro dusha barkada yar kaasoo leh awood iyo sugnaan ku filan si uu uga difaaco ilmaha inay ku dhacaan biyaha. Daboolka waa in la xiraa ama qufulaa si looga hortago in meesha laga saaro; ama

(C) Albaab qufulan oo lagu tagaayo aaga banaanka ee barkadu ku taalo marba haddii albaabku markasta xiran yahay inta lagu jiro saacadaha shaqada ilmuhuna aysan adeegsanayn aagga banaanka ee barkadu ku taalo.

(c) Daryeellada carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta oo leh ruqsad ku beegan ama ka danbaysay Luuliyo 1, 2025, barkadaha warta ama badiiciga ah ayaa mamnuuc ka ah aaga ciyaarta ee banaanka daryeelka carruurta. Daryeellada carruurta ee shahaadada haysta ee ruqsadda haystay kahor Luuliyo 1, 2025 ayaa laga mamnuucay ku darista barkad wareed ama dabiici ah oo cusub aaga nashaadada ee banaanka daryeelka carruurta.

(12) Adeeg bixiyuhu waa inuu guriga ka ilaaliyaa xasharaadka, cayayaanka, iyo bahallada kale.

(a) Aaladaha buufiya cayayaanka ee ootomaatiga ah, uuriyaasha, ama uumiyaasha waa in aan la adeegsan.

(b) Maaddooyinka buufinta cayayaanka waa in aan la marin ama la adeegsan kara carruurta daryeelka carruurtu joogaan. Kadib marka la mariyo, carruurta daryeelka carruurtu waa in aysan gelin aagga ilaa in ay sidaas sheegto maahee shirkada samaysay.

(13) Adeeg bixiyuhu waa inuu qaadaa tallaabooyin taxadar si uu uga difaaco ilmaha gaariyaasha socda:

(a) Waa inuu qasab ka dhigaa in la keeno lana qaado ilmaha keliya geeska wadada ama goob ka baxsan wadada oo laga difaacay gaariyaasha socda; iyo

(b) Waa inuu xaqiijiyaa in daryeel bixiye kasta oo kormeeraaya keenista iyo qaadista uu arki karo uuna xaqiijin karo in carruurtu ay ka fog yihiin gaariyaasha kahor inta aan gaarigu dhaqaaqin.

## 414-360-0850 Dayactirka iyo Nadaafada

(1) Guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh iyo aagaga waa in la nadiifiyaa aysana lahayn wax qashin ah ama wasaq ah iyo qalab aan la adeegsan ama aan shaqeynayn, iyo gaariyaal.

(2) Aaladaha aan la adeegsan, sida talaagadaha waawayn ama aaladaha barafka, kuwaasoo abuuraaya khatarta ceegada, waa in la sugaa amaankooda si looga hortago in la galo.

(3) Adeeg bixiye waa inuu gashaa dhammaan qashinka iyo dheecaannada jirka qasacyo aan biyaha dhuuqayn, oo ay fududahay in la dhaqo lehna dabool adag.

(a) Qashinka iyo wasakhda waa in laga saaraa dhismeyaasha ugu yaraan halmar asbuucii.

(b) Agabka aan cuntada ahayn, ee aan khatarta ahayn iyo agabka aan sababi karin urka aadka u xun, sida tiishka, ayaa lagu ridi karaa meel ka duwan qashinka iyo qasaqda gudaha guriga, laguna ridayaa qasac aan daboolnayn.

(c) Qasacyada qashinka iyo wasaqda iyo aaga kaydka ee banaanka waa in la nadiifiyaa lagana ilaaliyaa cayayaanka qashinka, xasharaadka, baranbarada iyo cayayaanka kale.

(d) Meesha la gasho qashinka ee banaanka waa in aysan geli karin ilmuhu.

(4) Adeeg bixiyuhu waa inuu ku ilaaliyaa dhismaha, qalabka, iyo gaariyaasha dayactir wanaagsan, xaalad nadiif ah oo saafi ah.

(a) Darbidda sagxada, safiitada iyo waxyaabaha ku dhisan dhammaan qolalka waa in ay ahaadaan nadiif ayna dayactir fiican helaan.

(b) Dusha meelaha iyo walxaha sida joogtada ah loo taabto waa in si joogto ah loo nadiifiyaa, loo sifeeyaa loogana dilaa jeermiska.

(c) Jikada iyo musqulaha loo adeegsado daryeelka carruurta waa in la nadiifiyaa lana sifeeyaa ama jeermiska laga dilaa marka loo baahdo iyo ugu yaraan maalin kasta.

(5) Dhammaan boonbaleyaasha, qalabka iyo alaabta guriga ee ay adeegsadaan carruurtu waa in la nadiifiyaa, la dhaqaa oo loo sifeeyaa si joogto ah iyo marka ay wasaqoobaan.

(a) Miisaska biyaha, qasacyada lamidka ah, iyo boonbaleyaasha biyaha waa in la faarujiyaa lana dhaqaa maalin kasta ama ka badan marka loo baahdo.

(b) Gogosha waa in la nadiifiyaa ugu yaraan asbuuc kasta, ama ka badan haddii ay wasaqoobaan iyo kahor inta aan lagu seexin ilmo kale.

(c) Sijaayadaha iyo sariiraha fudud waa in la nadiifiyaa lana sifeeyaa ugu yaraan halmar asbuucii, ama ka badan haddii ay wasaqoobaan iyo kahor inta aan lagu seexin ilmo kale.

(6) Adeeg bixiye waa inuu haystaa dharka, kuwa halmar la isticmaalo iyo kuwa marar badan la isticmaalaba, ee loo adeegsado sifeynta cuntada ku daadata dhulka aana loo adeegsan ujeedo kale. Dharka dib loo adeegsado waa in lagu kaydiyaa dareeraha wax nadiifiya inta u dhexaysa isticmaallada kadibna qashinka lagu daraa ama la dhaqaa maalin kasta.

(7) Adeeg bixiyuhu waa inuu isla markaba dhaqaa waxyaabo kasta oo daata oo ka kooban dheecaanka jirka, sida kaadida, saxarada, dhiiga iyo mataga sida soo socota:

(a) Daryeel bixiyaashu waa inay adeegsadaa gacmo gashiyada la tuuri karo, ee aan dilaacayn marka ay dhaqayaan dheecaanka jirka;

(b) Dusha meelaha waa in la dhaqaa oo la mariyaa jeermis dileyaal;

(c) Agabka dhiigu ku daatay waa in lagu ridaa bac afka ka xiran kadibna qashinka lagu daraa isla markaba;

(d) Gacmo gashiyada waa in meesha laga saaro isla marka la adeegsado, la gashaa bac afka ka xiran, sajal ah, ama haddii kale la xiray isla markana la tuuraa; iyo

(e) Gacmaha waa in la dhaqaa kadib marka la adeegsado oo qashinka lagu rido gacmo gashiyada.

## 414-360-0860 Kahortaga Dabka

(1) Albaabada la maro, marinnada daad gureynta, iyo iridaha waa in laga ilaaliyaa alaabaha, agabka guriga, qalabka ama qashinka si loo sahlo gelitaanka bilaa xanibaada ah ee banaanka. Adeeg bixiye waa inuu sameeyaa kormeerka maalin kasta si loo hubiyo in marinnada daad gureynta ay banaan yihiin iyo in iridaada, ayna ku jiraan albaabada iyo daaqadaha laga baxsado, ay shaqeynayaan.

(2) Agabka guban kara iyo kuwa dabka kicin kara:

(a) Waa in lagu xareeyaa qasacooda orjinaalka ah ama qasaca badqabka;

(b) Waa in aan lagu kaydin 4 fiid meel uga dhow foornooyinka, qalabka kale ee gubana kara ama dabka samayn kara, ama kululeeyaasha biyaha ee shidaalka ku shaqeeya; iyo

(c) Haddii ay ka badan yihiin hal galaan, in lagu hayo dhisme aan ku xirnayn guriga, sida darsad ama garaashka.

(3) Marwaxadaha kululeynta iyo hawada, sifeeyaasha iyo qalajiyaasha hawada waa in si joogto ah loo nadiifiyaa si looga hortago in qashin isku xiro.

(4) Agabka leh holaca furan waa in aan la adeegsan, marka laga reebo isticmaalka kooban ee la ilaalinaayo ee shumacyada.

(5) Haddii walaacyada badqabka dabka la ogaado inta lagu jiro kormeerka, shaqaalaha CCLD ayaa la tashan kara saraakiisha xeerka dabka kadibna wada tashigana, waxay codsan karaan in sarkaalka xeerka dabku uu sameeyo kormeerka badqabka nolosha ee dabka.

(6) Waa inuu jiraa ugu yaraan nidaamka dab damiska ee lagu cabbiray 2-A-10 BC dabaq kasta oo guriga kamid ah, ilaa in dabaqa uusan si buuxda u maamulin maahee adeeg bixiyuhu.

(a) Qalabka dab damiska yaala dabaqyada daryeelka carruurta lagu baxsho waa in lagu qoondeeyaa qorshaha dabaqa oo shardi ku ah qodobka OAR 414-360-0260(2) waana in lagu dhajiyaa ama lagu xareeyaa aaga marinka daad gureynta ee rasmiga ah. Qalabka dab damiska waa in si fudud loo heli karaa uuna muuqdaa.

(b) Haddii qalabka dab damiska lagu xareeyo qaanad ama armaajo, waa in lagu dhajiyaa meesha waana inaysan jirin calaamad muujinaysa in qalabka dab damisku gudaha ku jiro. Agabka meesha la dhigo, ayna ku jiraan qalabka guriga, kaydka agabka, ama alaab kasta oo kale waa in aan meesha loo gelin qaab xanibaada gelitaanka qaanada ama armaajada.

(c) Adeeg bixiyuhu waa inuu kormeeraa qalabka dab damiska bil kasta kormeerkana waa in la qoraa.

(7) Ganbaleellada qiiqa iyo aaladaha sheega kaarboon monoxide-ka waa in:

(a) Lagu rakibaa dabaq kasta oo guriga kamid ah iyo aag kasta oo carruurtu seexdaan. Haddii lagu xareeyo meel ka baxsan qolka loo adeegsado hurdada, waa in lagu xiraa meel 6 fiit uga dhow albaabka qolka;

(b) Waa in lagu hayaa qaab shaqeynaaya; iyo

(c) Waa in la tijaabiyaa bil kasta si loo xaqiijiyo in ay si fiican u shaqeynayaan. Baaritaanka waa in la qoraa.

(8) Tababarka dabka waa in la sameeyaa bil kasta waqtiyo kala duwan inta lagu jiro saacadaha shaqada ee daryeelka carruurta.

(a) Tababarada dabka waa in lagu daraa tababar ayadoo la adeegsanaayo marin kale oo daad gurayn ugu yaraan halmar sanadkii.

(b) Tababarka dabka waa in la sameeyaa marka ay amarto CCLD inta lagu jiro booqashada la shaaciyay.

(c) Daryeel bixiyaashu waa inay haystaan qaabka digniinta (tusaale, ganbaleelka qiiqa, nalka bigleeya, ganbaleel qaylo badan ama firinbi) si looga digo dadka jooga guriga xaalad degdeg ah ama tababar.

(d) Daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta waa inuu muujiyaa dedaallo uu ku samaynaayo daad gureynta buuxda ee daryeel bixiyaasha iyo carruurta daryeelka carruurta muddo sadex daqiiqo ah gudaheed. Haddii uusan awoodin inuu ku daad gureeyo sadex daqiiqo gudahood, adeeg bixiyuhu waa inuu sameeyo dedaalo dheeraad ah ayna ku jiraan midkood ama ka badan waxyaabaha soo socda:

(A) Adeegsiga sariiraha daad gureynta, tarooleyaasha/gaari yareyaasha, ama gaari gacannada;

(B) Siinta daryeel bixiyaasha tababar dheeraad ah;

(C) Siinta ilmaha shaqooyin gaar ah oo ay samaynayaan inta lagu jiro tababarka, sida inay qabsadaan xariga socodka badqabka;

(D) Siinta ilmaha tilmaamaha qeexan ee tooska ah ee ku habboon da'da lana xiriira waxa dhacaaya inta lagu jiro tababarka;

(E) Dib u eegista iyo wax ka badelka qorsheyaasha xaalada degdega ah iyo waddooyinka daad gureynta;

(F) Sameynta tababarada dheeraadka ah ee daad gureynta;

(G) Ku dhafidda qorshaynta badqabka dabka manhajka; iyo

(H) Xeeladaha kale ee ay aqoonsatay CCLD.

(e) Hal qayb oo kale oo kamid ah diyaar garoowga xaalada degdega ah iyo qorshaha jawaabta oo dheeraad ku ah tababarada dabka ee bilaha ah waa in la sameeyaa labadii biloodba mar waana inay raacaan shuruudaha duubista ee ku qoran OAR 414-360-0860(9).

(9) Adeeg bixiyuhu waa inuu helaa diiwaanka qoran ee tababar kasta oo u diyaar garoowga xaalada degdega ah kaasoo muujinaaya:

(a) Taariikhda iyo waqtiga;

(b) Iridaha la adeegsaday;

(c) Tirada iyo heerka da'da ee carruurta la daad gureeyay;

(d) Wadarta guud ee dadka guriga joogay wakhtiga tababarka;

(e) Wadarta waqtiga ay qaadatay in laga daad gureeyo guriga;

(f) Magaca qofka sameeyay tababarka; iyo

(g) Qaabka digniinta ee la adeegsaday.

## 414-360-0900 Alaabta Guriga, Qalabka iyo Agabka Ciyaarta

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in alaabta guriga ee ay adeegsadaan carruurta ku jirta daryeelka carruurta:

(a) La nadiifin karo;

(b) Si badqab leh loo dhisay aysana lahayn dalwandi, aysana lahayn geeso caarad leh ama mudac ah ama qaybo jajaban; iyo

(c) Ay ku jiraan xaalada shaqada oo wanaagsan iyo dayactir aysana lahayn duleelo ama dilaacyo; iyo

(d) Ay yihiin kuwo xasiloon ama sal adag.

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in alaabtu tahay mid ilmaha loogu talo galay ama loo sameeyay dhallaanka, socod baradka, iyo ilmaha da'da dugsiga barbaarinta.

(3) Adeeg bixiye waa inuu siiyaa sariir, sijaayad, sariir yar, ama qalabka kale ee hurdada

(a) Socod barad kasta iyo ilmo kasta oo ku jira da'da xanaanada xiliga hurdada;

(b) Ilmo kasta oo gaaray da'da dugsiga kaasoo doonaayo inuu nasto; iyo

(c) Ilmo u baahan in la karantiilo sabab la xiriirta xanuun.

(4) Sijaayad, sariiraha yaryar, iyo qalabka kale ee kasta ee hurdada waa in:

(a) Uu noqdaa mid tayo badan oo si fiican u dayactiran; iyo

(b) Waa in la nadiifin karo oo la dhaqi karo.

(5) Sijaayadaha dhulka la dhigto waa in:

(a) Loo sameeyay in lagu seexdo;

(b) Waa inay ugu yaraan hal inji balaaran yihiin; iyo

(c) Waa in lagu daboolaa agab aysan biyuhu ka dusi karin.

(6) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in ilmo kasta oo jira 12 billood iyo ka wayn la siiyo gogosha gaarka ah oo ka kooban ugu yaraan go' ama buste.

(7) Sariiraha qoyska ama kuraasta fadhiga ayaa loo adeegsan karaa gogol gaar ah.

(8) Haddii waalidka ilmuhu uu codsado, ilmaha walaalaha ah ayaa wadaagi kara hal sariir.

(9) Qaybta kore ee sariiraha isa saarka ah ayaa keliya lagu seexin karaa ilmaha jira 10 sano iyo ka wayn waana inay leeyihiin rakada sariirta iyo jaranjarada badqabka oo ku dhisan.

(10) Adeeg bixiyuhu waa inuu bixiyaa agabka iyo qalabka ciyaarta kuwaasoo:

(a) Ku haboon baahiyaha kobaca, danaha iyo awoodaha ilmaha;

(b) Adag oo aan lahayn geesaha fiiqan ama cirifyada, caaradaha, talfiiqyo ama boolal qofka mudi kara, qaybo dabcay ama daxalaystay, ama riinji ay ku jirto dalawandi ama maadooyinka kale ee sunta ah;

(c) Ay fududahay in la nadiifiyo lana dhaqo, ama qashinka lagu daro;

(d) Si fiican u shaqeynaaya; iyo

(e) Si fudud ay ku heli karaan carruurtu.

(11) Adeeg bixiyuhu waa inuu bixiyaa tiro badan oo kala duwan oo agabka lagu ciyaaro ah (tusaale, boonbaleyaasha, buugaagta, iyo ciyaaraha) kuwaasoo:

(a) Ku filan si la iskaga ilaaliyo in ilmuhu ku dagaalamaan agabka caanka ah; iyo

(b) Bixinaaya noocyada kala duwan ee nashaadaadka lagu doonaayo 414-360-0520 hawl Maalmeedka iyo Nashaadaadka Barnaamijka;

(12) Nashaadaadka ay ku jiraan agab khatar amni keenaaya (tusaale, bir, koolo, agabka alwaaxa lagu jaro) ayaa ku xadidan ilmaha dugsiga xanaanada iyo carruurta da'da dugsiga gaartay.

(a) Daryeel bixiyaashu waa inay marka koowaad u sheegaan sida saxda ah ee loo adeegsado qalabka iyo tallaabooyinka badqabka.

(b) Daryeel bixiyaashu waa inay u jiraa meel ay ka laaci karaan carruurta ka qaybgalaysa shaqada si loo yareeyo khatarta dhaawaca.

(13) Adeeg bixiye waa inuu bixiyaa fursadaha waxbarashada ee dhaqan iyo isir ahaan kala duwan oo lagu baxsho nashaadaadka iyo agabka kuwaasoo ka turjumaaya dhammaan carruurta, qoysaska iyo daryeel bixiyaasha. Tusaaleyaasha tan waxaa ku jiri kara: Dhooliyaasha, buugaagta, ciyaaraha iyo agabka isku dhafan kuwaasoo aan muujinayn caadooyin gaar ah; muusig isku dhafan oo lagasoo xushay dhaqannada badan oo ku baxaaya luuqadaha hooyo ee carruurta; isku dheelitrka kooxaha, da'aha, awoodaha, qaababka qoyska, iyo jinsiyada isirka iyo dhaqanka kala duwan.

## 414-360-0920 Aagga Ciyaarta ee Banaanka

(1) Adeeg Bixiyuhu waa inuu bixiyaa aaga ciyaarta ee banaanka kaasoo:

(a) Carruurtu ay si badqab leh u gaari karaan; iyo

(b) Aan ka yareyn 75 iskuweer fiid calaa ilmo kasta oo adeegsanaaya goobta wakhti gaar ah.

(2) Haddii aaga ciyaarta ee banaanka uusan ku xirnayn ama toos u maamulin adeeg bixiyuhu, sida beerta raaxada dawlada ama dugsiga, adeeg bixiye waa inuu haystaa qorshaha qoran, oo ay ansixisay CCLD, kaasoo oo qeexaaya sida daryeel bixiyaashu ay u ilaalin doonaan badqabka carruurta ku jira daryeelka. Qorshaha qoran waa in lagu daraa waxyaabaha soo socda:

(a) Badka uu aaga ciyaarta banaanka ee gaarka ah u jiro guriga;

(b) Qeexitaanka faahfaahsan ee sida carruurta, oo ay ku jiraan dhallaanka iyo socod baradka, ay u gaari doonaan aaga gaarka ah;

(c) Xaalada xaafada iyo aaga ciyaarta ee banaanka, khataraha, iyo dhibaatooyinka;

(d) Helitaanka qalabka habboon oo leh aaga dhicitaanka iyo aag difaac leh;

(e) Xaqiijinta in waalidiinta loo sheegay in carruurtoodu ay adeegsan doonaan aaga ciyaarta ee banaanka iyo goobteeda;

(f) Difaacyada daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta uu dejin doono si loo xaqiijiyo in carruurta si sax ah loo ilaalinaayo inta ay u socdaan ayna ka imaanayaan iyo inta ay adeegsanayaan goobta;

(g) Nooca nashaadaadka kale iyo shaqsiyaadka laga yaabo inay wadaagi doonaan aaga;

(h) Helitaanka xarumaha musqulaha; iyo

(i) Awooda helitaanka kaalmo haddii loo baahdo marka dhaawac ama xanuun yimaado.

(3) Adeeg bixiye waa inuu ka ilaaliyaa aaga ciyaarta ee banaanka qashinka, wasaqda xayawaanka, qashinka adkaha ah iyo waxyaabaha adag, jajabka, ama xaaladaha kale ee keenaaya khatarta.

(4) Aaga ciyaarta ee banaanka waa in uu kuw areegsan yahay dhisme, darbi ama xayndaab loogu talo galay inuu ka difaaco ilmaha inay ka baxaan una diidaaya inay koraan.

(a) Darbiga ama xayndaabku waa inuu ka biloowdaa dhulka, uu yahay ugu yaraan 4 fiid dheerar ahaan, uuna leeyahay qaabka xasiloon, adag, oo kor u taagan. Guryaha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh ee leh shahaadada dhaqan gashay Sebteembar 15, 2002, waa inay ku dhaqmaan shardiga xayndaabka ugu yaraan saddex fiid ah dheerar ahaan ilaa wakhtiga laga wareejinaayo albaabka ka bixitaanka.

(b) Furitaannada xayndaabka iyo albaabada waa in aysan ka waynayn 3½ inji. Guryaha leh shahaadada dhaqan galaysa Juun 30, 2025, waa inay ku dhaqmaan shardiga in ugu badnaan 4 inji la furo goobaha xayndaabka leh ilaa xayndabaka laga badelaayo.

(c) Difaacyada sida xayndaabka caaga ah ayaa la adeegsan karaa si ku meel gaar ah si looga difaaco ilmaha inay galaan khatar taagan. Haddii xayndabaka noocaan ah la adeegsado, waa in lagu taageeraa alxwaaxyo boorarka xayndabaka ee birta ah.

(d) Xayndaabyadu waa inay buuxiyaan xeerarka maxaliga ah ee quseeya.

(5) Adeeg bixiye waa inuu xaqiijiyaa in aagaga la adeegsado ee ilmuhu ku dhacaayo ama uga baxaayo qalabka ciyaarta ay yihiin:

(a) Ugu yaraan 6 fiid oo kala fogaan ah aaga socodka, dhismeyaasha iyo aaga banaanka ee qalabka;

(b) Ka caagan caqabadaha, aan ahayn qalabka qudhiisa, kuwaasoo ilmuhu geli karo ama ku kufi karo;

(c) Waxaa loo nidaamshay in laga hortago khataraha ka imaanaaya nashaadaadka iska hor imaanaaya;

(d) Waa in ay banaan tahay ugu yaraan 6 fiid dhammaan geesaha ka xiga qalabka ilaa in khatarta kufitaanka ee geeska ay yar tahay, sida qalabka ciyaarta ee leh difaacyada geesaha ama difaacyada ama geesaha laalacshowga;

(e) U ogolaanshaha laalacshowyada halka gees ee horay iyo gadaal u ruxma, inay gaaraan badka ugu yar ee labo jeer badka toosan ee barta dhexe ilaa aaga difaaca ee horey iyo gadaal ee laalacshowgu gaari karo;

(f) U ogolaanshaha laalacshowyada baafka leh iyo laalacyada ku xiran birta kore ama suumanka ayna adeegsadaan 2 sano jirada ama ka yar, oo ku xiran aaga isticmaalka oo ku fadhiya ugu yaraan 6 fiid horay iyo gadaal laga bilaabo barta laalacshowga; iyo

(g) U ogolaanshaha laalacshowga geesaha badan, sida laalacshowga taayirka ee u wareega qaabka mareegta ah, inuu ku fadhiyo aag 6 fiid ah oo dheeraad ku ah badka jooga ee qaybta kore ee laalacshowga ilaa sanka ee fadhiga laalacshowga jiho kasta laga bilaabo bar dhexda. Ugu yaraan 30 inji oo u dhexaysa fadhiga laalacshowga taayirka iyo qaab dhismeedka xoojinta ah ayaa loo baahan yahay.

(6) Dhammaan qalabka banaanka ee 18 inji ama ka sareeya, adeeg bixiyuhu waa inuu markasta joogteeyaa aagga difaaca ee goobaha isticmaalka ee hoosta iyo geesaha qalabka. Agabka la aqbali karo waxaa kamid ah buufka alwaaxa, xashka aadka u cufan, cinjir la cukay ama la warshadeysan, jeexyada alxaawa ee isku uruursan, ciid, jaay jilicsan, sijaayado cinjir ah ama cinjirka meesha lagu daadiyay ee difaac ahaan loo adeegsado. Dhoobo ayaan la ogolayn.

(a) Sijaayada cinjirka ah iyo cinjirka meesha lagu daadshay waa inay:

(A) Lagu tijaabshay ASTM F1292;

(B) Waa in loo rakibaa loona ilaaliyaa sida ay sheegtay warshada samaysay; iyo

(C) Waa in aysan lahayn jajab, dilaacyo, meelo dabacsan, ama xaaladaha kale ee keeni kara khatar.

(b) Agabka dabacsan ee buuxintu waa inay:

(A) Qalabka kayar 4 fiid joog ahaan, leeyihiin dhumucda ugu yar oo ah 6 inji;

(B) Qalabka ka badan 4 fiid joog ahaan, leeyihiin dhumucda ugu yar oo ah 9 inji;

(C) Waa inay sii ahaadaan dhumucda loo baahan yahay ayadoo la badelaayo, la simaayo, ama durjinta qalabka; iyo

(D) Waa in aan lagu rakibin shub ama laami.

(7) Adeeg bixiye waa inuu si adag u adkeeyaa qalab kasta oo la fuulo ama qalabka laalacshowga si waafaqsan tilmaamaha warshada samaysay.

(8) Adeeg bixiyuhu waa inuu bixiyaa aagga hooska leh oo ay helayaan carruurta ku ciyaaraysa banaanka. Harka ayaa laga heli karaa geedo, dhismeyaal, ama meelo har ah oo la dhisay.

(9) Qalabka lagu bood-boodo, ee aan ahayn kuwo laastiiga ah, waa mamnuuc.

(a) Qalabka lagu boodo ee laastiiga ah ayaa la ogol yahay keliya marka loo adeegsado sida ay tilmaantay shirkadda samaysay.

(b) Haddii aalada lagu boodboodo taalo aaga ciyaarta ee ilmaha, adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in carruurta ku jirta daryeelka carruurta aysan geli karin aalada lagu boodboodo.

(10) Qalabka la buufiyo sida: guryaha buufinta ah, aaladaha socodka ee dayaxa, iyo giraajimoorinta waawayn, iwm., ayaa la ogol yahay marka loo adeegsado sida ay tilmaantay shirkadda samaysay. Daryeel bixiyaashu waa inay la joogaan ayna joogaan meel ay talaabo qaadi karaan haddii loo baahdo.

(11) Adeeg bixiye waa inuu biyaa qalabka dhaqdhaqaaqa ee banaanka kuwaasoo baraaya xirfadaha kala duwan (tusaale ahaan, korista, isku dheelitirka, wax tuurista, wax qabashada, hoon ka dhawaajinta, iyo isteerin qabashada).

(12) Adeeg bixiyuhu waa inuu ku dhiiri geliyaa adeegsiga koofiyadaha amaanka uuna u diyaarshaa ilmaha marka ay adeegsanayaan baaskiilka, sadex lugoodka, baaskiilka dheelitirka, iskuutarka, kabaha taayirada leh, kabaha dilindilooda ama laynka ku socda.

(13) Adeeg bixiyuhu waa inuu ku dhaqmaa sharciyada baaskiilka ee Oregon inta ilmaha ku jira daryeelka carruurta ay raacayaan marinada dadwaynaha ama wadooyinka.

## 414-360-1000 Farxalka

(1) Daryeel bixiyaasha iyo carruurtu waa inay ku farxashaan saabuunta iyo biyaha diiran ee socda:

(a) Kadib marka ay isticmaalaan musqusha;

(b) Kadib marka ay xafaayada ka badelaan;

(c) Kadib marka ay qof ka caawiyaan musqusha;

(d) Kahor inta aysan taaban cuntada;

(e) Kahor iyo kadib cunista cuntada;

(f) Kahor ka caawinta qof cunista cuntada; iyo

(g) Karka ay u kala wareegayaan ka shaqeynta cunto ceeriin iyo diyaarinta cuntada bisil.

(2) Daryeel bixiyaasha iyo carruurtu waa inay midkood ku farxashaan saabuunta iyo biyaha diiran ee socda ama adeegsadaan daawada gacmaha lagu nadiifiyo heerka aalkolada ku jirtana tahay 60-95%:

(a) Kadib marka ay sanka iska fiifiyaan;

(b) Kadib marka ay qufacaan ama hindhisaan;

(c) Kadib nashaadaadka banaanka; iyo

(d) Kadib marka ay taabtaan boonbaleyaasha ama taabtaan xayawaannada, marka laga reebo eeyyada ama biisadaha.

(3) Daawada gacmaha lagu nadiifiyo waa in la gashaa meel aysan gaarayn carruurtu.

(4) Daawada gacmaha lagu nadiifiyo waa in aan loo adeegsan ilmaha kayar 24 bilood jir.

(5) U adeegsiga daawada gacmaha lagu nadiifiyo socod baradka waawayn iyo carruurta da'da xanaanada waa inuu la socdaa qof wayn.

(6) Marka farxal uusan suurtagal ahayn, laakiin uu qasab ka dhigaayo OAR 414-360-1000(1)(a) ilaa (g), tusaale, safarada gaaban iyo marka la joogo garoonka ciyaarta, suufka qoyan iyo daawada gacmaha lagu nadiifiyo ay ku jirto aalkolo dhan 60-95% waa in la isla adeegsadaa.

(7) Ilmaha aan awoodin inay iskood u farxashaan, daryeel bixiyaasha ayaa ku dhaqi kara gacmaha ilmaha dharka halka mar la isticmaalo badelkii ay adeegsan lahaayeen biyo socda.

## 414-360-1010 Xanuunka

(1) Adeeg Bixiyuhu waa inuusan aqbalin inuu daryeelka yimaado ilmo:

(a) Laga helay ama sida xanuunka xadidaadaya daryeelka carruurta, sida lagu cadeeyay xeerarka maamulka ee Maamulaha Caafimaadka ee Oregon, marka laga reebo marka uu wato oggolaanshaha qoraalka ah ee maamulaha caafimaadka dadwaynaha ama dhakhtar leh ruqsad; ama

(b) Qaba midkood ama ka badan astaamaha soo socda ee xanuunka, marka laga reebo marka uu wato ogolaanshaha qoraalka ah ee maamulaha caafimaadka dadwaynaha ama dhakhtar leh ruqsad:

(A) Qaba qandho ka badan 100.4°F. Ilmo qaba qandho ka badan 100.4°F ayaa soo laaban kara haddii uusan qandho lahayn muddo 24 asagoo cunin xanuun baabi'iye.

(B) "Shuban", taasoo ka dhigan saddex ama ka badan jeer oo uu dhigo saxaro biyo leh, iyo dhiig, ama jilicsan muddo 24 saac ah, bilaabashada lama filaanka ah ee saxarada jilicsan, ama ilmuhu uusan awoodin inuu xakameeyo shaqada malawadka marka uu horay u awooday. Ilmo qaba shuban ayaa soo laaban kara 48 saacadood kadib marka shubanku ka joogsado ama marka uu cadeyn qoraal ah kasoo qaato dhakhtar ruqsad leh.

(C) Matagga ugu yarana halmar, markaas oo aysan jirin sabab sharxaysa mataga. Ilmo mataga asagoo aan la garanayn sababta ayaa ku laaban kara 48 saac kadib markii ugu danbaysay ee uu matagay ama marka uu cadeyn qoraal ah kasoo qaato dhakhtar ruqsad leh.

(D) Qufaca daran ama joogtada ah. Ilmo qaba qufaca daran ama taxanaha ah ayaa ku laaban kara xarunta kadib marka xanuunku ka yaraado 24 saac kahor ama marka uu caddeyn qoraal ah kasoo qaato dhakhtar ruqsad leh.

(E) Midabka aan caadiga ahayn ee jaallaha ah oo ku dhaco maqaarka ama indhaha. Ilmaha qaba midabka jaalaha ah ee aan caadiga ahayn ee maqaarka ama indhaha ayaa ku laaban kara daryeelka marka uu cadeyn qoraal ah kasoo qaato dhakhtar ruqsad leh.

(F) Nabarada ama dhaawacyada furan ee dheecaanku ka socdo. Ilmo ay ku yaalaan nabarada ama dhaawacyada dheecaanka siidaynaaya ayaa ku laaban kara daryeelka kadib marka finanku ka ba'aan, marka nabarada ama dhaawacu qalalo ama si buuxda loogu dabooli karo faashad, ama marka uu cadeyn qoraal ah kasoo qaato dhakhtar ruqsad leh.

(G) Qoor iyo madax xanuunka wata midkood ama ka badan astaamaha kor lagu xusay

(H) Caajis aan la garanayn, feejignaanta oo yaraata, camal xumo xad dhaaf ah, jaho wareer badan, ama isbadelka habdhaqanka kaasoo kahortagaaya ka qaybgalka buuxda ee shaqooyinka dugsiga ee caadiga ah. Ilmo qaba wax kamid ah astaamaha kore ayaa ku laaban kara daryeelka marka xanuunku ka baxo, uu ku laabto sidii caadiga ahayd, ama marka uu cadeyn qoraal ah kasoo qaato dhakhtar ruqsad leh.

(I) Neefta oo dhibta ama jixdheer aan caadi ahayn. Ilmo dhibaato ku qaba neefsiga ama jixdheer aan caadi ahayn ayaa ku laaban kara daryeelka kadib marka astaamuhu ay bogsoodaan 24 saac.

(J) Cabashooyinka xanuunka daran. Ilmo qaba cabashooyinka daraanka daran ayaa ku laaban kara daryeelka kadib marka xanuunku uu ka ba'o.

(K) Baxdinta isha oo daran, ilmaynaysa, ama malax ka buuxdo. Ilmo qaba baxdinta isha oo daran, ilmaynaysa, ama malax gashay ayaa ku laaban kara daryeelka kadib marka uu cadeyn qoraal ah kasoo qaato dhakhtar ruqsad leh.

(2) Haddii ilmo la keenay daryeelka uu muujiyo calaamadaha xanuunka, sida lagu qeexay xeerkaan, adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Ka saaraa ilmaha carruurta kale asagoo gaynaaya meel ilmaha ay ku ilaalin karaan daryeel bixiyaashu si taxadar lehna loo ilaalin karo markasta;

(b) Waa inuu u sheegaa waalidka si ilmaha looga kaxeeyo daryeelka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah; iyo

(c) Ilaa waalidku ka imaanaayo, waa inuu siiyaa ilmaha sariir gaar ah, sijaayad, ama gogol si fudud loo nadiifin karo loogana dili karo jeermiska kadib marka la isticmaalo.

(3) Haddii ilmo, daryeel bixiye ama mutadawac uu qabo xanuun la xadiday, sida lagu qeexay Maamulka Caafimaadka Oregon, Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha Cutubka 333 aad, Qaybta 19 Baaritaanka iyo Xakamaynta iyo Cudurada: Awoodaha Guud iyo Masuuliyadaha, Adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Isla markaba u soo sheegaa dhacdada ama xanuunka waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaanka;

(b) Waa inuu raacaa talooyinka waaxda caafimaadka ee ku aadan eryidda iyo dib u soo celinta carruurta iyo daryeel bixiyaasha; iyo

(c) Soo dhajiyaa ogeysiiska waalidiinta dhammaan carruurta daryeelka ka hesha guriga.

(4) Adeeg Bixiyuhu waa inuu abuuraa qorshaha daryeelka oo qoran wakhtiga diiwaan gelinta, ama marka xasaasiyad la ogaado, ilmo kasta oo diiwaan gashan kaasoo qaba xasaasiyad khatar gelin karta caafimaadka, badqabka iyo faya dhawrka ilmaha. Qorshaha waa in lagu daraa tilmaamo quseeya maadooyinka xasaasiyadda iyo talaabooyinka la qaadaayo si looga fogaado maadooyinka xasaasiyadda; calaamadaha iyo astaamaha xasaasiyada; iyo qorshaha faahfaahsan ee daawayn ayna ku jiraan magacyada, kuurooyinka, iyo qaababka bixinta degdega ah ee daawo kasta si loogu daweeyo xasaasiyad kacday. Waxaa intaas dheer:

(a) Waalidka waa in si degdeg ah loogu wargeliyaa xasaasiyad kasta oo laga shakiyay ama haddii ilmuhu cuno ama taabto wax xasaasiyad ku kicinaaya, xataa haddii aysan xasaasiyad dhicin;

(b) Haddii epinephrine la siiyo, adeegyada caafimaadka ee xaaladaha degdega ah waa in lala xiriiraa isla markaba, kadibna, CCLD waa in la ogeysiiyaa ugu danbayn 5:00pm maalinta shaqada ee xigta.

(c) Dhammaan daryeel bixiyaasha doorka ku leh daryeelka ilmaha waa in lagu tababaraa qorshaha daryeelka ee qoran;

(d) Xasaasiyaadka gaarka ah ee cuntada waa in lala wadaagaa dhammaan daryeel bixiyaasha diyaariya iyo kuwa bixiya cuntada; iyo

(e) Liiska xasaasiyadaha ilmo kasta waa in si fudud ay u arki karaan daryeel bixiyaashu laakiin waa inaysan arkin karin dadka aan ahayn waalidiinta ama masuuliyiinta ilmaha diiwaan gashan.

## 414-360-1020 Dhaawacyada

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu buuxiyaa warbixinta dhaawac kasta ama dhacdo kasta oo daran, uuna ku daraa:

(a) Magaca Buuxa iyo Ilmaha;

(b) Taariikhda ay dhacday, wakhtiga, nooca, xaaladaha, marqaatiyaasha, iyo goobta guriga ama banaanka guriga;

(c) Wakhtiga iyo taariikhda ogeysiiska waalidka;

(d) Saxiixa daryeelaha soo sheegaaya; iyo

(e) Saxiixa waalidka oo sheegaaya inuu akhriyay ama helay nuqulka warbixinta 48 saac gudahood marka dhacdadu dhacday kadib. Iimeyl ama fariin qoraal muujinaaya xaqiijinta helitaanka ayaa loo qaadan karaa saxiixa waalidka.

(2) Adeeg bixiye waa inuu hayaa, ugu yaraan, agabka soo socda ee gurmadka degdega ah oo yaala guriga, gaari kasta oo loo adeegsado qaadista ilmaha daryeelka ku jira, iyo nashaadaadka kooxda oo ka baxsan guriga;

(a) Faashadaha aan daawada la marin (xajmiyo kala duwan);

(b) Duubka koolada;

(c) Suufka faashadaha dawaysan (xajmiyada kala duwan);

(d) Sharooto wayn, ama faashad wayn oo sadex gees ah;

(e) Biyaha dhalooyinka ku jira (si loogu sifeeyo dhaawacyada ama indhaha);

(f) Shaanbada farxalka ama jeelka farxalka;

(g) Tiishka kahortaga jeermiska ee sajalka ah ama dareeraha loo adeegsanaayo nadiifinta aaga dhaawaca;

(h) Maqaska;

(i) Biraha tolmada;

(j) Gacmo-gashiyada la tuuri karo, ee aan lahayn latex, aana lahayn budada;

(k) Bacaha caaga ah (si loogu rido dhiiga iyo dheecaanka kale ee jidhka);

(l) Aalada heerkulka sheegta oo aan lahayn meerkuri iyo dhalo;

(m) Xirmooyin qaboow;

(n) Koloriinta ama maadooyinka kale ee jeermiska dila si loogu nadiifiyo dhiiga iyo dheecaannada kale ee jirka;

(o) Faashada dabacsan ee duubka; iyo

(p) Jaantuska ama buug tusmeedka tilmaamaha gurmadka degdega ah.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in agabka gurmadka degdega ah ay ayagoo diyaarsan helayaan daryeel bixiyaashu iyo in lagu hayo meel aysan ilmuhu geli karin.

(4) Adeeg bixiyuhu waa inuu ku hayaa agabka gurmadka degdega ah meel nadiif ah oo saafi ah uuna badelaa marka loo baahdo, ayna ku jiraan agabka dhaca.

## 414-360-1030 Daawooyinka

(1) Kahor inta aan adeeg bixiyuhu siin ilmo daawo loo qoray ama daawo aan loo qorin, ayna ku jirto, laakiin kuma koobna, xanuun baabi'iyaasha, sharoobada qufaca, iyo goojada sanka, adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Haystaa ogolaanshaha saxiixan, taariikhaysan, ee qoraalka ah ee waalidka oo diiwaanka ugu jira (sidoo kale eeg OAR 414-360-0230, Oggolaanshiyaasha Waalidka);

(A) Xanuunnada dabo dheeraada, daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada ayaa ogolaansho u heli kara muddo 12 bilood ama ka yar asagoo raacaaya tilmaamo gaar ah oo ay ku jiraan marka daawada uu siinaayo, sida daawada xanuunka neefta.

(B) Oggolaanshaha waalidka oo lagu helo khadka taleefoonka ayaa loo ogolaan karaa hal kuuro oo ah daawada uusan dhakhtarku qorin. Taariikhda iyo wakhtiga oggolaanshaha waa in la qoraa uuna saxiixaa waalid marka uu soo qaadaayo ilmaha.

(b) Xaqiiji in qasaca orjinaalka ah lagu calaamadiyaa magaca daawada, kuurada, iyo tilmaamaha siinta iyo kaydinta.

(A) Daawada dhakhtarku qoray, qoraalka ku dul qoran waa in lagu daraa magaca ilmaha, taariikhda daawada la buuxiyay, magaca dhakhtarka u qoray, iyo mudada wakhtiga la siinaayo daawada.

(B) Haddii tilmaamaha waalidku ka duwan yihiin kuwa ku qoran qasaca, daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta waa inuu haystaa tilmaamaha qoran ee dhakhtar ruqsad leh oo la xiriira daawadaas.

(C) Daawada waa in aan la qaadan kadib taariikhda ay dhacayso.

(D) Daawo kasta oo uu keeno waalidku waa in lagu qoraa magaca ilmaha.

(c) Waa inuu xaqiijiyaa in aaladaha cabirka daawada oo la dhaqay lana sifeeyay la adeegsado marka daawada la siinaayo ilmaha ku jira daryeelka carruurta, haddii ay qusayso.

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuu si degdeg ah u qoraa daawo kasta oo ilmaha la siiyay, uu qoraa magaca ilmaha, nooca daawada, taariikhda, wakhtiga, iyo kuurada la siiyay, cilado kasta oo lagu arkay ilmaha, iyo saxiixa qofka daawada siinaaya.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuu u sheegaa waalidka maalin kasta dhammaan daawooyinka la siiyay ilmihiisa.

(4) Haddii daawada uu keenay waalidku, daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta waa inuu daawada siiyaa keliya ilmaha loogu talagalay, uuna raacaa tilmaamaha ku dul qoran daawada.

(5) Dhakhtar waa inuu xaqiijiyaa in daawada lagu hayo mid kamid ah qaababka soo socda:

(a) Hoosta aalada badqabka ilmaha ama qufulka badqabka ilmaha; ama

(b) Qol xiran.

(c) Daawada xaalada degdega ah ayaa la helin karaa qaanad xiran oo aysan gaarin ilmuhu inta ay guriga ku jiraan.

(6) Daawada xaalada degdega ah ayaysan gaari karin carruurtu sida lagu qeexay OAR 414-360-0100(21) ama waa in uu hayaa daryeel bixiye.

(7) Marin kareenka qoraxda iyo kareenka xafaayada ayaan u baahnayn in la qoro, laakiin adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Haystaa oggolaanshaha qoran ee waalidka sanad kasta;

(b) Waa inuu adeegsadaa marka loo baahdo si waafaqsan tilmaamaha shirkada samaysay;

(c) Waa inuu u sheegaa waalidiinta nooca kareenka qoraxda ee la adeegsaday haddii uu baxshay daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada;

(d) Waa inuu ku calaamadiyaa agabka magaca ilmaha haddii uu keenay waalidku, uuna keliya u adeegsadaa ilmahaas; iyo

(e) Waa inuu u ogolaadaa carruurta inay kareenka qoraxda ayagu marsadaan ayadoo uu kormeer toos ah ku samaynaayo daryeeluhu uuna haysto oggolaanshaha waalidka ee qoran.

## 414-360-1050 Daryeelka Carruurta Qaba Baahiyaha Gaarka ah

Marka uu daryeelaayo ilmo kaasoo qaba ama khatar dheeri ah ugu jira xanuunka dabo dheeraada ee jirka, kobaca, habdhaqanka, ama shucuurta una baahan adeegyada caafimaadka iyo adeegyada la xiriira ee nooc ama cadad ka badan kan ilmaha caadiga ah u baahan yihiin, adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa qorshe qoran. Qorshaha daryeelka ee qoran waa in lagu daraa waxyaabaha soo socda, marka ay khusayso:

(1) Liiska xanuunka/xanuunnada ilmuhu qabo;

(2) Xogta xiriirta dhakhtarka guud iyo takhasusle kasta oo kale oo quseeya (tusaale ahaan, dhakhaatiirta hoormoonada, dhakhaatiirta kansarka, iwm.);

(3) Daawooyinka la siinaayo qaabka jadwalaysan;

(4) Daawooyinka la siinaayo marka ay xaalad degdeg ah jirto oo wata cabirada, calaamadaha, iyo astaamaha qeexan ee keenaaya in daawada kuwaasoo ku qoran luuqad si fudud loo fahmaayo;

(5) Habraacyada la fulinaayo iyo qofka masuulka ka noqonaaya tababarka daryeel bixiyaasha;

(6) Xasaasiyaadka;

(7) Isbadelada cuntada ee loogu baahan yahay caafimaadka ilmaha;

(8) Wax ka badelka hawsha;

(9) Wax ka badelka bii'ada;

(10) Tilmaamaha muujinaaya ama tusaalaha ka bixinaaya xasaasiyada ama taxaneyaasha xasaasiyadaha (waxyaabaha kicinaaya) ee la iska ilaalinaayo;

(11) Astaamaha ay tahay in daryeel bixiyaashu ay isha ku hayaan;

(12) Wax ka badelka habdhaqanka;

(13) Qorsheyaasha gurmadka xaalada degdega ah, labadaba haddii ilmuhu uu qabo xaalad caafimaad oo degdeg ah, iyo arimaha gaarka ah ee la tixgelinaayo marka y jirto xaalad degdeg ah oo barnaamij, sida dabka;

(14) Tababarka iyo waxbarashada xirfado kasta oo muhiim ah oo la siinaayo daryeel bixiyaasha iyo qofka masuulka ka ah tababarka daryeel bixiyaasha; iyo

(15) Adeegyo kasta oo gaar ah (tusaale ahaan, baxnaaninta shaqada, adeegyada hadalka) kuwaasoo lagu bixin doono. Haddii adeegga gaarka ah uu ka doonaayo ilmaha inuusan ku jirin kormeerka tooska ah ee daryeel bixiyaasha, oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay.

## 414-360-1100 Cuntada iyo Adeegga Cuntada

(1) Adeeg bixiye waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan cuntada iyo cabitaanka la doorto, lagu kaydiyo, lagu diyaarsho, laguna bixiyo hanaan nadaafad sare leh.

(2) Carruurtu waa in aysan gelin jikada ama aaga cuntada lagu diyaarsho marka cuntooyinka la diyaarinaayo ilaa in daryeeluhu la joogo maahee iyo waa in carruurta laga difaacaa khataraha sida cuntooyinka kulul, maacuunta afaysan, iwm.

(3) Adeeg bixiye waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan qalabka iyo maacuunta loo adeegsado adeegga cuntada, sida marfashyada, qaanadaha, miisaska, talaagadaha, siimanka, looxda miirista, looxda wax lagu jaro:

(a) Ay ahaadaan kuwo nadiif ah oo wasaq ka caagan; iyo

(b) Ay ahaadaan si fiican u dayactiran.

(4) Nadiifinta iyo dhaqista agabka miiska iyo agabka cuntada lagu xiro waa in lagu sameeyaa:

(a) Mashiinka weelasha dhaqa kaas oo lagu maamulo si waafaqsan tilmaamaha warshada samaysay; ama

(b) Hanaanka caadiga ah ee sadexda tilaabo ah sida soo socota:

(A) Ku dhaqista marka koobaad saabuun iyo biyo;

(B) Biyo raacinta marka labaad adoo adeegsanaaya biyo nadiif ah; iyo

(C) Sifeynta marka sadexaad taasoo ku filan sifeyn qalabka ugu wayn iyo maacuunta. Ku quus dhammaan agabka miisaska iyo jikada ilaa inta loo baahan yahay adoo raacaaya tilmaamaha warshada samaysay.

(5) Adeeg bixiye waa inuu baxshaa aaladaha heerkulka ee saxda ah oo loo sameeyay inay cabiraan heerkulka qabowga ee talaagadaha iyo aaladaha barafka dhaliya. Aaladahaan heerkulka waa in si cad loogu jeedaa si fududna loo akhrin karaan. Talaagadaha waa in lagu hayaa heerkul dhan 41°F ama ka hooseeya, halka aaladaha barafka dhaliya ay qasab tahay in lagu hayo heerkulka 0°F ama ka hoos.

(6) Agabka adeegga halka mar sida saxuunta warqadda ah, koobabka iyo bocorka, iyo maacuunta caaga ah ayaa la adeegsan karaa keliya halmar waana in la tuuraa kadib marka la isticmaalo.

(7) Adeegga cuntada ee adeeg bixiyaha waa in lagu daraa waxyaabaha soo socda:

(a) Carruurta ku jira daryeelka wax ka badan 3 ½ saacadood oo xiriir ah waa in la siiyaa cunto ama cunto fudud 3 ½ saac kasta.

(b) Barruurta yimaada kadib dugsiga ayaa la siiyaa cunto fudud;

(c) Carruurta loo mudeeyay inay soo xaadiraan kahor 7:00 am ama kadib 6:30 pm waa in la siiyaa quraac ama casho; iyo

(d) Haddii ay qusayso, carruurta daryeelka habaynkii waa in la siiyaa cuntooyin iyo cunto fudud si waafaqsan xeerka OAR 414-360-1500, Daryeelka Habbeenkii).

(8) Adeeg bixiyuhu waa inuu bixiyaa aaga cuntada oo taageeraaya cuntada badqabka iyo nadaafada leh oo sahlaaya in bulshadu ku kulanto.

(9) Haddii adeeg bixiye uu bixiyo cuntooyinka qaabka qoyska, markaas oo cuntada la keeno miis ayadoo badan laguna cuno saxuun saaran miiska, daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta waa inuu leeyahay qorshaha qoran, oo ay ogolaatay CCLD uuna dib u eegi karo khabiirka caafimaadka deegaanka, kaasoo ay ku qoran yihiin ugu yaraan waxyaabaha soo socda:

(a) Qaybaha cuntada kala soocan ee miis kasta;

(b) Maacuunta cuntada lagu cuno waa inay ka duwan tahay maacuunta cuntada lagu guro;

(c) Daryeel bixiye waa inuu kormeeraayo si loo xaqiijiyo farsamooyinka nadaafada; iyo

(d) Hanaanka cunto siinta ilmaha xoogaa xanuunsan si looga hortago in xanuunku faafo.

(10) Adeeg bixiyuhu wuu siin karaa ilmaha cunto uu keenay waalidka ilmuhu marka:

(a) Cuntada la keeno maalin kasta ayna bisishahay, aysana u baahnayn wax diyaarin ah;

(b) Dhammaan qasacyada cuntooyinka iyo cabitaannada waa in lagu qoraa magaca ilmaha;

(c) Cuntada ilmo kasta waa in ay maalin kasta kormeeraan xubin kamid ah shaqaalaha si loo xaqiijiyo in cuntadu buuxiso shuruudaha nafaqada sida lagu cadeeyay OAR 414-360-1100(12); iyo

(d) Adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa cunto ku filan si loo kabo cunto kasta ama cunto fudud oo aan buuxin shuruudaha nafaqada sida lagu caddeeyay xeerka OAR 414-360-1100(12).

(11) Cuntooyinka iyo cuntada fudud ee carruurta waa in:

(a) Lagu diyaarshaa goobta;

(b) Waa in laga soo qaataa meel la ogol yahay sida ku cad OAR 333-150-0000; ama

(c) Uu bixiyay waalidku.

(12) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan cuntooyinka, cuntada fudud, iyo cabitaannadu raacaan shuruudaha qaabka cuntada ee Barnaamijka Daryeelka Cuntada Carruurta iyo Waayeelka ee USDA (USDA-CACFP), ayna ku jiraan qaybaha xirxiran.

(13) Adeeg bixiye waa inuu abuuro dookhyada qoran ee asbuuclaha ama bilaha ah oo muujinaaya dhammaan cuntooyinka la bixinaayo inta lagu jiro mudadaas uuna dookhyada cuntooyinka tuso waalidiinta.

(a) Dookhyada badelka ah oo buuxinaaya shuruudaha nafaqada ayaa la ogol yahay laakiin waa in la qoraa ayna arki karaan waalidiintu.

(b) Dookhyada cuntada ayaa la badeli karaa haddii uu jiro diiwaan loo adeegsado dookhyada maalin kasta.

(14) Adeeg bixiye waa inuu doortaa uuna bixiyaa cunto badqab leh lehna qiimaha nafaqada.

(a) Cuntooyinka leh nafaqada ugu yar, sida gelatin ama cuntooyinka macmacaanka ah, ayaa keliya la siin karaa marar dhif ah mana badeli karaan cuntooyinka nafaqada ah.

(b) Adeeg bixiyuhu waa in uu siiyaa cabitaanno ay ku jirana keliya biyo, caano, ama nafaqo u dhiganta oo badel u ah caanaha, iyo casiirka miraha iyo khudaarta.

(A) Casiirka miraha iyo khudaarta waa in uu noqdaa cabitaan 100 boqol seeko ah.

(B) Caanuhu waa inay yihiin caanaha la sifeeyay ee la miiray ee Heerka A.

(C) Caano booraha sifeysan iyo caanaha la karkariyay waa in keliya loo adeegsadaa cunto karinta.

(D) Waalid ayaa codsan kara in ilmihiisa aan la siin caano. Adeeg bixiye waa inuu helaa oggolaanshaha qoran ee waalidka si uusan caano u siin ilmo gaar ah. Tan waa in ay ku timaadaa codsiga waalidka, ayadoo ku xiran marxalada markaas, waana inaysan noqon siyaasadda guud ee barnaamijka.

(c) Adeeg bixiyuhu waa inuusan siin cuntooyinka keeni kara saxashada ilmaha yaryar ilmaha kayar 3 sano ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna: jeexyada hot dog-ga;, kaaroodka ceeriin, miraha cinabka ee aan la jarjarin, nacnaca adag, xanjada, miraha qalalan, lawska, qaloonka, doolshaha bariiska, jibsiga, nacnaca jeelka, iyo marshmallow-yada. Carruurta ka wayn 3 sano jir ayaa la siin karaa cuntooyinkaan marka la xaqiijiyo in cuntooyinka loo jarjaray qaab yareynaaya khatarta saxashada.

(d) Qaybaha nafaqada iyo kaalmaatiga (budooyinka barootiinka, barootiinnada dareeraha ah, feetamiinnada, macaadinta, iyo maadooyinka kale ee aan cuntada ahayn) waa in aan la siin ilmaha ayadoo aan bayaan qoraal ah ee ogolaanshaha waalidka iyo tilmaamaha qoran ee dhakhtarka la haysan.

(e) Cuntooyinka gaarka ah, oo aysan ku jirin cuntooyinka dadka khudaarta bas cuna, ayaa keliya la siin karaa ilmo marka tilmaamo qoran uu bixiyo dhakhtarka cuntada ee diiwaan gashan ama dhakhtar caafimaad iyo ogolaanshaha waalidka.

(15) Biyaha la cabo waa in ay si bilaasha ku helayaan ilmaha ku jira daryeelka carruurta.

## 414-360-1200 Gaadiidka iyo Safarada Gaaban

(1) Haddii adeeg bixiyuhu gaari ku qaadaayo ilmaha, adeeg bixiyuhu waa inuu ku dhaqmaa dhammaan sharciyada gobalka ee quseeya, ayna ku jiraan caymiska hadda ee gaariga kaasoo daboolaaya darawalka, gaariga, iyo dhammaan dadka gaariga saaran.

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuusan ilmaha ku qaadin gaariyaal ama qaybo kamid ah gaariyaal aan loo samayn in dadka lagu qaado, sida sariiraha taraaga, gaadiidka kaamka, iyo tareeleyaasha.

(3) Marka carruurta loo qaado safar gaaban, adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in:

(a) Daryeel bixiyaashu ay hubiyaan liiska qoran ee carruurta aadaysa safarka gaaban si joogto ah si loo tiriyo si loo ogaado in ilmaha oo dhan joogaan iyo:

(A) Kahor inta aysan gaari fuulin iyo kahor inta aysan ka dagan; iyo

(B) Waqti kasta oo kooxdu ka tagto goob ayna tagto meel kale (tusaale ahaan, inay ka tagaan hal bandhig ayna tagaan bandhiga xiga).

(b) Marka 6 carruur ah ama ka badan loo kaxeeyo safar gaaban:

(A) Ilmo kasta waa in loo xiraa agab si fudud loogu aqoonsan karo, sida summad, shaar ama jijinta gacanta, oo ay ku qoran yihiin magaca iyo lambarka taleefanka daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta; iyo

(B) Daryeel bixiyaasha waa in si fudud loo aqoonsan karo.

(4) Haddii hub iyo rasaas saaran yihiin gaariga, waa in la gashaa meel amaan ah sida ku cad OAR 414-360-0840(11).

(5) Haddii darawalku yahay qofka keliya ee wayn ee gaariga saaran, adeeg bixiye waa inuu xaqiijiyaa in darawalku:

(a) Buuxiyaa shuruudaha aqoonta iyo tababarka kaaliyaha II (sidoo kale arag OAR 414-360-0340(3)); iyo

(b) Uu buuxiyaa shuruudaha dheeraadka ah ee darawalka iyo saamiga ee ku cad OAR 414-360-1200(6) iyo (7).

(6) Adeeg Bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in darawallada gaariga loo adeegsado qaadista carruurta inay:

(a) Jiraan ugu yaraan 18 sano;

(b) Waa in uu haystaa ruqsada darawalka oo shaqeynaysa kuna haboon nooca gaariga uu wado;

(c) Waa in uusan qabin xanuun ama uusan isticmaalin khamri, daroogo, tubaako ama daawo kasta oo carqalad ku noqon karta gaari wadista, kormeerka, ama awoodaha daad gureynta;

(d) Waa inuu u wadaa gaariga si sharci ah oo amaan ah; iyo

(e) Waa in uu meesha ka saaraa waxyaabaha mashquulinaaya sida adeegsiga sameecadaha dhagaha ama taleefanka gacanta.

(7) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in ay jiraan adeeg bixiyaal ku filan si loo daboolo saamiyada qasabka ah ee daryeelaha iyo ilmaha ee carruurta gaadiidka lagu qaadaayo.

(a) Darawalka ayaa sidoo kale lagu dari karaa dirada saamiyada daryeelaha iyo carruurta.

(b) Hal daryeel bixiye waa inuu joogaa ugu yaraan kaaliyaha II ee xirfadda leh (sidoo kale arag OAR 414-360-0340(3)).

(8) Adeeg bixiye ayaa u ogolaan kara waalidka inuu gaari ku qaado ilmo aan ahayn ilmaha waalidka asagoo uusan la socon daryeel bixiye u qalma gaariga, keliya haddii waalidku buuxiyo shuruudaha adeeg bixiyaha badelka ah iyo shuruudaha gaadiidka sida ku cad xeerarkaan, uuna ka diiwaan gashan yahay CBR.

(9) Adeeg Bixiyuhu waa inuusan marna ilmaha keligood uga tagin gudaha ama banaanka gaariga.

(10) Adeeg bixiyuhu waa inay u saaran yihiin waxyaabaha soo socda gaariga ayna sidoo kale yaalaan guriga:

- (a) Taleefan shaqeynaaya;
- (b) Caddeynta caymiska gaariga;
- (c) Xogta caafimaadka ee xaaladaha degdega ah ee ilmo kasta oo ay ku jirto xogta xiriirka waalidka, baahiyaha gaarka ah ee caafimaadka, daawooyinka, xasaasiyadaha, magaca iyo lambarka taleefanka dhakhtarka ilmaha, iyo foomamka oggolaanshaha xaalada degdega ah ee caafimaadka;
- (d) Marka uu gaari ku wado carruurta qaba xanuunnada caafimaadka ee daran (sida xanuunka neefta, sonkoroowga, ama qalalka), qorsheyaashiisa daaweynta daryeelka xaalada degdega ah, agabka iyo daawada; iyo
- (e) Kiishada gurmadka degdeg ah waa in si fudud ay ku heli karaan shaqaaluhu aysana heli karin ilmuhu, oo ay jiraan agabka lagu qeexay OAR 414-360-1020(2), Dhaawacyada).

(11) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in farsamooyinka soo socda ee badqabka lagu dhaqmo:

- (a) Ilbaabada gaariga waa in la xiro marka gaarigu socdo iyo marka aan la isticmaalayn.
- (b) Matoorka waa in la damiyaa, bareega lagu xiraa, lagana saaraa fureyaasha markasta oo darawalku ka baxo gaariga.
- (c) Waa in aan la furin daaqada gaariga, marka laga reebo tan darawalka, wax ka badan 50 boqolkiiba balaceeda marka ilmuhu gaariga saaran yihiin.
- (d) Jirka ilmaha oo dhan waa in uu dhex jiraa gaariga.
- (e) Aagaga badqabka leh ee fuulista iyo ka dagashada gaariga iyo aagga gaariga lagu raro oo ka baxsan wadada waa in la bixiyaa.
  - (A) Ilmaha waa in gaariga lagu saaraa loogana dejiyaa keliya geeska wadada ama aag ka baxsan wadada oo ka difaacan gaariyaasha ku socda isla geeska wadada uu ka saaran yahay dhismaha ay galayaan.
  - (B) Haddii carruurtu ay qasban yihiin inay wadada gooyaan, waa in uu la socdaa qof wayn.

## 414-360-1230 Suumanka Rakaabka iyo Gaariyaasha

(1) Adeeg bixiye waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda ee suumanka rakaabka iyo xeerarka fadhiga si loo xaqiijiyo badqabka ilmaha inta gaariga lagu wado:

(a) Xajmiga ugu badan ee fadhiga ee shirkada sameysay u dejisay ee gaariga waa in aan la dhaafin;

(b) Nidaamyada suumanka rakaabka ilmaha ah iyo suumanka kuraasta waa in la adeegsadaa sida sharcigu sheegaayo, waa inay buuxiyaan xeerarka gaariyaasha matoorka ku shaqeeya ee federaalka waana in loo rakibaa si waafaqsan tilmaamaha shirkada samaysay;

(c) Nidaamyada xakamaynta waa in si sax ah loo dejiyaa, sida in aysan dhicin, dib loo celin, ama aysan horey u gelin shil gaari;

(d) Carruurta ku jira daryeelka carruurta ayaan loo oggolayn inay fuulaan kursiga shirka gaari; iyo

(e) Dhammaan rakaabka dadka waawayn ah ee saaran gaariga carruurta sida, marka laga reebo baska wayn ee dugsiga, waa inay si sax ah u xirtaan suumanka badqabka kahor inta aan gaarigu dhaqaaqin iyo markasta inta gaarigu soconaayo.

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan gaariyaasha loo adeegsado gaadiid ahaan ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

(a) Gaariyaasha, ayna ku jiraan basaska dugsiga, waa in ay u dhaqmaan sharciyada quseeya ee gobalka iyo kuwa maxaliga ah ee gaariyaasha matoorka ku shaqeeya.

(b) Haddii adeeg bixiye adeegsato gaari caasi ah oo loo sameeyay 10 rakaab ah ama ka badan lana sameeyay kahor 2010:

(A) Xawaaraha safarku waa in uusan dhaafin 50 mph; iyo

(B) Gaarigu waa inuu maraa kormeerka sanadlaha ah ee badqabka oo uu sameeyo garaash, shirkad gaariyaasha iibisa ama xarunta dayactirka gaariga. Cadeynta kormeerka waa in la gashaa foomka ay bixisay CCLD ama foomka uu bixiyay kormeeraha oo ay ku qoran tahay isla xogtaas.

(c) Gaariyaashu waa inay leeyihiin taargada ruqsada oo aan dhicin iyo diiwaan gelinta ay amrayaan sharciyada gaadiidka ee gobalka Oregon, ayna ku jiraan gaariyaasha ay wadaan dadka mutadawiciinta ah.

(d) Gaariyaasha waa in lagu hayaa dayactir wanaagsan ayna si badqab leh u shaqeynayaan markasta.

## 414-360-1300 Shaqooyinka Dabaasha iyo Biyaha

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu haystaa ogolaansho qoran oo uu baxshay waalidka ilmo kasta kahor inta uusan ka qaybgelin hawlaha dabaasha.

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuu ku sameeyaa kormeerka joogtada ah ee daawashada iyo dhagaysiga codka carruurta marka ay joogaan goobaha biyaha.

(3) Adeeg bixiyuhu waa inuusan adeegsan barkadda dabaasha ilaa in ay ruqsad ka haysato maahee Maamulka Caafimaadka Oregon ama wakaalad wakiil ka ah sida ku cad OAR Cutubka 333, Qaybta 60. (Sidoo kale eeg OAR 414-360-0840, Kahortaga iyo Maareynta Khataraha la xiriira gelitaanka barkadaha dabaasha iyo goobaha kale ee biyaha weeleeya.)

(4) Ilaha dabiiciga ah ee biyaha, sida baliga godan, harooyinka, wabiyada, iyo tokaga, adeeg bixiyuhu waa in uu xadidaa shaqada heer socod ilmaha jira 36 bilood ama ka wayn waana in uusan u ogolaan inay dabaashaan.

(5) Adeeg bixiye waa inuusan u ogolaan ilmaha inuu adeegsado ama uu galo baafka biyaha kulul, spa, barkadaha dabaasha ee la qaadi karo, ama qalabka kale ee lamidka ah.

(6) Haddii adeeg bixiye uu leeyahay dabaal ka dhisan guriga ama uu masuul ka yahay dabaal ka baxsan guriga, qorshaha xaalada degdega ah ee qoran ee adeeg bixiyaha (oo uu amraayo OAR 414-360-0210, U diyaar Garoowga iyo Gurmadka Xaalad degdeg ah) waa in sidoo kale lagu daraa badqabka barkada iyo dabaasha.

(7) Markasta marka ilmuhu ay ku jiraan shaqooyinka dabaashada iyo ku socoshada biyaha gudaha ama banaanka dhismaha, adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Xaqiijiyaa in daryeel bixiyaasha jooga gudaha ama goobta biyaha ay diyaar u yihiin inay biyaha galaan;

(b) Xaqiiji in daryeel bixiyaashu ay si joogto ah u gacan qabtaan saqiirada markasta aysana u jirin wax ka badan gacan laac ilmaha 1 sano jirada ah;

(c) Waa inay buuxiyaan cabirada soo socda ee tirada daryeelaha iyo ilmaha uu daryeelaayo:

(A) Lix asbuuc ilaa 36 bilood jir - 1:1;

(B) Da'da xanaanada – 1:6;

(C) Da'da dugsiga – 1:10.

(D) Da'da ilmaha ugu yar ee kooxda da'aha isku dhafan ayaa go'aaminaysa cabbirka daryeel bixiyaha iyo ilmaha uu daryeelaayo.

(d) Waa in uu xaqiijiyaa in dhammaan daryeel bixiyaasha lagu tiriyay cabirka isku aadka daryeelaha iyo ilmaha ay awoodaan inay dabaashaan haddii biyuhu ka badan yihiin 48 inji dhumuc ahaan;

(e) Waa in uu xaqiijiyaa in ilaallada biyaha oo shahaado leh uu joogo uuna shaqada ku jiro markasta. Ilaallada biyaha ayaan lagu tirin karin cabbirka isku aadka daryeelaha iyo ilmaha; iyo

(f) Waa inuu la akhriyaa xeerarka badqabka ilmaha markasta oo ay ka qaybgalaan.

(8) Shaqooyinka biyaha oo ay ku jiraan buufiye ama qaybta buufinta ee adegsanaysa biyaha la qaado ee aan ahayn biyo qulqulaaya ama lasoo qaaday ayuu samayn karaa adeeg bixiyuhu.

## 414-360-1400 Xayawaannada

(1) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in xayawaan kasta oo u geli kara carruurta ku jirta daryeelka carruurta uu:

(a) Caafimaad wanaagsan qabo uusana lahayn wax astaamaha cudur uu qabo ah;

(b) Uu rabaayad u yahay ilmaha uusana lahayn astaamaha ama taariikhda hore ee dagaalka;

(c) Uusan lahayn cayayaan, shilin, ama jeermis;

(d) Si buuxda loo talaalay sida ku cad talooyinka dhakhtarka xoolaha ee ruqsadda haysta, ayna ku jiraan talaallada xanuunka raabiyada ee eeyaasha. Caddeynta ku dhaqanka hadda ee shuruudaha talaallada waa in lagu hayaa galka yaala guriga; iyo

(e) Waa in lagu hayaa qolad ama xeelada marka laga reebo biisadaha iyo eeyyaasha.

(2) Dhammaan xayawaanada waa in laga fogeeyaa meelaha lagu diyaarsho cuntada. Haddii xayawaannadu heli karaan goobaha lagu diyaarsho cuntada, dusha goobaha waa in la nadiifiyaa lana sifeeyaa kahor inta aan cuntada lagu diyaarin.

(3) Adeeg bixiyuhu waa in uusan ogolaan in xayawaan soo maray taariikhda qaniinkida dadka uu joogo aagaga shaqada ee daryeelka carruurta inta lagu jiro saacadaha shaqada ama inta carruurta ku jira daryeelka carruurta ay joogaan.

(4) Adeeg bixiyuhu waa inuu qaadaa taxadaro marka uu waajaho xayawaanno kasta oo aysan aqoon daryeel bixiyaashu, sida bisadaduurka.

(5) Adeeg bixiyaha ayaa u ogolaan kara xayawaan, aan ahayn biisad ama eey, sida xayawaanka sunta ah, qalajista, raha, daanyeerka, shibirta qalcadda, doorada, qoolayda, karaabka, jiirka ama ferret inay joogaan dhismeyaasha keliya haddii:

(a) Xayawaanku uu joogo uuna ku nagaado qolad, xero ama qaab kale oo diidaaya inuu taabto ilmaha; ama

(b) Xayawaanku uu joogo asagoo qayb ka ah barnaamij waxbarasho oo ay maamulayso xerada xayawaanada, madxaf ama maamulaha kale ee xirfadda leh ee xayawaanka.

(6) Adeeg bixiyuhu waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan istaabashada u dhexaysa xayawaan iyo ilmaha uu kormeero daryeel bixiyaasha kuwaasoo u dhow heer ku filan inuu ilmaha meesha ka qaado isla markaba haddii xayawaanku muujiyo astaamaha dagaalka ama xanaaqa ama ilmuhu muujiyo astaamaha in uu si xun ula dhaqmaayo xayawaanka.

(7) Waalidiinta waa in loo sheegaa joogitaanka xayawaanada gudaha dhismaha.

(8) Adeeg bixiye waa inuu haystaa uuna raacaa habraacyada qoran ee daryeelka iyo ilaalinta xaywaannada.

(9) Agabka qashinka xayawaanka sida bokisyada saxarada iyo suufka tababarka xayawaanka rabaayada ah waa in aan la dhigin aagaga ay geli karaan ilmaha ama aagaga loo adeegsado in la gasho ama lagu diyaarsho cuntada.

## 414-360-1500 Daryeelka Habbeenkii

(1) Adeeg bixiye ayaa lagu dabaqayaa xeerarkaan marka uu daryeelka habaynkii bixinaayo sida lagu qeexay xeerka OAR 414-360-0100(27).

(2) Adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Soo jeedaa marka uu imaanaayo ama uu baxaayo ilmo kasta oo ku jira daryeelka habbeenkii; iyo

(b) Waa inuu joogaa isla dabaqa ay joogaan ilmaha ku jira daryeelka carruurta ee hurda.

(3) Dhammaan shaqsiyaadka jira 18 sano iyo ka wayn, ayna ku jiraan dadka martida ah ee guriga jooga inta lagu jiro saacadaha daryeelka habbeenkii, waa inay ku dhaqmaan OAR 414-360-0310, Diiwaan gelinta Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda.

(4) Daryeelka habbeenkii waa in aan lagu bixin dabaqa labaad ama meel ka saraysa.

(5) Inta lagu jiro daryeelka habbeenkii, adeeg bixiye waa inuu haystaa qaab uu nalal ugu xiraayo wadooyinka daad gureynta.

(6) Caawimaadaha soo socda waa in la siiyaa carruurta huruda:

(a) Ilmo kasta oo ku qaata inta badan saacadaha ay hurtaan habaynkii daryeelka habaynkii waa in ay leeyihiin sariir gaar ah iyo joodari, ama qaab kale oo hurdo oo siinaaya taageero ku filan jirka ilmaha iyo xajmiga ku habboon da'da ilmaha. Joodarigu waa inuu saaran yahay go' aysan biyuhu ka dusi karin.

(b) Ilmo kasta oo aan inta badan saacadihiisa hurdada ku qaadan daryeelka habaynkii waa in uu leeyahay sariirta ilmaha oo gaar ah, sariir la qaadi karo, aaga ciyaarta, sariir yar, sijaayad, ama sariir leh gogol sida lagu qeexay OAR 414-360-0620, Alaabta Guriga iyo Qalabka Ilmaha Saqiirada iyo Socod Baradka ah iyo OAR 414-360-0900, Alaabta Guriga, Qalabka, iyo Agabka Ciyaarta.

(c) Qaybta kore ee sariiraha isa saarka ah waa in loo adeegsadaa keliya carruurta jira 10 sano ama ka wayn marka rakada sariirta iyo jaranjarada badqabka ay shaqeynayaan.

(d) Marka laga soo tago ilmaha saqiirada ah, carruurta waa in la siiyaa go'yaal, barkimo, harqadaha barkinta, iyo busteyaal.

(e) Xaashiyadda, harqadaha barkinta, iyo busteyaasha waa in la dhaqaa ugu yaraan asbuuc kasta, marka ay wasaqoobaan, iyo ka hor inta uusan isticmaalin ilmo kale.

(7) Marka qubays la sameeyo:

(a) Waa inuu jiraa ugu yaraan hal baaf ama shaawar ay heli karaan carruurtu.

(A) Baafka qubayska ama shaawarka waa inuu yahay qalab ku habboon si looga hortago inay sibqadaan.

(B) Albaabada shaawarka ee dhallada ah ama baafka dhalada ah waa in lagu dhisaa dhallo amaan ah.

(b) Waa inay jiraan dharka qubayska iyo shukumaannada ilmo kasta.

(c) Sirta waa in loo dhawraa ilmaha da'da dugsiga marka ay qubaysanayaan iyo marka ay dharka iska badelayaan.

(d) Carruurtu waa in aysan la qubaysan ilmaha kale ilaa in waalidku oggolaansho qoraal ah siiyo maahee ilmaha walaalaha ah si ay iskula qubaystaan.

(8) Ilmo kasta waa inuu helaa fursad uu ku cadayo ilkihiisa asagoo la siinaayo cadey iyo daawada cadeyga oo u gaar ah taasoo lagu qoray magaciisa.

(9) Adeeg bixiye waa inuu buuxiyaa baahiyaha nafaqada ee carruurta ku jira daryeelka fiidkii iyo daryeelka habbeenkii sida lagu cadeeyay OAR 414-360-1100, Cuntada iyo Adeegga Cuntada.

(a) Casho waa in la siiyaa carruurta ku jira daryeelka habaynkii haddii ilmo uu joogo guriga daryeelka carruurta kadib waktigiisa casharada uusana soo cashayn kahor inta uusan soo gelin daryeelka habaynkii.

(b) Cuntada nafaqada leh waa in la siiyaa dhammaan carruurta kadib adeegga cashada iyo kahor xiliga hurdada.

(c) Ilmo kasta oo jooga waqtiga quraacda la mudeeyay waa in la siiyaa quraac, ilaa in waalidku si kale codsado maahee.

## 414-360-1610 Xanibaadaha-Hakinnada, Diidmada, iyo Ka Noqoshada Oggolaanshaha

(1) CCLD ayaa si degdeg ah, iyo ayadoo aan ogeysiis bixin, joojin karta shahaadada adeeg bixiyaha marka, sida ay u aragto CCLD, ficilka noocaas ah uu muhiim u yahay ka difaacida ilmaha xadgudubka jireed ama dhimirka ama khatarta wayn ee ku dhacaysa caafimaadka, badqabka iyo faya-qabka. Ficilka noocaas ah ayaa la qaadi karaa kahor inta aan baaritaan la sameyn.

(2) Haddii shahaadada adeeg bixiye la hakiyo, adeeg bixiyuhu waa inuu:

(a) Si degdeg ah ugu sheegaa, hadal ahaan ama qoraal ahaan, dhammaan waalidiinta in ruqsaddii laga xanibay;

(b) Waa inuu isla markiiba u keenaa CCLD dhammaan magacyada, lambarada taleefoonka ee shaqada iyo guriga iyo ciwaanka waalidka ama masuulka sharciga ah ee ilmo kasta; iyo

(c) Waa inuu ku soo dhajiyaa hakinta albaabka wayn ee guriga oo ay arki karaan waalidiinta iyo dadka kale mudada hakintu socoto.

(3) Haddii ay muhiim u tahay difaaca ilmaha, CCLD ayaa bixin karta ogeysiiska dadwaynaha ee diidmada, hakinta iyo la laabashada ruqsadda. Nooca ogeysiiska ayaa ku xirnaan doona xaaladaha shaqsiga ah.

(4) Haddii adeeg bixiye uusan codsan dhagaysi aana la sixin xaaladaha keenay hakinta, shahaadada adeeg bixiyaha ayaa lala noqon doonaa.

(5) Shahaadada ayaa la diidi karaa ama lala noqon karaa haddii guriga daryeelka carruurta ee shahaadada leh:

(a) Uu ku fashilmo buuxinta shuruudaha ama uu saxo ciladaha;

(b) Uu ku fashilmo inuu saxo xaaladaha keenay hakinta;

(c) Uu ku fashilmo inuu siiyo CCLD xogta la codsaday;

(d) Uu diido inuu ogolaado kormeerka ama uu ogolaado kormeer keliya kadib markii ay CCLD soo qaadatay damaanad maxkamadeed;

(e) Loo maamulo ama looga shaqeeyo qaab khatar ku ah caafimaadka, badqabka iyo faya qabka carruurta ku jira daryeelka;

(f) Wuu shaqaalaysiiyo daryeel bixiyaal ama ay u joogaan dad guriga dagan oo aan ka diiwaan gashanayn CBR ama diiwaan gelintooda CBR la xanibay;

(g) Uu maamulo adeeg bixiye kaasoo hadda ka xayiray ama laga saaray ama haddii kale aanba laga diiwaan gelin CBR;

(h) Uu leeyahay mulkiyadda qof diiday ama hakiyay diiwaan gelinta CBR ilaa in adeeg bixiyuhu cadeeyo maahee in mulkiiluhu uusan imaan doonin dhismeyaasha inta ilmuhu ku jiraan daryeelka ama uusan u tagi karin ilmaha ku jira daryeelka carruurta;

(i) Uu si kas ah xog been ah u siiso CCLD ama uu sababo in shaqaaluhu sidaas yeelaan;

(j) La marsiin karo diidmo ama kala noqoshada ruqsadda sabab lagu cadeeyay OAR 414-075-0010(17)(b)(A)-(F) iyo 414-075-0130(8)(a) and (c); ama

(k) Uu carqalad ku noqdo shaacinta daacadda ah ee xogta ee ay sameeyaan shaqaalaha ama mutadawac taasoo la xiriirta xadgudubka ama si xun ula dhaqmidda ilmo ku jira daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh jebinta shuruudaha diiwaan gelinta, fal danbiyeed ka dhacay guriga, ku xadgudubka sharciga gobalka ama federaalka ama fal kasta oo kale oo khatar gelinaaya caafimaadka iyo badqabka carruurta daryeelka carruurta ku jira, ama haddii kale abuuraya fal lagu mamnuucay sharciga ORS 329A.348.

(6) Haddii shahaadada adeeg bixiyaha la diiday ama lala noqday, adeeg bixiyuhu waa inuu si degdeg ah ugu sheegaa dhammaan waalidiinta shaacinta uuna ku soo dhajiyaa ogeysiiska shaacinta meel ay arki karaan waalidiinta iyo dadka kale. Ogeysiisku waa inuu meesha ku dhaganaado ugu yaraan 2 asbuuc.

(7) Adeeg bixiye ayaa racfaan ka qaadan kara go'aan kasta oo hakinaaya, diidaaya ama kala laabanaaya shahaadada, kaasoo waafaqsan xeerarka cutubka 183, Xeerarka Cusub ee Oregon.

(8) CCLD ayaa u sheegi karta talaabo kasta oo lagu diiday, lagu hakiyay, ama lagula noqday shahaadada adeeg bixiye Waaxda Adeegyada Aadanaha, Barnaamijyada Cuntada Daryeelka Carruurta ee USDA, ama Nidaamka Khayraadka iyo Gudbinta Daryeelka Carruurta.

(9) Haddii shahaadada adeeg bixiye la diiday ama lala noqday sabab awgeed, adeeg bixiyaha ayaan u qalmin inuu dib u codsado shahaadada daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta muddo 5 sano ah kadib taariikhda amarka kama danbaysta ah ee CCLD ee diidmada ama la laabashada shahaadadu soo baxay.

(10) Haddii qof, kaasoo ka diiwaan gashan CBR, lagu xukumay, la xiray, ama lasoo saaray damaanadda danbiyada kuwaasoo ay CCLD go'aamisay inay muujinayaan habdhaqan kaasoo saamayn xun ku yeelanaaya ilmo, kaasoo aan wali salkiisa la gaarin, diiwaan gelinta qofkaas ee mulkiyadda ama maamulida daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh ayaa la diidi karaa ama la xayiri karaa ama lala noqon karaa ilaa inta dacwada, xariga, ama damaanada xal laga gaaraayo haddii qofku sii wado inuu lahaado, maamulo, ka shaqeeyo ama daganaado guriga daryeelka carruurta, ama uu la kulmi karo ilmaha guriga jooga.

(11) Shahaadada adeeg bixiye ayaa la diidi karaa, la xayiri karaa ama lala noqon karaa haddii qof uu leeyahay taariikhda xadgudubka ama dayacaada ama uu jiro kiiska furan ee adeegyada difaaca ilmaha, xadgudubka ilmaha ama dayaca ilmaha, ama kiiska booliiska oo ka dhigaaya qofka mid aan u qalmin in laga diiwaan gasho CBR.

## 414-360-1620 Ganaaxa Lacageed

(1) CCLD ayaa qiimeyn karta ganaax lacageed oo dhan ilaa $1200 xadgudub kasta oo ka dhan ah xeerarkaan ama shuruudahaan shahaadada.

(2) CCLD ayaa qiimeyn karta ganaax lacageed oo dheeraad ku ah talaabo kasta oo kale oo sharci oo haboon, ayadoo tixgelinaysa:

(a) Tirada xadgudubyadii hore ee isla xeerka lagula kacay;

(b) Xaaladaha ku xeeran xadgudubyada xeerka; iyo

(c) Digniinaha hore, caawimaadda farsamo, ama tallaabooyinka sharci ee khuseeya ku dhaqanka xeerka ee daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta.

(3) Xadgudubka daran, sida lagu qeexay OAR 414-360-0100(42), adeeg bixiyaha ayaa lagu ganaaxi karaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn $1200 xadgudub kasta.

(4) Xadgudubka aan ahayn mid-daran, adeeg bixiyaha ayaa lagu xukumi karaa ganaax lacageed oo dhan ilaa $400 xadgudub kasta.

(5) CCLD ayaa qiimeyn karta oo ganaac aar ah oo lacageed oo la saaraayo maalin kasta kaasoo CCLD ay heshay natiijada saxda ah ee sheegaysa in daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada haysta uu jebiyay qodobada ORS 329A.250 ilaa ORS 329A.450, xeerarkaan, ama shuruudaha iyo xeerarka shahaadada. CCLD ayaa qiimeyn karta ganaaxyo lacageed oo soconaaya maalmo badan oo la xiriira hal fal.

(6) Qof ama wakaalad bixisa daryeelka carruurta oo la marsiinaayo shuruudaha diiwaan gelinta ama shahaadada daryeelka guriga ama xarunta lagu bixiyo taasoo aan ka diiwaan gashanayn ama shahaado ka haysan CCLD ayaa la saari karaa ganaaxa lacageed oo aan ka badnayn $1,500 maalin kasta oo ay ku shaqeynayeen xarun aan shahaado ama diiwaan gelin haysan.

(7) Marka laga soo tago go'aanka CCLD ee ku soo rogista ganaax lacag sabab la xiriirta midkood ama ka badan xadgudubyada xeerka, CCLD ayaa sidoo kale qaadi kara talaabo lagu diidaayo, lagu hakinaayo ama lagula noqonaayo shahaadada isla xeerka ama xadgudubyada.

(8) Adeeg bixiye ayaa racfaan ka qaadan kara go'aan kasta oo ganaax lacageed lagu saaraayo, kaasoo waafaqsan xeerarka cutubka 183 aad, Xeerarka Cusub ee Oregon.

(9) Ku fashilmidda bixinta lacagta ganaaxa lacageed ee CCLD ay ku soo saartay amarka kama danabysta ah si otomaatig ah ama amarka kama danbaysta ah kadib markii kiis dhagaysi la furay ayaa loo cuskan karaa diidmada ama la laabashada shahaadada adeeg bixiye.

Oregon Department of
Early Learning
and Care

# Xeerarka Guud ee Dhammaan

# Xarumaha Daryeelka Carruurta

Waaxda Ruqsada Daryeelka Carruurta
**Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka (DELC) ee Oregon**
Xeerarka Guud ee Dhammaan Xarumaha Daryeelka Carruurta oo dhaqan galay Diseembar 7, 2023

Xeerkaan ayaa qabanaaya dhammaan xarumaha daryeelka carruurta ayna ku jiraan xarumaha shahaadada leh, guryaha daryeelka carruurta ee qoyska, adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta ee shardi dhaafka haysta, barnaamijyada kabista ah ee sharciyaysan, iyo dadka samaynaayay daryeelka sharci darada ah. Xeerkaan waxay daboolayaa hanaannada iyo siyaasada lagu maamulaaya sida CCLD/DELC u maamulayso arimaha sharciga sida baaritaannada, daryeelka sharci darada ah, daryeelka shardi dhaafka leh ee la aqbali karo, marka daryeel bixiye uu matali karo midawgiisu marka la furo kiis dhagaysi dacwadeed, ama habraacyada marka shaqsi laga mamnuuco inuu daryeel bixiyo. Xeerarkaan ayaa gacan ka gaysanaaya bixinta hufnaanta iyo tubta adeeg bixiyaasha iyo dadwaynaha si ay u fahmaan qaabka wakaaladu uga shaqeyso arimahaan muhiimka ah. Xeerarkaan ayaa waafaqsan awooda sharci ee la siiyay DELC sida ku cad ORS 329A iyo ORS 326.430.

**Xeerarka Maamulka ee Oregon (OAR) Cutubka 414, Qaybta 075**
Xeerarka Guud ee Xarumaha Daryeelka Carruurta
Diseembar 7, 2023

Nuqulka la daabacay 12/11/2023

Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka
Waaxda Ruqsada Daryeelka Carruurta

Nuqulkaan buugga xeerka waxaa laga heli karaa webseedka Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka.Nuqullada dheeraadka ah waxaa la soo degsan karaa wakhtigii la doono.

Si aad u hesho xog dheeraad ah ama wararkii ugu danbeeyay, booqo
www.oregon.gov/delc

Su'aalo ma qabtaa? Iimeylka CCLD.Customerservice@delc.oregon.gov
Wac 1-800-556-6616

Waxaad xaq u leedahay adeegyada caawimaada luuqada iyo caawimaadda kale si bilaash ah. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ku baxaysa luuqadaada ama caawimaado kale, fadlan la xiriir Xafiiska Daryeelka Carruurta oo aad ka wacayso lambarkaan 503-947-1400.

**WAAXDA WAXBARASHADA IYO DARYEELKA DHALAANKA**
**Cutubka 414, Qaybta 075**

# Xeerarka Guud ee Dhammaan Xarumaha Daryeelka Carruurta

## Liiska Mawduucyada:

414-075-0000 Applicability of Rules ... 93
414-075-0010 Definitions ... 94
414-075-0130 Complaints and Investigations ... 99
414-075-0230 Exempt Prohibition, Unlawful Care, Civil Penalties ... 104
414-075-0250 Operating Hours and Care Not Requiring a License ... 107
414-075-0300 Union Representation in Contested Case Hearings ... 109

## 414-075-0000 Adeegsiga Xeerarka

(1) Marka laga soo tago in si kale la sheegay, xeerarkaan ayaa qabanaaya dhammaan adeeg bixiyaasha daryeelka carruurta iyo xarumaha ruqsadda laga cafiyay, la cafiyay, iyo kuwa aan ruqsadda haysan oo ayna ku jiraan:

(a) Dhammaan xarumaha ruqsadda leh ayna ku jiraan guryaha daryeelka carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan, guryaha daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh, iyo xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadada leh, iyo xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadada leh ee ilmaha da'da dugsiga;

(b) Xarumaha daryeelka carruurta ee ruqsada laga dhaafay iyo kuwa laga cafiyay oo uu sharcigu ka doonaayo inay u shaqeeyaan keliya ama ay ka koobnaadaan shaqsiyaad ka diiwaan gashan Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda, ayna ku jiraan laakiin kuma koobneyn, barnaamijyada la diiwaan gasho iyo xarumaha daryeelka la kabo;

(c) Xarumaha daryeelka ee shardi dhaafka leh oo baxsha ama codsanaaya inay baxshaan daryeelka lagu qeexay in uusan ahayn daryeelka carruurta sida ku cad ORS 329A.250(4)(b)(A) ilaa (H); iyo

(d) Xarumaha, adeeg bixiyaasha, iyo shaqsiyaadka bixinaaya ama lagu eedeeyay inay bixinayaan daryeel sharci daro ah sida lagu qeexay OAR 414-075-0230.

(2) Xeerarkaan ayaa kaabaaya kamana awood badan karaan xeerarka ku jira Cutubka 414, Qaybaha, 61, 175, 180, 205, 305, 310, 350, 400, 425, iyo 450 waxayna khuseeyaan barnaamijyada daryeelka carruurta noocyada gaarka ah. Haddii ay iskhilaafaan xeerarkaas iyo xeerarkaan, xeerarkaan ayaa awoodda leh.

(3) Haddii maxkamad sharci ay hesho in qayb, weedh, ama qodob kamid ah xeerarkaan uu kasoo horjeedo dastuurka ama uusan sharci ahayn sabab kastaba ha keentee, natiijadaan ayaan saameyn doonin saxnaanta qaybaha soo haray ee xeerarkaan.

## 414-075-0010 Qeexitaannada

Erayada iyo weedhaha soo socda, marka lagu adeegsato AR 414-075-0000 ilaa 414-075-0300, waxay leeyihiin macneyaasha soo socda:

(1) **"Guriga Daryeelka Carruurta ee Qoyska ee Shahaadada leh"** ama "CF" waxaa laga wadaa xarunta daryeelka carruurta oo lagu maamulo guri loo sameeyay inuu noqdo guriga hal qoys ama guri kale oo shahaado u haysta inuu daryeelo ugu badnaan 16 carruur ah markiiba.

(2) "**CCLD**" waxaa laga wadaa Waaxda Ruqsada Daryeelka Carruurta ee Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka.

(3) "**Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda"** ama "CBR" waxaa laga wadaa diiwaanka CCLD ee shaqsiyaadka loo ogolaaday inay la shaqeeyaan xarunta daryeelka carruurta gudaha Oregon si waafaqsan xeerka ORS 329A.030 iyo OAR 414-061-0000 ilaa 414-061-0120.

(4) **"Ilmaha Daryeelka Carruurta**" waxaa laga wadaa ilmo kasta oo jira lix asbuuc ama ka wayn iyo ka yar 13 sano, ama ilmo ka yar da'da 18 oo qaba baahiyaha gaarka ah una baahan heer daryeel kaasoo ka badan daryeelka caadiga ah ee ilmaha da'diisa ah, kaasoo xarunta darkeelka carruurta ee ruqsadda leh ama la kaalmeeyo, ama xarunta laga doonaayo ruqsadda, ama xarunta daryeelka carruurta ee ruqsadda laga dhaafay sida lagu qeexay xeerkaan, ay ka saaran tahay masuuliyad dheeraad ah muddada kooban ee waalidku ka maqan yahay.

(5) **"Xarunta Daryeelka Carruurta"** waxaa laga wadaa xarun kasta oo daryeelka carruurta siisa carruurta, ayna ku jiraan xarunta daryeelka carruurta ee shahaadada leh, xarunta daryeelka carruurta ee ilmaha da'da dugsiga gaaray ee shahaadada leh, guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaadada leh, iyo guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan. Waxaa ku jiri kara kuwa lagu yaqaano magac sifo gaar ah, sida dugiga barbaarinta, dugsiga baxnaaninta, fasalka birimada, dugsiga ciyaarta ilmaha, daryeelka kahor iyo kadib dugsiga, ama xarunta hormarinta carruurta, kumana jiraan daryeelka carruurta ee ruqsadda laga cafiyay ama aan ruqsada u baahnayn, sida lagu qeexay xeerkaan. Shardigaan ayaa khuseeya shahada guud ee daryeelka carruurta. Waxaa ku jira goobta rasmiga ah, qalabka, shaqaalaha, adeeg bixiyaha, barnaamijka, iyo daryeelka carruurta. Kuma jirto xarunta daryeelka carruurta ee laga dhaafay ruqsadda sida lagu qeexay xeerkaan.

(6) **"Xadgudubka iyo Dayaca Ilmaha"** waxaa laga wadaa sida lagu qeexay "xadgudub" xeerka ORS 419B.005 ayna ku jiraan laakiin kuma koobna xadgudubka jireed, xadgudubka shucuureed, xadgudubka galmada, dayacaada ilmaha ama si

xun ula dhaqmidda, iyo hanjabaada gelinta ilmaha khatar wayn oo waxyeello u keenaysa caafimaadka iyo faya qabka ilmaha.

(7) **"Adeegyada Difaaca Ilmaha**" ama "CPS" waxaa laga wadaa barnaamij sida lagu qeexay OAR 413-015-0115.

(8) "**Ganaax lacageed**" waxay ka dhigan tahay ganaax ay CCLD soo rogtay kadib markii la jebiyay midkood ama ka badan xeerarkaan ama shuruucdaan.

(9) **"Cabasho"** waxaa laga wadaa xogta qoran ama hadalka ah ee laga helay il kasta oo sheegaysa in xarun ay bixinayso ama ay u bixisay daryeel qaab jebinaaya sharciga gobalka ama xeerka maamulka oo ay awood u leedahay CCLD.

(10) **"Shaqaale"** waxaa laga wadaa shaqsi ka shaqeeya si buuxda ama qayb kamid ah wakhti xarun. Tan waxaa ku jira dhammaan daryeel bixiyaasha iyo shaqsi kasta oo shaqooyinkiisu yihiin wax ka baxsan daryeelka carruurta.

(11) **"Daryeelka Aan Ruqsadda U baahnayn"** waa daryeelka uu baxsho daryeel bixiye kaas oo ku jira shardi dhaaf sida lagu qeexay "daryeelka carruurta" xeerka ORS 329A.250(b)(A) ilaa (H) ama uu si kale u sheegay sharcigu (arag OAR 414-075-0250(3) aana lagu qeexin xeerka ORS 329A.250(4)(a)(A) ama (B).

(12) **"Xarunta Daryeelka Ruqsadda laga Cafiyay"** waxaa laga wadaa xarun bixiya keliya daryeelka ruqsadda laga dhaafay sida lagu qeexay xeerkaan.

(13) **"Shaqsi Laga Mamnuucay Bixinta Daryeelka aan Ruqsadda Lahayn"** waxaa laga wadaa qof sida sharcigu qabo laga mamnuucay inuu bixiyo daryeelka carruurta ama daryeelka bilaa ruqsadda ah, marka laga reebo ilmaha uu dhalay ama qaraabada la yahay ama guurku isku keenay oo ku cayimay heerka afraad ee kalsoonida sida lagu go'aanshay sharciga lacageed, sida lagu qeexay xeerka ORS 329A.252(1)(a) ilaa (e) laguna qeexay OAR 414-075-230. Shaqsi laga mamnuucay bixinta daryeel bilaa ruqsad ah ayaan u qalmin inuu iska diiwaan gasho Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda marka laga reebo diiwaan gelinta kooban ee lagu qeexay xeerka 414-061-0020(27)(b).

(14) **"Xarunta"** waxaa laga wadaa shaqsi, koox shaqsiyaad ah, ama wakaalad daryeesha ama lagu ogyahay inay bixiso daryeelka ilmo kasta oo kayar 13 sano ama kayar 18 sano kaasoo qaba baahiyo gaarka ah una baahan heer daryeel oo ka badan kan ilmaha faciis ah kaasoo shaqsiga, kooxda shaqsiyaadka, ama wakaaladu masuul ka tahay muddo cayiman oo waalidka, masuulka sharciga ah ama daryeeluhu maqan yahay.

(15) **"Qoyska"** marka laga hadlaayo ujeedooyinka go'aaminta haddii carruurtu ka yimaadeen isku qoys ama haddii ilmo uu ku jiro daryeelka xubin kamid ah qaraabada ilmaha sida lagu qeexay OAR 414-075-0250 waxaa laga wadaa koox shaqsiyaad ah oo dhalasho, guur ama koriimo kuna xiriira ilmaha, ama shaqsiyaad xiriiradooda shaqo, sida inay isla dagan yihiin, ay lamid yihiin kuwa ku qoran qeexitaanadaas.

(16) **"Helitaanka"** waxaa laga wadaa go'aanka qoraalka ah ee kasoo baxa shaqaalaha CCLD ee la xiriira xogta la helay, cabasho, ama ku dhaqmid la'aanta shardi ee la

ogaaday sida ku cad ORS 329A.030 ama ORS 329A.250 ilaa 329A.500 ama xeerarka ay dhaqan geliyeen Guddiga Waxbarashada Dhalaanka oo waafaqsan ORS 329A.030 ama ORS 329A.250 ilaa 329A.500.

(17) **"Sabab Leh"** waxaa laga wadaa in sababta diidmada ama cusbooneysiin la'aanta ruqsad ama diiwaan gelinta CBR ama kala laabashada ruqsadda ama ka saarida CBR lagu saleeyay go'aanka ah in:

(a) Marka laga hadlaayo codsiga ama dib u diiwaan gelinta CBR, qof lagu helay inuusan u qalmin kadib markii la eegay taariikhda, ayna ku jirto laakiin kuma koobna taariikhda danbiga, xadgudubka iyo dayaca ilmaha, shahaadada daryeelka koriimada ilmaha oo xun, ama taariikhda xun ee adeegyada difaaca dadka waawayn, iyo xogta la xiriirta taariikhda; ama

(b) Marka laga hadlaayo ruqsad, ruqsad-qaatuhu uu ku fashilmay inuu buuxiyo shuruudaha ruqsad siinta uuna u shaqeynaayo ama u shaqeeyay qaab khatar ku ah caafimaadka iyo badqabka ama faya dhowrka carruurta. Ujeedooyinka xeerkaan awgood, "khatar badan" waxaa laga wadaa sababida khatar ama si dhab ah u abuurista waxyeelada jireed, shucuureed, ama dhimirka oo ku dhacda ilmaha ku jira daryeelka carruurta, waxaana ku jira laakiin kuma koobna xadgudub kasta:

(A) Shardi loo sameeyay inuu ilmaha ka difaaco khataraha jireed;

(B) Tusmada qusaysa iyo xeerarka anshaxa ee quseeya ciqaabka aan saxda ahayn;

(C) Shardi ka saaraaya xarunta qof muujiyay habdhaqan khatar xun ku abuuri karta carruurta;

(D) Shardi sheegaaya in lasoo sheegay xadgudubka ama dayaca ilmaha ee laga shakiyay;

(E) Shardiga quseeya hurdada badqabka leh ee carruurta dhashay; ama

(F) Xeerarka kormeerka ee ka dhasha:

(i) Ilmo ka baxsaday xarunta;

(ii) Ilmo laga soo tagay ama safar gaaban ayadoo aan la kormeerayn; ama

(iii) Ilmo dhaawacmay marka dhaawaca looga hortagi karo kormeerka caadiga ah.

(18) **"Baaritaan"** waxaa laga wadaa uruurinta iyo dib u eegista xogta ay heshay CCLD taasoo la xiriirta eedayn lasoo sheegay oo ka dhan ah xeer ama sharci la jebiyay ayna ku jiraan laakiin kuma koobna warbixinta la xiriirta xadgudubka ama dayaca ilmaha ee loo gudbiyay booliska ama ODHS, ama xogta kale ee ay ehshay CCLD. Baaritaan waxaa kamid ah laakiin kuma koobna baaritaanka iskaashiga ah sida lagu qeexay xeerka ayna ku jiraan hawlo kasta oo ku qoran xeerka ORS 329A.390(7) ama OAR 414-075-0130.

(19) **"Ruqsad leh"** waxaa laga wadaa marxalada haysashada diiwaan gelin ama shahaado shaqeynaysa oo ay bixisay CCLD.

(20) **"Ruqsad"** waxaa laga wadaa ogolaansho ka yimid CCLD si loo maamulo guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan, guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee shahaado leh, xarunta daryeelka carruurta ee shahaadada leh, xarunta daryeelka carruurta ee shahaadada leh ee ilmaha da'da dugsiga.

(21) **"Ruqsad-hayste"** waxa alaga wadaa qof ay diiwaan gelin ama shahaado siisay CCLD.

(22) **"Daryeelka Carruurta ee Laga Dhaafay Ruqsadda"** waxaa laga wadaa daryeelka carruurta ee aan laga doonayn inuu ruqsad lahaado waayo waxaa lagu bixiyaa sida lagu qeexay ORS 329A.250(5)(a) ilaa (i).

(23) **"Xarunta Daryeelka Carruurta ee Laga Dhaafay Ruqsadda"** waxaa laga wadaa xarun bixisa keliya daryeelka carruurta ee laga dhaafay ruqsadda sida lagu qeexay xeerkaan.

(24) **"Ku dhaqmid la'aan**" waxaa laga wadaa in qofku jebiyo shardiga ku jira sharciga ama xeerka nooca xarunta ee quseeya.

(25) **"Ku Dhaqmid La'aanta La Ogaaday"** waxaa laga wadaa ku dhaqmid la'aan ay ogaadeen shaqaalaha CCLD atna ku jirto xogta laga helay diiwaannada xarunta.

(26) **"Daryeelka mararka qaar"** waxaa laga wadaa daryeel la baxshay ugu badnaan 70 maalmood sanad kasta si loogu adeegsado kormeerka iyo tusmada uu baxsho qof, kafaala qaadaha, ama urur aan caadiyan ka shaqeyn bixinta daryeelka carruurta, sida lagu qeexay xeerkaan, muddo aan ka badnayn 70 maalmood, ama nashaadaadka kobcinta kuwaasoo waafaqsan maalmaha ka baxsan dugsiga nidaamka dugsiyada dadwaynaha ee Oregon.

(27) **"ODHS"** waxaa laga wadaa Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon.

(28) **"Inta badan ka shaqeeya bixinta daryeelka"** waxaa laga wadaa in xarunta la siiyay shahaadada daryeelka carruurta ee shaqeynaysa ama diiwaan gelinta, waa xarunta daryeelka carruurta ee laga dhaafay ruqsad sida lagu qeexay xeerkaan ama loosoo bandhigo ama loo xayiisiiyo dadwaynaha si ay bixiso daryeelka carruurta si joogto ah.

(29) **"OTIS"** waxaa laga wadaa Xafiiska Tababarka, Baaritaannada iyo Baaritaannada ee ODHS.

(30) **"Waalidka"** waxaa laga wadaa waalid, masuul, ama wakiilka bixiya daryeelka rasmiga ah lehna masuuliyada sharciga ah ee ilmaha.

(31) **"Qof"** waxaa laga wadaa qof shaqsi ah, wakaalad ay CCLD siisay diiwaan ama ruqsad si ay u maamusho xarunta daryeelka carruurta ama xarunta daryeelka carruurta ee ilmaha da'da dugsiga oo shahaado leh, ama qof ama wakaalad maamusha xarunta daryeelka carruurta ee ruqsadda laga dhaafay.

(32) "**Dhismeyaasha**" waxaa laga wadaa goobta rasmiga ah ama la in ee loo adeegsado xarun bixisa daryeelka carruurta taasoo lagu dabaqaayo xeerka iyo baaritaanka CCLD, ayna ku jiraan aagaga dhammaan gudaha iyo banaanka oo aan si toos ah loogu adeegsan daryeelka ilmaha.

(33) **"Adeeg Bixiyaha"** waxaa laga wadaa qof magaciisa lagu bixiyay ruqsad ama oggolaanshaha helitaanka lacagta kaalmada daryeelka ah.

(34) **"Barnaamijka la Diiwaan gashay"** waxaa laga wadaa xarun ay CCLD siisay diiwaan gelin si ay uga shaqeyso barnaamijka diiwaan gashan ee baxnaaninta ama daryeelka ilmaha da'da dugsiga.

(35) **"Guriga Daryeelka Carruurta Qoyska ee Diiwaan gashan"** ama "RF" ama "Xarunta Diiwaan Gashan" ayaa laga wadaa guriga adeeg bixiyaha kaasoo ay CCLD ay siisay ruqsad ay ku maamusho xarun gudaha guriga qoysku dagan yahay si waafaqsan xeerarkaan iyo xeerka OAR 414-205-0000 ilaa 414-205-0170.

(36) **"Saacada shaqada ee caadiga ah"** waxaa laga wadaa maalmaha iyo saacadaha shaqada sida ay codsatay xarunta daryeelka carruurta ayna ogolaatay CCLD, marka laga reebo:

(a) Xarunta daryeelka carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan taasoo aan codsan aana qaadan oggolaanshaha CCLD ee saacadaha caadiga ah ee shaqada:

(A) Bixinta daryeelka habaynkii ayaa loo arkaa inay haysato saacadaha shaqada ee 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii, haddii la bixinaayo daryeelka habbeenkii.

(B) In aysan bixin daryeelka habbeenkii ayaa loo arkaa inay haysto saacadaha shaqada ee 5:00 am ilaa 9:00pm, Isniinta ilaa Jimcada.

(b) Saacadaha caadiga ah ee shaqada sidoo kale waxaa ku jira wakhti kasta oo ilmo ka diiwaan gashan ama si joogto ah u xaadira xarun diiwaan gashan ama shahaado leh uu joogo xarunta ayna ku jirto kahor iyo kadib saacadaha shaqada ee la ogolaaday, ilaa in:

(A) Ilmuhu dagan yahay xarunta maahee; ama

(B) Ilmuhu uu joogo guriga daryeelka carruurta ee diiwaan gashan ama shahaadada leh si loogu qabto munaasabad bulsho sida lagu qeexay OAR 414-075-0250(2)(b).

(37) **"Eedaymaha Xasaasiga ah"** waxaa laga wadaa eedaymo kuwaasoo kadib go'aanka shaqaalaha CCLD looga doodi doonin dhagaysiga dacwada daryeelka ilmaha kuwaas oo jooga ama gaaray da' ku filan inay fahmaan wada sheekaysiga kaasoo ay ku jirayaan dood fal galmo ama xadgudub galmo ama xogta shaqsiga ah ee caafimaadka qofka ama xanuunka caafimaadka ama naafada laga helay.

(38) **"Shaqaalaha"** waxaa laga wadaa, sida ku haboon:

(a) Xarun, adeeg bixiye iyo shaqsiyaad kasta oo kale oo ka shaqeeya xarunta ayadoo aan loo eegayn mushaarkooda, ayna ku jiraan mutadawac kaasoo xarunta joogay wax ka badan hal shaqo; ama

(b) Barnaamijka CCLD, shaqsi kasta oo u shaqeeya wakaalada ama awood u leh inuu wakiil u noqdo wakaalada, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna baareyaasha, khabiirka ruqsad bixinta, maamuleyaasha, ama shaqaalaha kale.

(39) "**Daryeelka La kaalmeeyo**" waxaa laga wadaa daryeelka, kormeerka, iyo hogista si joogto ah ee ilmaha, uusan la joogin waalid, masuul ama qofka masuulka ka ah, kaasoo la baxshay inta lagu jiro qayb kamid ah 24-ka saac ee maalinta, qarashkiisana lagu baxshay si guud ama qayb ahaan lacagaha dawlada ee ay maamusho Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka.

(40) **"Xarunta Daryeelka la Kaalmeeyo"** waxaa laga wadaa xarun bixisa daryeeka la kaalmeeyo ee carruurta, ayna ku jirto kalkaalinta maalintii, kalkaalinta dugsiga, xarunta daryeelka carruurta, guriga daryeelka carruurta ee shahaadada leh, diiwaan gashan ama laga dhaafay ruqsada ama xarun la mid ah oo ku shaqeysa magac, taasoo ay lacagta daryeelka carruurta siiso Waaxda Waxbarashada iyo Daryeelka Dhalaanka.

(41) **"Natiijo Badel ah"** waxaa laga wadaa natiijo ku jirta warqadda natiijooyinka taasoo badelaysa natiijo ku jirtay warqad horey loosoo saaray.

(42) **"Baaritaanka Wadajirka ah"** waxaa laga wadaa baaritaan ay samaysay CCLD oo kaashanaysa wakiilo ka socda wakaalado iskaashi laleh, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna ODHS iyo waaxaheeda iyo xarumaheeda.

(43) **"Daryeel Sharci Daro ah"** waxaa laga wadaa daryeel uu baxshay qof ama wakaalad aan ruqsad u haysan ama diiwaan gashnayn marka ruqsad ama diiwaan gelin ay qasab ku tahay sida ku cad ORS 329A.255, ORS 329A.280 ama ORS 329A.330, iyo sida lagu qeexay xeerka OAR 414-075-0230.

(44) **"Aan haysan Ruqsad"** waxaa laga wadaa xaalada bixinta daryeelka ayadoo aan la haysan ruqsad ay bixisay CCLD ayna ku jirto inta la bixinaayo daryeelka carruurta ee ruqsadda laga dhaafay ama daryeelka sharci dhaafka leh.

## 414-075-0130 Cabashooyinka iyo Baaritaannada

(1) Ilaa in horey u furnaa maahee eedaymo isku mid ah, cabasho ayaa la furi doonaa ayadoo lagu saleynaayo helitaanka CCLD ee midkood waxyaabaha soo socda ee la xiriira xarumaha ruqsadda leh, barnaamijyada diiwaan gashan, ama xarumaha aan ruqsadda haysan oo lagu eedeeyo inay bixinayaan daryeel kaasoo looga baahan yahay ruqsad ama diiwaan:

(a) Warbixinta isdhaafsiga ah ee xadgudubka iyo dayaca ilmaha oo ka timaada wakaaladaha sharci fulinta, ODHS, ama OTIS ayna ku jirto warbixin la xiray xiligii baaritaanka;

(b) Warbixin ama xog ka imaanaysa ama ay soo gudbisay wakaalad kale oo gobal ama maxali ah ama waax dawladeed;

(c) Warbixin ama xog ka timid shaqaalaha xarun; ama

(d) Xog laga helay dadwaynaha.

(2) CCLD ayaa ku dhiiri gelinaysa qof ama wakaalad gudbinaaya cabasho in uu u sheego CCLD aqoonsigiisa iyo xogta xiriirka, sida ku cad xeerka ORS 329A.390(4) kaasoo ka mamnuucaaya CCLD inay faafiso magaca, ciwaanka, ama xogta kale ee

aqoonsiga ee ku saabsan qofka ama wakaalada soo gudbisay cabashada, marka laga reebo sida soo socota:

(a) CCLD ayaa xogta xiriirka ee qofka ama wakaalada u soo gudbisay cabashada la wadaagi karta gudaha CCLD ama wakaalad kasta ama shaqsi kasta oo samaynaaya baaritaanka wadaaga ah ee CCLD kaasoo la xiriira ujeeda xaqiijinta xogta dhabta ah ama helitaanka xog dheeraad ah; iyo

(b) CCLD ayaa u sheegi karta qof in ay heshay warbixinta isdhaafsiga ah oo uga timid wakaaladaha sharci fulinta, ODHS, ama OTIS taasoo warbixinta isdhaafsiga ah ay qusayso taariikhda xadgudubka ama dayaca ilmaha taas oo dhalisay dib u eegista u qalmida qofka ee diiwaan gelinta Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda, laakiin uma sheegi karto magaca, ciwaanka ama xogta kale ee aqoonsiga qofka ama wakaalada soo gudbisay warbixinta booliiska, ODHS, ama OTIS.

(3) CCLD ayaa baari karta cabasho kasta oo sheegaysa xadgudub ka dhan ah sharciga caafimaadka iyo badqabka oo la helay taasoo la xiriirta xarun, ayna ku jiraan xarumaha ruqsadda leh, barnaamijyada diiwaan gashan, iyo xarumaha daryeelka ee la kaalmeeyo, sida lagu sheegay xeerarkaan marka eedaymuhu sheegaan ku dhaqmid la'aanta xeerka ku qoran xeerka ORS 329A.250 ilaa 329A.500 ama qodob ku jira Xeerarka Maamulka ee Oregon Cutubka 414, Qaybaha, 175, 180, 205, 305, 310, 350, 400, 425 ama 450.

(4) CCLD ayaa baari karta cabasho kasta oo sheegaysa in xarun lagu qeexay xeerarkaan oo ay ku jirto laakiin kuma koobna shaqsiyaadka bixinaaya ama sheeganaaya inay bixinayaan daryeel ruqsadda laga dhaafay, ay bixinayso daryeelka sharciga darada ah sida lagu qeexay OAR 414-075-0230.

(5) CCLD ayaa baari karta xarun kasta oo CCLD ay hayso sabab ay ku aaminto ama ay heshay xog sheegaysa in daryeelka carruurta lagu bixiyo ayadoo aan haysan shahaadada, diiwaan gelinta, ama diiwaanka laga rabo.

(a) Si loogu adeegsado go'aaminta in daryeelka carruurtu u baahan yahay shahaado, diiwaan gelin, ama diiwaan, CCLD ayaa codsan karta in xaruntu keento xog la xiriirta aqoonsiyada carruurta ku jira daryeelka iyo sida ay ula xiriiraan daryeelaha iyo ayaga dhexdooda.

(b) Haddii xaruntu aysan siin CCLD xogta la xiriirta aqoonsiyada iyo xiriirada carruurta daryeelka ku jira sida looga codsaday, CCLD ayaa u qaadan karta in daryeelka koox ka badan saddex ilmood laga doonaayo shahaado, diiwaan gelin, ama diiwaan kasoo baxay CCLD.

(6) CCLD ayaa samayn karta booqasho toos ay ugu tagayso waqti macquul ah xarun si ay u baarto cabasho.

(a) Booqashada tooska ah waxaa lagu beegayaa wakhti macquul ah oo kamid ah wakhti uun ugu yaraan hal ilmo uu daryeelka carruurta joogo asagoo jooga xarun ruqsad leh ama lagu tuhmaayo in ay tahay xarun daryeel.

(b) Booqashada tooska ah waxaa lagu beegayaa wakhti macquul ah wakhti kasta oo ay CCLD si macquul ah u aaminto in ilmo uu ku jiro daryeelka xarun aan haysan ruqsad.

(7) Shaqaalaha CCLD ayaa, laakiin qasab kuma ahan, adeegsan kara qaab kasta oo baaritaan oo uu amraayo ORS 329A.390(7). Si ay u sameeyaan baaritaan shaqaalaha CCLD ayaa:

(a) Ku tagi kara hal booqasho ama ka badan xarunta si ay u sameeyaan baaritaan ay ku kormeerayaan dhismeyaasha.

(b) Ayaa heli kara, qaadan kara, duubi kara, qori kara, ama akhrin kara caddeynta.

(c) Wareysan kara shaqaalahaha, mutadawiciinta, waalidiinta carruurta daryeelka carruurta, ama shaqsiyaadka kale ee haya

xogta qusaysa.

(d) Codsan kara dukumiintiyada la xiriira kiiska baaritaanku ku socdo.

(e) Inay kormeeraan ayna eegaan shaqooyinka xarunta.

(f) Inay sameeyaan baaritaan ayadoo la shaqeynaysa iskaashato kale.

(g) Inay qaadaan xogta marqaatiyada, ayna ku jiraan qofka baaritaanku ku socdo, qaabka uu amraayo sharcigu in uruurinta cadeynta dacwadaha lacageed;

(h) Inay qasbaan inuu yimaado marqaatiyada, ayna ku jiraan qofka baaritaanku ku socdo, qaabka uu amraayo sharcigu ee soo xaadirista dacwadaha lacageed;

(i) Qasab ka dhigi kara jawaabaha baaritaannada;

(j) Qasab ka dhigi kara samaynta buugaagta, warqaddaha, ciwaannada, dukumiintiyada ama marqaati kaca kaasoo waafaqsan kiiska baaritaanku ku socdo; iyo

(k) Waxay bixin karaan amarada baaritaanka ee maxkamada.

(8) Xarunta daryeelka carruurta ee diiwaan gashan, shahaadada leh, la diiwaan gashan, ama daryeelka la kaalmeeyo waa inay keentaa diiwaano ama dukumiintiyo kale, ayna u ogolaato CCLD inay gasho xarunta si ay u samayso baaritaan sida uu amraayo ama fasaxaayo xeerka ORS 329A.390 ama xeerarka kale. CCLD Waaxda sida qusaysa:

(a) Ayaa lala laaban karaa ama diidi karaa sabab awgeed in la cusbooneysiiyo diiwaan gelinta, shahaadada, diiwaanka, ama oggolaanshaha daryeelka la kaalmeeyo haddii gelitaanka xarunta ama diiwaanadeeda aan la ogolaan.

(b) Ayaa soo qaadan kara damaanad baaris si uu u galo xarun sida ku cad ORS 329A.410 marka loo diido inuu galo xarunta.

(c) Ayaa la laaban kara asagoo cuskanaaya sabab ama diidi kara asagoo cuskanaaya sabab cusbooneysiinta diiwaan gelinta, shahaadada, diiwaanka, ama oggolaanshaha xarunta daryeelka la kaalmeeyo marka loo diido inuu galo ama gadaal looga ogolaaday kadib markuu soo qaatay damaanadda baarista.

(9) Haddii adeeg bixiyuhu u diido CCLD inuu galo dhismeyaasha ama u tago shaqaalaha xarunta sababo la xiriira in la sameeyo baaritaanka cabasho, CCLD ayaa gaari kara natiijo sax ah oo lagu saleynaayo keliya cadeynta kale ee sida madaxa banaan loo helay iyo xogta sida macquulka ah loogu xaqiijin kara ama loogu diidi karay xogta ka timaada booqashada ama wareysiyada uu diiday adeeg bixiyuhu.

(10) Adeeg bixiye ama ruqsad-hayste waa inuu siiyaa xogta runta ah, buuxda, ee saxda ah shaqaalaha CCLD taasoo la xiriira codsiga, diiwaannada ama warbixinnada ayna ku jiraan diiwaannada xaadirista, xiriirka qoraalka ah ama hadalka ah, kormeerka, booqashada, ama baaritaanka.

(a) Marka xeerka quseeya uu amraayo xogta in la baxsho si degdeg ah, waa in la bixiyaa inta lagu jiro booqashada ama haddii aysan qusayn booqashada 24 saac gudaheed marka CCLD codsato kadib.

(b) Xogta uusan qasab ka dhigayn xeerku in la baxsho si degdeg ah waa in la bixiyaa 48 saac gudahood kadib marka ay CCLD codsato si loogu daro baaritaanka. CCLD ayaa soo saari karta natiijo ayadoo aan akhrin xogta la baxshay kadib muddo ka badan 48 saacadood codsiga CCLD kadib.

(11) Qof ay su'aalo waydiisay CCLD sabab la xiriirta baaritaanka cabasho ayaa diidi kara inuu ka jawaabo su'aalo gaar ah ama uu baxsho dukumiinti asaga oo sheegaaya in diidmada lagu saleeyay xaqa u leeyahay inuu diido danbi ku oogista naftiisa, ayna ku jirto marka jawaabtu ay qusayso su'aal ama dukumiintiyo, haddii uu bixiyay qofku, ay dhisayso xiriir quseeya cadeynta loogu baahan yahay dacwad danbiyeed. CCLD ayaan laga doonayn inay qofka u sheegto xeerkaan kahor inta aysan su'aalo waydiin qofka.

(12) CCLD ayaa samayn karta booqashooyinka xaqiijinta ku dhaqanka xeerka oo ay ku tagayso xarun si loogu adeegsado xaqiijinta ku dhaqanka ama sii wadista ku dhaqanka.

(13) CCLD ayaa booqasho aan horay loo shaacin oo la xiriirta xaqiijinta cabasho ama ku dhaqanka xeerka ku tagi karta waqti macquul ah. Marka ay u arkaan inay sax tahay shaqaalaha CCLD, ayna ku jirto marka cabashada ay ku jiraan eedaymo xasaasi ah sida lagu qeexay xeerarkaan, CCLD ayaa dooran karta inay wareysiyo qaado ama qaybo wareysiyo ah qaado inta lagu jiro baaritaanka cabashada ama xaqiijinta ku dhaqanka, ayadoo adeegsanaysa taleefanka, shir muuqaal ah, ama iimeyl kaas oo dheeraad ku ah booqasho toos loo tagaayo.

(14) Xaruntu waa inay muhiimada saartaa baahiyaha ilmaha inta lagu jiro booqasho kasta oo shaqsi ah iskumana halayn karto joogitaanka shaqaalaha CCLD si ay marmarsiiyo uga dhigto ku dhaqmid la'aanta shardiga.

(15) Shaqaalaha ayaan laga doonayn inay caawiyaan xarunta si ay guul uga gaaraan ku dhaqanka si ay uga jawaabaan ku dhaqmid la'aan la ogaaday shaqaalaha CCLD ayaana:

(a) Lagu xisaabin karin xarunta marka laga hadlaayo ujeedooyinka buuxinta shuruudaha isku dheelitirta.

(b) Lama xiriiri karaan waalidiinta si ay u qaataan ilmaha si ay u gaaraan ku dhaqanka xajmiga, dheelitirka, ama xajmiga kooxda ama shuruudaha isku dhafka.

(c) Kulama talin karaan xarunta talaabooyin gaar ah si ay u gaarto ku dhaqanka, ayna ku jirto inay ilmaha guriga u dirto si ay u buuxiso shuruudaha xajmiga, dheelitirka, ama xajmiga kooxda ama isku dhafka.

(d) Waxay qori karaan in xaruntu qaaday tallaabooyin degdeg ah si ay u gaarto ku dhaqanka ama diiday inay sidaas samayso.

(16) Shaqaalaha CCLD ee loo xilsaaray inay baaraan cabasho ayaa dib u eegis samayn kara oo ka fiirsan kara dhammaan cadeymaha iyo dukumiintiyada wakhtigooda ay soo gudbisay xaruntu sida shardiga ku ah 414-075-0130(10) kahor inta aysan soo saarin natiijooyinka.

(17) Marka shuruudaha bixinta amarka degdega ah ee hakinta ama shuruudaha la buuxsho CCLD ayaa qaadi karta talaabo kahor inta aysan dhamayn baaritaanka ayadoo lagu saleynaayo xaqiiqooyinka lagu xaqiijiyay baaritaanka wali socda.

(18) Baaritaanka CCLD ee cabashada ayaa socda ilaa shaqaalaha CCLD kasoo saarayaan natiijooyinka khuseeya dhammaan ku dhaqmid la'aanta lagu eedeeyay cabashada ama lagu aqoonsaday baaritaanka.

(19) Ilaa in xarunta la xiray maahee kahor inta aysan CCLD soo saarin natiijada cabashada, shaqaalaha CCLD ayaa soo saari kara natiijooyinka soo socda ee la xiriira cabasho kasta oo ay baartay CCLD, waxayna soo saari kartaa natiijooyin gaar ah oo la xiriira mid kasta jebinta xeerka ama sharciga ee jiri karta ayadoo lagu saleynaayo xaqiiqada lagu caddeeyay baaritaanka:

(a) Sax ah, marka qof macquul ah uu xaqiijin karo in ku dhaqmid la'aan dhacday asagoo cuskanaaya cadeynta; ama

(b) Khalad ah, marka qof macquul ah uusan xaqiijin karin in ku dhaqmid la'aan dhacday asagoo cuskanaaya cadeynta; ama

(c) Aan Cadeyn loo hayn, marka qof macquul ah uusan go'aansan karin in ku dhaqmid la'aan dhacday sabab la xiriirta cadeymaha iska hor imaanaaya ama sabab la xiriirka in xogta aan la heli karin.

(20) Qof noqon kara qof shardi dhaafka laga mamnuucay haddii uu soo wareejiyo diiwaan gelintiisa, shahaadada ama diiwaan gelinta CBR inta lagu jiro baaritaanka CCLD. Eeg OAR 414-075-0230.

(21) Haddii xarun la xiray kahor inta aan CCLD soo saarin natiijada cabasho sabab la xiriirta in ay si ikhtiyaari ah usoo wareejiysay ama uga noqotay ruqsada ayna ku jirto sabab la xiriirta in codsiga cusbooneysiinta wakhtigeeda ku soo baxday laga noqday, CCLD ayaa sameyn karta wareysi ama soo saari karta natiijo ama xiri karta baaritaanka oo aan la dhamayn. Haddii CCLD ay xirtay baaritaan asagoo kala dhiman, CCLD ayaa dib u furi karta baaritaanka marka ay doonto ayadoo ku daraysa haddii ruqsad-luhu codsado in dib loogu furo ruqsadda ama ruqsad kale.

(22) Baaritaanka CCLD kaasoo lagu soo saaray natiijooyinka dhammaan eedaymaha lagu eedeeyay xarunta ayaa dib loo furi doonaa keliya sida soo socota:

(a) CCLD ayaa dib u furi doonta baaritaanka haddii ay hayso xog aan lagu tixgelin baaritaankii hore kaas oo haddii la xaqiijiyo badeli kara natiijada, ayna CCLD go'aamisay in dib u furlista baaritaanku muhiim tahay.

(b) CCLD waa inay u sheegtaa xarunta marka ay dib u furto baaritaanka.

(c) Shaqaalaha CCLD ee samaynaaya baaritaanka dib loo furay waa inay soo saaraan natiijooyinka kama danbaysta ah kadib baaritaanka dib loo furay ayadoo aan loo eegayn haddii natiijada baaritaankii hore isbadeshay iyo in kale.

(23) Xarunta daryeelka carruurta ayaan soo faro gashan karin, is hortaagi karin, ama iskudayi karin inay u diido waalid, masuul sharci ah, shaqaalaha hadda ama hore ama mutadawac inuu xog siiyo CCLD, booliiska, ama wakaalad kale oo awood sharci ama maamul ku leh xarunta, ama waalidka ilmaha arimaha la xiriira eedaymaha wax kamid ah waxyaabaha soo socda ee lagu sheegay ORS 329A.348:

(a) Xadgudubka ama si xun ula dhaqanka ilmaha ku jira xarunta daryeelka carruurta;

(b) Xadgudubyada shuruudaha ruqsadda;

(c) Fal danbiyeed ka dhacay xarunta;

(d) Xadgudubyada sharciyada gobalka ama federaalka, ama

(e) Fal kasta oo khatar gelinaaya caafimaadka iyo badqabka ilmo ku jira xarunta daryeelka carruurta.

(24) Faro gelinta xog baahinta daacada sida lagu qeexay qaybta (23) ee xeerkaan waxaa ku jira:

(a) Joojinta ama ku hanjabidda daryeelka ilmo haddii waalid ama masuulka sharciga ah ee ilmuhu shaaciyo xogta; ama

(b) Ka codsashada waalid ama masuulka sharciga ah ee ilmo ama, shaqaalaha ama mutadawaca inuu saxiixo heshiiska diidaaya shaacinta xogta ama lamidka ah ee mamnuucaaya shaacinta xogta; ama

(c) U sheegista ama tababaridda shaqaalaha hadda ama hore, mutadawaca, waalidka, ama masuulka sharciga ah in aysan am ay tahay inaysan shaacin xogta.

## 414-075-0230 Mamnuucida Shardi Dhaafka, Daryeelka Sharci Darada ah, Ganaaxyada Lacageed

(1) Qof waa mid laga mamnuucay shardi dhaaf kadib marka ay dhacaan wax kamid ah marxaladaha soo socda sida lagu caddeeyay ORS 329A.252:

(a) Shaqsiga loo diiday ama lagala noqday diiwaan gelintiisa, shahaadada, ama diiwaamka sabab jirta awgeed.

(b) Shaqsigu uusan ka diiwaan gashanayn Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda sabab la xiriirta in looga saaray sabab ama loogu diiday sabab.

(c) Qofku uu si iskiis ah u wareejiyo ruqsadda ilmihiisa ama diiwaan gelinta Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda inta lagu jiro baaritaanka CCLD ama kadib marka CCLD ay siisay qofka ogeysiiska talaabada maamulka ee ka dhanka ah qofka ama xarunta qofka.

(d) Qofka laga saaro Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda.

(e) Qofku uu yahay ruqsad-haystaha ruqsad la xayiray.

(f) Qofka la siiyay amarka kama danbaysta ah ee joojinta ama ka afeefashada ayna siisay CCLD kadib dacwad lagu tartamay ama dhaqan gashay sabab la xiriirta in uusan qofku codsan dhagaysi.

(2) Qof laga mamnuucay shardi dhaafka ayaan bixin karin daryeelka carruurta ama daryeelka ruqsadda laga dhaafay sida lagu qeexay xeerarkaan marka laga reebo ilmihiisa ama ilmaha uu qaraabada la yahay ee ay kala tirsadaan in uga dhow heerka afraad sida lagu go'aanshay sharciga lacageed.

(3) Qof laga mamnuucay shardi dhaafka:

(a) Wuxuu ahaanayaa qof laga manuucay shardi dhaafka muddo shan sano ah kadib taariikhaha ugu danbeeya ee marxalada keentay mamnuucida sida lagu qeexay Qaybta (1) (a) ilaa (c) iyo (f) ee xeerkaan wuxuuna ku sii jirayaa xaalada qof laga mamnuucay shardi dhaafka ilaa iyo inta dib looga diiwaan gelinaayo Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda.

(b) Masii ahaan doono qof laga mamnuucay shardi dhaafka haddii aasaaska keliya ee aqoonsigu uu yahay hakin sida lagu qeexay (1) (d) ama (e) ee xeerkaan ayna CCLD ka noqotay hakinta ayadoo soo saartay amar kama danbays ah.

(c) Waxaa laga yaabaa in laga diiwaan gasho Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda asagoo la siinaayo diiwaan gelin kooban sida lagu qeexay OAR 414-061-0020(27)(b) haddii uu buuxinaayo dhammaan shuruudaha diiwaan gelinta kooban.

(4) "Daryeelka Sharci Darada ah" waxaa laga wadaa daryeelka uu bixiyay qofka soo socda lana siiyay ilmo aan la xiriirin qofka ilaa heerka afraad ee qaraabanimada sida lagu go'aanshay sharciga lacageed:

(a) Uu bixiyo qof aan ruqsad haysan ama diiwaan gashanayn marka ruqsad ama diiwaan gelin laga doonaayo sida ku cad ORS 320A.255, ORS 329A.280 ama ORS 329A.330.

(b) Uu bixiyo qof laga mamnuucay shardi dhaafka sida lagu cadeeyay ORS 329A.252(2)(b).

(c) Uu bixiyo qof aan ruqsad haysan ama diiwaan gashanayn marka ruqsad ama diiwaan gelin laga doonaayo sida ku cad ORS 320A.255, ORS 329A.280 ama ORS 329A.330.

(d) Uu bixiyo qof ka diiwaan gashan CBR oo haysa diiwaan gelin xadidan:

(A) Sida lagu qeexay OAR 414-061-0020(25)(a) marka daryeelku uu jebiyo xadidaad ama shardi uu aqbalay qofku; ama

(B) Sida lagu qeexay OAR 414-061-0020(25)(b) marka uu bixinaayo daryeel asagoo la joogaaya ilmaha daryeelka ku jira bilaa kormeer kaasoo aan ahayn ilmihiisa.

(e) Guriga ilmaha, carruurta dhammaan kasoo jeeda halka qoyska oo dheeraad ku ah carruurta la dagan qofka, ama ugu badnaan sadex carruur ah marka laga daro ilmaha qofka la nool, uuna baxsho qof aan ka diiwaan gashanayn CBR laguna eedeeyay ama lagu xukumay xadgudubka ilmaha:

(A) Marka la gaaro ama kadib Janaayo 1, 2017 taasoo qusaysa ilmo dhintay ama dhaawac xun soo gaaray sida lagu qeexay ORS 161.015.

(B) Markay ahayd ama kadib Sibteembar 1, 2019 todobadii sano ee ugu danbaysay, marka warbixinta la helay ama eedaynta wayn ee xadgudubka ama dayaca ilmaha oo qusaysay ilmo kasta oo qofku siinaayay daryeel lagu bixinaayay meelaha soo socda:

(i) Xarunta daryeelka carruurta ee ruqsadda leh ama laga cafiyay ruqsadda sida lagu qeexay xeerarka;

(ii) Ilaaliyaha ilmaha ama qof kale oo guriga ilmaha jooga;

(iii) Uu bixiyo qof la xiriira ilmaha qaraabada la ah qofka ilaa heerka afraad sida lagu go'aanshay xeerka lacageed;

(iv) Uu bixiyo qof daryeela carruurta kasoo wada jeeda hal qoys marka lagu daro ilmaha la dagan qofka;

(v) Uu bixiyo qof daryeela ugu badnaan sadex carruur ah oo dheeri ku ah carruur kasta oo la dagan qofka; ama

(vi) Uu bixiyo qof xubin ka ah qoyska balaaran ee ilmaha, sida ay go'aamisay CCLD hadba xaalada markaas.

(5) Qof bixiyay daryeel sharci daro ah sida lagu qeexay xeerarkaan, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna daryeelka sharci darada ah ee uu baxshay qof laga mamnuucay shardi dhaaf, ayaa la marsiin karaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn $1,500 calaa xadgudub.

(a) CCLD ayaa bixin karta digniin badelkii ay soo rogi lahay ganaax lacageed oo la saaro khaladka koobaad ee qofka bixinaaya daryeelka sharci darada ah haddii CCLD go'aamiso in qofku uusan ka warqabin in daryeelku sharci daro ahaa sida lagu qeexay qaybta (4) ee xeerkaan ama ruqsad ay qasab tahay.

(b) Ganaaxa lacageed ee la saaray qofka ee lagu go'aanshay amarka kama danbaysta ah sabab la xiriirta in uu bixiyay daryeel sharci daro ah hal maalin ayaa noqonaaya $750 dhacdada koowaad ee daryeelka sharci darada ah ee ganaaxa lagu qiimeeyay.

(c) Maalin kasta oo dheeraad ah oo qofku bixiyo daryeelka sharci darada ah waa xadgudub gaar ah oo CCLD ay ku soo rogi karto ganaax lacageed oo aan ka badnayn $1,500 maalin kasta oo qofka lagu go'aansho amarka kama danbaysta ah qacda koowaad ama kadib marka dacwad dhagaysi la marsiiyo inuu baxshay daryeel sharci daro ah.

## 414-075-0250 Saacadaha Shaqada iyo Daryeelka Aan U baahnayn Ruqsad

(1) Xarun ayaa bixin karta daryeel ayadoo aan haysan ruqsad haddii xaruntu:

(a) UU bixiyo daryeelka guriga lagu siiyo ilmo uuna baxsho ilaaliyaha ilmaha ama qof kale;

(b) Uu yahay waalidka ilmaha, masuulka sharciga ah ama ilaaliyaha;

(c) Uu kala dhexeeyo ilmaha xiriir dhalasho ama guur oo ilaa heerka afaraad ah;

(d) Uuu xubin ka yahay qoyska balaaran ee ilmaha, sida ay ku go'aamisay CCLD marxalad iyo wakhtigeeda;

(e) Wuxuu bixiyaa keliya daryeel marar dhif ah sida lagu qeexay xeerarkaan;

(f) Uu yahay bixiyaha adeegyada caafimaadka;

(g) Uu siiyo daryeela carruurta kasoo wada jeeda hal qoys, marka lagu daro ilmaha la degan qofka;

(h) Uu siiyo daryeelka saddex carruur ah ama ka yar, marka lagu daro ilmaha la dagan qofka;–

(i) Uu daryeel siiyo carruurta da'da baxnaaninta kaasoo intiisa badan ah mid waxbarasho muddo 4 saacadood ah ama ka yar maalintii uusana joogin ilmaha da'da baxnaanintu xarunta ugu badnaan 4 saacadood maalintii;

(j) Uu siiyo daryeel carruurta da'da dugsiga oo aan loogu talo gelin daryeelka carruurta inuu noqdo inta badan hal hawl oo kobcin ah, sida casharada dabaasha, casharada dheesha, casharka gaarka ah, casharada muusiga, tababarka ciyaarta, ama cashar kasta oo keli ah oo lagu barto maado uun, kaas oo uusan jirin ilmo dhigta wax ka badan 8 saacadood asbuucii;

(k) Uu bixiyo ciyaaraha kooxda ama hawlaha bulshada oo la kafaalo qaaday ama lagu bixiyo kormeerka naadi ama koox himadeed abaabulan. Shardi dhaafkaan ayaa quseeya keliya wakhtiga la samaynaayo nashaadaadka ciyaarta ama bulshada ee kooxda;

(l) Ay maamusho degmo dugsiyeed, dugsi charter ah, waax siyaasadeed gobalkaan ah, ama wakaalad dawladeed;

(m) Uu u shaqeeyo kaaliyaha waalidka ahaan muddo aan ka badnayn 4 saacadood maalintii iyo:

(A) Daryeelka lagu baxsho qaab ay isku badelayaan waalidiinta xubnaha ka ah iskaashiga; iyo

(B) Uu kormeeraayo gudiga agaasimeyaasha ah ee masuulka ka ah abuurista xeerarka siyaasada ee qoran iyo habraacyada lala wadaagaayo dhammaan xubnaha.

(n) Uu bixiyo daryeelka inta waalidka ilmuhu uu joogo dhismaha uuna sameeyo shaqada goobta, iyo:

(A) Xaruntu ay u sheegto waalidka in barnaamijka xaruntu uusan ruqsad ka haysan gobalka;

(B) Hawlaha waalidku sameeyo aysan ku jirin shaqada; iyo

(C) Daryeel bixiyaashu ay markasta awoodaan inay la xiriiraan waalidka.

(o) Uu baxsho hawlaha hormarinta dhalinta, sida lagu qeexay ORS 329A.250(14), lana siiyo carruurta da'da dugsiga gaaray inta lagu jiro saacadaha dugsigu uusan furnayn taas oo aan ka dhicin meel ka baxsan daryeelka guriga.

(2) Daryeelka la siiyay carruurta aan daganayn xarunta ruqsada leh ayaa u baahan ruqsad haddii ay bixiso xarun ruqsad leh inta lagu jiro saacadaha shaqada caadiga ah ee xarunta ruqsadda leh, sida lagu qeexay xeerarkaan.

(a) Daryeelka la siiyo ilmo ka diiwaan gashan xarun ruqsad leh oo yimaada kahor ama ku nagaada kadib saacadaha shaqada caadiga ah ee xarunta kuna jira daryeelka qayb uun kamid ah saacadaha shaqada ee caadiga ah ee xarunta ayaa laga doonayaa laguna dabaqayaa dhammaan shuruudaha ruqsadda xarunta.

(b) Ilmo caadiyan daryeel ka hela xarunta guriga daryeelka carruurta ee diiwaan gashan ama shahaadada haysta joogana xarunta saacadaha ka baxsan kuwa caadiga ah ee shaqada xarunta si uu uga qaybgalo munaasabad ayaan lagu dabaqayn shuruudaha ruqsadda ee xarunta keliya haddii xaruntu u sheegto waalidka in xaruntu aysan bixinayn daryeelka ilmaha iyo in daryeelku uusan waafaqsanayn shuruudaha ruqsadda.

(A) Daryeelka lagu qeexay farqadda (2)(b) ee xeerkaan ayaan u qalmin lacag uu baxsho barnaamijka Shaqada la Xiriirta Daryeelka Maalintii.

(B) Daryeelka ilmo ka diiwaan gashan daryeelka carruurta ee ruqsadda leh ayaa la marsiinayaa dhammaan shuruudaha ruqsadda xarunta haddii wax kamid ah waxyaabaha soo socda ay jiraan ayadoo aan loo eegayn in xaruntu u sheegtay waalidka in daryeelku uusan waafaqsanayn shuruudaha ruqsadda:

(i) Waalidku uu xarunta lacag ku siiyo daryeelka;

(ii) Ilmuhu uu ku jiro daryeelka sabab la xiriirta bixinta daryeelka, kormeerka ama hagista inta waalidka ilmuhu maqan yahay sabab la xiriirta shaqo, dugsi, ama shaqo kale; ama

(iii) Ilmuhu uu ku jiro daryeelka wakhti ka baxsan saacadaha shaqada caadiga ah ee xarunta si joogto ah. Xarun si joogto ah u bixisa daryeelka

wakhtiyo ka baxsan saacadaheeda caadiga ah ee shaqada waa inay u sheegtaa CCLD ayna codsataa ansixinta isbadelka saacadaha shaqada si loogu daro maalmaha iyo saacadaha daryeelka caadiyan la baxsho.

(3) Daryeelka ayaa la bixin karaa bilaa ruqsad:

(a) Goobta xarunta daryeelka carruurta ee ruqsadda laga cafiyay, sida lagu qeexay xeerarkaan, uuna baxsho daryeel bixiye ka shaqeeya ama maamula xarunta daryeelka carruurta ee ruqsadda laga cafiyay, oo uu siinaayo ilmihiisa ama ilmo kasta oo kale oo la dagan daryeelaha kahor, inta lagu jiro, ama kadib saacadihiisa shaqada ee xarunta daryeelka carruurta ee ruqsada laga cafiyay, sida ay ogolaatay xarunta daryeelka carruurta ee ruqsadda laga cafiyay.

(b) Uu baxsho qof, uuna ku jiro qofka maamulaaya xarunta daryeelka carruurta ee ruqsadda laga cafiyay ama shardi dhaafka leh, oo bixinaaya daryeelka marar dhif ah sida lagu qeexay xeerarkaan inta lagu jiro fasaxyada xagaaga, qaboobaha iyo gu'ga ee dugsiga haddii xaruntu caadiyan xiran tahay inta lagu jiro fasaxyadaas. Xarun ruqsad leh ayaan bixin karin daryeelka mararka qaar ah inta lagu jiro wakhtiyada ay xaruntu xiran tahay ilaa in ruqsadda la wareejiyay ama ay dhacday maahee.

(c) Isku dhafka soo socda ee daryeelka ruqsadda laga dhaafay:

(A) Daryeelka uu bixiyo ilaaliya ilmaha ama qof kale oo guriga ilmaha jooga, oo dheeri ku ah hal ama ka badan carruur ah oo la dagan ilaaliyaha ama qof kale.

(B) Daryeelka uu baxsho waalidka, masuulka sharciga ah, ama ilaaliyaha ilmaha, oo dheeraad ku ah carruurta qaraabada ah ee waalidka ilmaha, masuulka, ama ilaaliyaha ee uu kala dhexeeyo dhalasho ama guur isku keenay ilaa heerka afraad sida lagu qeexay sharciga lacageed.

## 414-075-0300 Matalaadda Midawga ee Dhagaysiyada Dacwada labada Dhinac

(1) Wakiilka midawga shaqaalaha oo aan ahayn qareen kaasoo haysta ruqsad kasoo baxday Laanta Gobalka Oregon ayaa matali kara adeeg bixiyaasha soo socda ee qaybta ka ah dhageysiga kiiska ay qabanayso CCLD ama Waaxdu:

(a) Ruqsadlaha haysta ruqsadda guriga daryeelka carruurta ee qoyska ee diiwaan gashan ama shahaadada leh; ama

(b) Shaqsi bixiya daryeelka la kaalmeeyo ee guriga shaqsiga ama guriga ilmaha ee aan laga doonayn inuu ruqsad haysto.

(2) Marka uu matalaayo adeeg bixiye, wakiilka midawga shaqaalaha ayaa keeni kara cadeyn, baari kara oo marqaatiyaasha su'aalo waydiin kara doodna ka keeni kara:

(a) Adeegsiga xeerarka iyo sharciyada lagu dabaqay kiiska dacwadda;

(b) Tallaabooyinka ay qaaday CCLD hadda kahor ee la xiriiray xaaladaha tan lamidka ah;

(c) Macnaha waadixa ah ee xeerarka ama qodobada sharciga ee quseeya kiiska la isku haysto;

(d) Qusaynta cadeynta ee kiiska; iyo

(e) Habraacyada saxda ah ee loo adeegsanaayo dhagaysiga dacwada kiiska.

(3) Wakiilka midawga shaqaalaha ayaan soo gudbin karin dooda sharciga asagoo wakiil ka ah adeeg bixiye.

(a) "Dooda sharciga" kuma jiraan doodaha ku qoran qaybta (2)(a) ilaa (e) ee xeerkaan.

(b) "Dooda sharciga" waxaa ku jira doodaha ku qoran:

(A) Awooda CCLD ee dhagaysiga kiiska la isku haysto;

(B) Waafaqsanaanta dastuurka ee xeerka ama qodob ama adeegsiga shardiga dastuuriga ah ee CCLD; iyo

(C) Adeegsiga maxkamada ee xaqiiqooyinka dacwada kiis gaar ah oo la isku haysto.

(4) Wakiillada midawga waa inay akhriyaan ayna la qabsadaan Xeerka Anshaxa ee Wakiillada Aan Qareenka Ahayn ee Dhageysiyada Maamulka, kuwaasoo ay hayso Waaxda Cadaalada ee Oregon lagana heli karo webseedkeeda oo ah: https://www.doj.state.or.us/wp-content/uploads/2017/06/code_of_conduct_oah_contested.pdf wax laga badelay Oktoobar 1, 2011).

(5) Haddii garsooraha sharciga maamulku uu go'aansho in bayaannada ama diidmooyinka ka yimaada wakiilka midawga ee ku jira qaybta (1) ee xeerkaan ay quseeyaan dood sharci ah sida lagu qeexay xeerkaan, garsooraha sharciga maamulka waa inuu siiyaa fursad macquul ah oo qareen lagu siinaayo adeeg bixiyaha si uu u soo xaadiro uuna keeno dood dhagaysiga ama uu gudbiyo dood sharci ah oo qoraal ah wakhti macquul ah gudihiis kadib marka lasoo gabo gabeeyo dhagaysiga.

(6) Wakiilka midawga shaqaaluhu waa inuu helaa uuna siiyaa CCLD iyo Xafiiska Dhagaysiyada Maamulka (OAH) ogolaanshaha qoraalka ah ee adeeg bixiyaha si uu u matalo wakiilka midawga shaqaalaha kahor inta uusan bilaabin matalidda ama uu u sheegaa CCLD ama OAH asagoo wakiil ka ah adeeg bixiyaha kiiska la isku haysto.

(7) Matalaada la ogolaaday ee wakiilka midawga shaqaalaha ee adeeg bixiye ku jira dhageysi waxaa ku jiri kara shaqooyinka lagu qeexay qaybta (3) ee xeerkaan iyo:

(a) La hadlida CCLD asagoo uusan la joogin adeeg bixiyuhu uuna kala hadlo arimaha habraaca ayna ku jirto laakiin kuma koobna mudeynta;

(b) Ka caawinta adeeg bixiyaha diyaarinta iyo gudbinta cadeymaha lasoo bandhigay iyo liiska marqaatiyaasha;

(c) Gudbinta kara shuruudaha xogta;

(d) Aqbalaada ama diidmada adeegsiga cadeynta ayadoo lagu saleynaayo qusaynta kiiska; ama

(e) In uu la joogo adeeg bixiyaha inta lagu jiro wada hadallada heshiis kasta, ayna ku jirto inuu ka qaybgalo taleefanka ama shirka muuqaalka ah.

(8) Matalaada la ogolaaday ee wakiilka midawga shaqaalaha ee adeeg bixiye ku jira dhagaysi kuma jiri karaan:

(a) Gelista heshiis sharci ah asagoo wakiil ka ah adeeg bixiyaha;

(b) Bixinta amarka u yeerista marqaati si uu u yimaado dhagaysiga.

(A) Haddii adeeg bixiye go'aansado in marqaati uusan doonayn inuu marqaati kaco, adeeg bixiyaha ama wakiilka ogolaanshaha haysta ee midawga shaqaalaha ayaa codsan karan in CCLD ay amarto in marqaati yimaado asagoo u gudbinaaya codsiga qoran oo ay ku jirto magaca, lambarka taleefanka, ciwaanka xarunta, iyo qeexitaanka marqaati kaca la filaayo una diraaya CCLD ugu danbayn 30 maalmood kahor taariikhda la mudeeyay kulanka.

(B) CCLD ayaan laga doonayn inay amarto marqaatiyaasha ayadoo wakiil ka ah ilaa in CCLD aqbasho maahee in marqaati kaca marqaatigu muhiim u yahay dhagaysi buuxa oo cadaalad ah.

(C) CCLD ayaan laga doonayn inay amarto u yeerista marqaatiyaasha ayadoo wakiil ka ah adeeg bixiyaha si loo sameeyo dhagaysi ku saabsan amar degdeg ah oo xayiraaya ruqsada ama diiwaan gelinta Diiwaanka Dhexe ee Shaqsiyadda ama saaraysa shardi ruqsad.

(D) CCLD ayaa u sheegi doonta adeeg bixiyaha ama wakiilka midawga shaqaalaha ee ogolaanshaha haysta in ay bixinayso amar u yeerid sida ku cad codsiga 10 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood marka lasoo gudbiyo codsiga.

(E) Haddii CCLD aysan aqbalin inay amarto u yeerista marqaatiga sida la codsaday ee waafaqsan farqad hoosaadkaan, adeeg bixiyaha ayaa raadsan kara qareen si uu ugu matalo dhageysiga uuna soo saaro amarka u yeerista.

(9) Adeeg bixiye ah uu matalaayo qareen oo ku jira dhagaysi dacwadeed ayaan isla markaas matalaad ka heli karin wakiilka midawga shaqaalaha ee idman, ogeysiiska matalaada qareenka ayaana noqonaaya cadeynta in meesha laga saaraayo ogolaansho kasta oo la siiyay wakiilka midawga shaqaalaha si uu u matalo adeeg bixiyaha.

(10) Qaybaha (3) ilaa (8) ee xeerkaan ayaa qusayn qareen soo xaadiray asagoo ah wakiilka adeeg bixiyaha ku jira kiis dacwadeed lana horkeenay CCLD ama Waaxda.